# Dib-u-eegidda Xiliyeedka Caalamiga ah

UNPOS

United Nations Political Office for Somalia

# DIB-U-EEGIS XILIYEEDKA CAALAMIGA AH

UNITED NATIONS POLITICAL OFFICE FOR SOMALIA (UNPOS)

UNPOS

United Nations Political Office for Somalia

# Arar

Dib-u-eegidda Caalamiga ah ee Marxaladlaha ah (UPR) waa hanaan wax la mid ah aan la arag oo dib loogu eego xaaladda xuquuqda aadanaha ee dhammaan 193ka dal ee xubnaha ka ah Qaramada Midoobay afartii sannaba mar. UPR waa hanaan ay dowladuhu horseed ka yihiin, waxaana abuuray Golaha Loo Dhanyahay ee Qaramada Midoobay, wuxuuna hoos tagaa Golaha Xuquuqda Aadanaha (HRC), kaasoo dowlad weliba fursad u siinaya inay ku dhawaaqaan tallaabooyinka ay qaadeen si ay u hagaajiyaan xaaladda xuquuqda aadanaha ee ka jirta waddamadooda iyo si ay u fuliyaan waajibaadka ka saran xuquuqda aadanaha. Hanaanka UPR, oo mid ka mid ah astaamaha Golaha HRC, waxaa loogu talagalay in la xaqiijiyo in waddamada si sinaan ah loo la dhaqmo marka la qiimeynayo xaaladda xuquuqda aadanaha ee dalalkooda. Ujeeddada ugu danbeysa ee laga leeyahay hanaankan cusub waa in sare loo qaado xaaladda xuquuqda aadanaha ee dalalka oo dhan iyo in wax laga qabto ku xadgudubyada xuquuqda aadanaha meel kasta oo ay ka dhacaanba.

Soomaalia waxay ka qaybqaadatay Dib-u-eegidda Caalamiga ah ee Marxaladlaha ah (UPR) oo dhacay intii lagu gudajiray sannadkii 2011. Dowladda Soomaaliya waxay bishii May Golaha HRC u soo bandhigtay warbixinteeda qaran ee la xiriirta xaaladda xuquuqda aadanaha ee ka jirta Soomaaliya.Waddamada xubnaha ka ah Qaramada Midoobay ee dib-u-eegidda ka qaybgalaya ayaa ka dooday soona jeediyay talooyin si loo hagaajiyo xaaladda xuquuqda aadanaha ee ka jirta Soomaaliya. Waxayna go'aankooda ku saleeyeen xogta warbixinta ku qoran, iyo weliba xogta laga helay dhinacyada ay arrintu khuseyso, xogta la ururiyay ee Qaramada Midoobay iyo xogta laga helay ilaha kale.

Waxaa la soo saaray talooyin gaaraya 155, oo isugu jira kuwo la xiriira ansaxinta heshiisyada xuquuqda aadanaha, sameynta iyo xoojinta hanaanka sharci ee hay'adaha maamulka ee lagu ilaaliyo xuquuqda aadanaha, dhowridda sharciga caalamiga ee dagaallada, sharciga iyo kala danbeynta iyo la dagaallanka isla xisaabtan la'aanta, iyo kordhinta ilaalinta xuquuqda carruurta, dadka laxaadka la' ama naafada ah, dadka da'da ah, dadka barakacayaasha ah iyo haweenka, iyo kuwo kaleba.

Dowladda Federaalka Ku Meelgaarka ee Soomaaliya waxay ogolaatay dhammaan talooyinkaas, si buuxda ama qaar ka mid ah, taasoo saameynteedu ay tahay in talooyinkan ka soo baxay dibueegidda ay hadda yihiin kuwo dhammeystira heshiisyada xuquuqda aadanada ee ay Soomaaliya xubin ka tahay si hore loogu sii wado xuquuqda aadanaha ee dalka.

# Tusmada


| | Tuducyada | Bogga |
|---|---|---|
| | Warbixin qarameedka la soo gudbiyay iyadoo la raacayo tuduca 15 (a) ee lifaaqa go'aanka Golaha Xuquuqda Aadanaha 5/1 Somalia | 1 |
| | Kulmin uu diyaariyay Xafiiska Ergeyga Sare ee Xuquuqda Aadanaha iyadoola raacayo tuduca 15 (b) ee lifaaqa go'aanka Golaha Xuquuqda Aadanaha 5/1 | 21 |
| | Koobis uu diyaariyay Xafiiska Ergayga Sare ee Xuquuqda Aadanaha Iyadoo la raacayo tuduca 15 (c) ee lifaaqa go'aanka Golaha Xuquuqda Aadanaha 5/1 Somalia | 38 |
| | Warbixinta Koox Hawleedka ee Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalmaiga ah Somalia | 57 |
| | Tixgelinta ay Dawladda Soomaaliya siisay 155kii Talo ee loo soo Jeediyay | 86 |
| | Go'aanka | 110 |

# Warbixin qarameedka la soo gudbiyay iyadoo la raacayo tuduca 15 (a) ee lifaaqa go'aanka Golaha Xuquuqda Aadanaha 5/1 Somalia

**A/HRC/WG.6/11/SOM/1**

**Golaha Xuquuqda Aadanaha**

**Koox Hawleedka Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalamiga ah**

**Kalfadhiga kow iyo tobnaad**

**Geneva, 2–13 May 2011**

## Cutubyada


*Tudducyada* ............................................................ *Bogga*

**I. Manhajka iyo diyaarinta warbixinta** .................................... **3**

**II. Macluumaadka dahsoon, halbeegga iyo qaab-dhismeedka haya'daha xuquuqda aadanaha** .................................... **4**

**A. Macluumaadka dahsoon** .................................... **4**

**B. Qaab-dhismeedka qaanuuniga ah ee lagu ilaaliyo xuquuqda aadanaha** .................................... **7**

1. Gogoldhigga Federaalka ku Meelgaarka GFKMG (TFC) .................................... 7

2. Xeer ilaalinta .................................... 7

3. Golaha xeer-dejinta .................................... 8

4. Habka dastuur-dejinta .................................... 8

**C. Heshiisyo goboleedka iyo kuwa caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha** .................................... **9**

1. Xuquuqda Aadanaha .................................... 9

2. Sharciga caalamiga ee bani'aadamnimada .................................... 10

3. Heshiisyo goboleedka .................................... 10

**III. Taabbagelinta iyo ilaalinta xuquuqda aadanaha** .................................... **11**

**A. Xuquuqaha rayidka iyo kuwa siyaasadeed** .................................... **11**

1. Xuquuqaha nolosha, xornimada qofka iyo ammaanka .................................... 11

2. Xukunka dilka ........ 12
3. Gudniinka Dumarka ee Fircooniga (FGM) ........ 12
4. Xorriyadda saxaafadda iyo muujinta (ra'yiga) ........ 12
**B. Xuquuqaha dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka ........ 13**
1. Xaqa cuntada ........ 13
2. Xaqa caafimaadka ........ 13
3. Xaqa waxbarashada ........ 14
4. Xuquuqda naafada ........ 14
5. Barakacayaasha ........ 15
6. Dadka laga tirada badan yahay ........ 15
7. Wacyigelinta guud ee xuquuqda aadanaha ........ 15
**IV. Sharciga caalamiga ee bani'aadamnimada ........ 15**
**V. Carruurta askarta ah ........ 16**
**VI. Musiibooyinkii horay u dhacay, caddaaladda iyo dib-u-heshiisiinta ........ 17**
**VII. Caqabadaha iyo seetooyinka ........ 18**
**VIII. Mudnaanta, is-xilqaanka iyo ballanqaadyada ........ 18**
**IX. Taageerada farsamo ee loo baahan yahay ........ 19**

# I. MANHAJKA IYO DIYAARINTA WARBIXNTA

1. Dawladda Federaalka ku Meelgaaraka ah (DKMG) ee Jamhuuriyadda Soomaaliya, iyadoo hirgelinaysa go'aankii 60/251 ee Golaha Guud ee la dhaqangeliyay 15 March 2006, oo raccaysa wareegtada guud ee diyaarinta macluumaadka oo ku soo baxday magaca Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalimga ah (go'aanka Golaha Xuquuqda Aadanaha ee 6/102, soo baxay 27 September 2007), ayay diyaarisay Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalimga ah DXC (UPR) ee xilligeedu taagan yahay.

2. Markii uu dhammaaday kulan-hawleedkii -DXC- (UPR) ee lagu qabtay Djibouti 15–17 February 2011, oo uu soo qabanqaabiyay Xafiiska Ergayga Sare ee Xuquuqda Aadanaha (OHCHR) iyo Xafiiska Qarammada Midoobay ee Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS) ayay DKMG oo kaashaneysa Jamhuuriyadda Djibouti iyo Italy, asaastay Guddi Hawleedka DXC (UPR) oo ka kooban Xafiiska Ra'iisalwasaaraha iyo wasaaradaha Arrimaha Gudaha; Caddaaladda; Haweenka iyo Arrimaha Qoyska; Arrimaha Diinta; Caafimaadka; Waxbarashada; Gaashaandhigga; Arrimaha Bulshada, Shaqada, Ciyaaraha, Dhallinyarada iyo Dhaqanka oo hoos imaanaya ku Xigeenka Ra'iisalwasaaraha ahna Wasiirka Qorsheynta iyo Xiriirka Caalamiga ah Prof. Abdiweli Mohamed Ali. Guddi Hawleedka waxaa laga dhex sameeyay koox farsamo oo loo xilsaaray diyaarinta warbixinta.

3. Koobnaanta awooddooda warbixineed iyo waayoaragnimada ay u leeyihiin DKMG awgeed, ayaa kooxda warbixnta diyaarisay waxaa si aad ah hawsha uga caawiyay Omar Abdulle Alasow oo ku xeeldheer arrimaha Soomaaliya ahna la taliye madaxbannaan oo dhanka xuquuqda aadanaha caalamiga ah, iyadoo maalgelintu ay ka timid Xafiiska Ergayga Sare ee Qarammada Midoobay u qaabilsan Xuquuqda Aadanaha (OHCHR).

4. Guddi Hawleedka DXC (UPR) waxay 6dii March 2010, magaalada Muqdisho wadatashiyo kula yeesheen ururrada bulshada rayidka ah ee ka shaqeeya dhinaca xuquuqda aadanaha. Inkastoo DKMG ay rabtay in wadatashiga la sii ballaariyo oo lagu daro maamul goboleedyada Somaliland iyo Puntland, haddana taasi ma dhicin sababo la xiriira waqtiga iyo saadka oo koobnaa iyo Somaliland oo aan go'aan cad ka qaadan ka qaybgalka wadatashiga.

5. Dawladda Soomaaliya waxay si aad ah ugu mahadnaqaysaa Xeeldheeraha Madaxabannaan ee xaaladda xuquuqda aadanaha Soomaaliya Dr. Shamsul Bari sidii hufnaanta iyo maddaalenimada ahayd oo uu ugu dadaalay kor u qaadista iyo taabbagelinta xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya.

6. DKMG waxay soo dhoweynaysaa natiijadii ka soo baxday u kuurgalkii uu Soomaaliya ku sameeyay Wakiilka Xoghayaha Guud ee Qarammada Midoobay u qaabilsan xuquuqda aadanha ee barakacayaasha (IDPs) Prof. Walter Kälin. DKMG waxy kaloo soo dhoweynaysaa booqashadii ay Soomaaliya ku timd Wakiilka Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qarammada Midoobay u qaabilsan Carruurta iyo Colaadaha Hubeysan Madame Radhika Coomaraswamy.

7. Warbixintaani ma suurogasheen dadaalka dheeraadka ah ee Safiirka Jamhuuriyadda Soomaaliya Mudane Yusuf Mohamed Ismail Bari-Bari la'aantiis. Dawladdu si kal iyo laab ah ayay uga mahad celineysaa shaqooyinkii adkaa ee uu qabtay iyo sida dhabta ah ee ay uga go'an tahay inuu dalka shaqeeyo.

# II. MACLUUMAADKA DAHSOON, HALBEEGGA IYO QAAB-DHISMEEDKA HAYA'DAHA XUQUUQDA AADANAHA

## A. Macluumaadka dahsoon

8. In la fahmo xaaladda Soomaaliya iyo dhibaatada siyaasadeed ee ay soo martay muddadii labaatanka sano kor u dhaaftay ayaa ka horreeysa wadaxaajood kasta oo macno ku fadhiya oo laga yeesho xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya iyo caqabadaha hor yaalla.

9. Soomaaliya waxay dhacdaa goob istaraatiiji ah oo Bariga Afrika ah iyadoo Bariga ay ka xigto Badweynta Hindiya, xudduudo caalami ahna la wadaagta Kenya, Ethiopia, iyo Djibouti, waxayna ku beegan tahay Jamhuuriyadda Yemen. Dhul ahaan, bedka Soomaaliya waxaa lagu qiyaasaa 637,657 km oo isku wareeg ah. Marka laga reebo xiriirka ay la leedahay dalalka kale ee Afrika, Soomaaliya waxay kaloo xiriir adag oo soo jireen ah la leedahay dunida Carabta.

Sida laga soo xigtay Xafiiska Tirokoobka ee Maraykanka, tirada guud ee dadka Soomaaliya ku nool waa 10,112,453.

Inkastoo guud ahaan, Soomaaliya loo aqoonsan yahay bulsho isku diin, dhaqan iyo afba ah, haddana waxaa jira qawmiyado iyo dad kale oo laga tiro badan yahay oo maadaama aan tirokoob rasmi ahi jirin aan tiradooda dhabta ah la ogaan karin.

10. Soomaaliya waxay xornimadeeda qaadatay 1da July 1960, waxayna la baxday magaca Jamhuuriyadda Soomaaliya ka dib markii ay midoobeen labadii gobol ee British Somaliland Protectorate iyo Italian-administered Trusteeship Territory of Somalia. Markii ay xornimada qaadatay, nidaamka Jamhuuriyadda Soomaaliya wuxuu ahaa dimuqraadiyad dastuuri ah oo xuquuqo kooban leh iyo xukuumad rayid ah oo ku saleysan awoodaha laamaha sharci dejinta, fulinta iyo xeer ilaalinta oo kala baxsan.

11. Intii u dhexeysay 1960 ilaa 1969kii, Soomaaliya waxaa xukunka u hayay xukuumado rayid ah oo si dimuqraadi ah lagu doortay. Labo xukuumadood oo dimuqraadiyad lagu doortay ayaa Soomaaliya isaga dambeeyay intii u dhexeysay 1960 ilaa 1968kii. Sida dhabta ah, bishii June 10keedii 1967, madaxweynihii hore ee Soomaaliya Dr. Adan Abdulle Osman wuxuu noqday hoggaamiyihii ugu horreeyay oo Afrikaan ah oo si nabadgelyo ah xukunka ugu wareejiya hoggaamiye si dimuqraadiyad ah lagu soo doortay. Madaxweynihii labaad ee Soomaaliya Dr. Abdirashid Ali Sharmarke waxaa si shirqool ah loogu toogtay 15kii October 1969.

12. Nidaamkii dimuqraadiga ahaa waxaa la laalay sannadkii 1969 markii Sarreeye Gaas Mohamed Siyad

Barre uu 21kii October 1969 xukunka kula wareegay inqilaab askareed uuna sameeyay nidaam siyaasadeed oo hantiwadaag ku dhisan oo hoos yimaada xukun askareed oo iasguna dhacay sannadkii 1991 ka dib markuu dalka 21 sano xukumayay.

13. Sannadihii hore ee xukunka askarta waxaa lagu tallaabsaday siyaasado horumarineed oo bulshada isbeddel wanaagsan u horseeday. Waxaa la dhisay adeegyada dadweynaha oo ay ka mid yihiin iskuullo, xarumo caafimaad iyo waddooyin, waxaana miyi iyo magaalaba laga laga hirgeliyay olole qaran oo wax qoris/akhris la'aanta lagula dirarayo ka dib markii la qoray fartii Soomaaliga. Waxaa kaloo la hirgeliyay isbeddello wanaagsan oo dhinaca qaanuunka ah iyadoo kor loo soo qaaday heerarka haweenka iyo dadka laga tirada badan yahay. Si kastase ha ahaatee, waxaa dhinaca kale xukunka askarta astaan u noqotay xadgudubyo halis ah oo la xiriira xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamaiga ah ee bani'aadamnimada oo laga galo dadka ka soo jeeda qabiillada mucaaradka ah.

14. Mamnuucista xuquuqaha asaasiga ah ee aadanaha iyo xukummada qabiilka ku salaysan ayaa abuurtay xaalad aan loo adkaysan karin oo lamahuraan ka dhigtay in gacanta la isula tago. Nidaamka askarta waxaa hareeyay kacdoon shacbi oo dalka oo dhan ku baahay, kaasoo keenay in dawladdu ay dhacdo bishii January 1991. Laga soo bilaabo muddadaas, Soomaaliya waxay hoy u noqotay dagaal sokeeye oo daba dheeraaday oo mar qabooba marna kululaada astaantiisuna noqotay arxan darrada dadka rayidka ah lagula kacayo.

15. Awooddii dawladda dhexe way burburtay, waxaana booskeedii galay maamullo qabiil ku salaysan oo xukuma aagag kooban, marmarka qaarkoodna aagaggaas isku qabsada. Sannadkii 1991, waxaa laga sameeyay woqooyi galbeed Soomaaliya xukuumadda Somaliland, 1998na waxaa la dhisay ismaamul goboleedka federaaliga ah ee Puntland. Halka ay Somaliland caddeysay inay doonayso inay goosato, Soomaalida kale oo dhan oo ay ku jiraan gobollo Somaliland ka tirsan iyo Puntland kuma qanacsana goosashada ee waxay taageersan yihiin midnimada, sharafta iyo madaxbannaanida Soomaaliya.

16. Labaatankii sano ee la soo dhaafay, Soomaaliya oo dhan waxaa loo aqoonsaday dawlad dhacday oo astaanteedu noqotay burbur xoog leh oo ku yimid dhammaan adeegyadii asaasiga ahaa iyo dhismihii dawladnimo oo ay ku jiraan haya'dihii xeer beegista (booliska, maxkamadaha iyo asluubta). Sida dhabta ah xaaladda xuquuqda aadanuhu intaas oo dhan way ka sii qalafsan tahay oo ka dhinacyo badan tahay.

17. Xasillooni ilaa heer ah ayaa ka jirta Somaliland iyo Puntland, taasoo oggolaatay in horumar cayiman laga sameeyo dhinaca xuquuqda aadanaha. Arrintaan waxaa sababteeda weyn iska leh qabiillada degaanka ee waaweyn oo u adeegsaday awoodda hoggaamiyayaal dhaqameedka la ixtiraamo dardargelinta dib-u-heshiisiinta, halka gobollada bartmaha iyo kuwa koonfureed ay dagaal-oogayaashu u adeegsadeen odayaal dhaqameedyada madashii ay xukunka ku haysan lahaayeen.

18. Colaadaha hubeysan ee aan dhammaadka lahayni waxay keeneen inay gebi ahaanba burburaan hantidii iyo kaaabadihii asaasiga ahaa ee koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya. Halkaasna waxaa ku lumay wixii horumar ahaa ee la sameeyay tan iyo markii xornimada la qaatay ee la dhisay qaran mideysan, waxaa kaloo meesha ka baxay xeer beegistii, dadweynuhuna waxay dib ugu noqdeen xeer dhaqameedkoodii hore iyagoo soo hoos galay qabiilladii ay ka soo jeedeen.

19. Si kastase ha ahaatee, marka dhinaca kale laga eego, qaab-dhismeedkii iyo haya'dihii soo jireenka ahaa oo ku shaqeyn jiray qaraabada, xididka iyo hab maamuuska bulsho (Xeer) ee ilaalin jiray wadajirka beelaha ayaa waxaa wiiqay soo bixitaankii nidaamka casriga ah ee dawladda dhexe. Sidaa awgeed, ayaa markii haya'dihii casriga ahaa ay burbureen oo meesha ka bexeen, ay kuwii dhaqankuna kaalintoodii hore u qaadan kari waayeen.

20. Arrintaan macneheedu waa in dib loo dhiso nidaam dawladeed oo aan ilaalinta xuquuqda iyo sharafta aadanuhu ka dhex muuqan doonin. Sida dhabta ah, ilaalinta xuquuqda aadanuhu waxay ku xiran tahay xeer beegista, helista dawlad furan oo lala xisaabtami karo iyo dhisidda kaabadihii bulshada, nidaamka waxbarashada, haya'daha guud, booliska, ciidanka qalabka sida, maxkamadaha iyo ciidanka asluubta. Hirgelinta nidaam lagu dhisayo dawlad wanaagsan oo waarta oo nabad horseedda waa lagamamaarmman. Sida dhabta ah, caqabadda ugu weyn ee Dawladda Soomaaliyeed hor taalla waa sidii la isula fal-gelin lahaa xeer dhaqameedka iyo dawladnimada casriga ah, mid ka mid ah udub dhexaadyada arrintaanina waa isku dhafka sharciga saxda ah ee Islaamka, xeer dhaqameedka Soomaalida iyo sharciga casriga ah.

21. Laga soo bilaabo 1991kii, dhawr isku day oo xasilloonida iyo xukunka dhexe lagu soo celinayay ayaa fashilmay. 2004tii ayay Soomaalidu isla oggolaatay Gogoldhigga Federaalka ku Meelgaarka (Transitional Federal Charter - TFC) oo ka dhashay wadahadal nabadeed oo uu soo qabanqaabiyay urur goboleedka (IGAD) oo lagu qabtay Kenya 2002 – 2004. Sidii ay Soomaaliya ugu soo guurtay sannadkii 2005, ilaa hadda DKMG waxaa haysta diidmo kaga imaaneysa kooxaha hubeysan.

22. 29kii December 2008, waxaa is casilay Madaxweyne Abdullahi Yusuf oo 10kii October 2004 lagu doortay Kenya. Is casilaaddaas ka dib, ayaa Baarlammanka Federaalka ku Meelgaark ah oo markiisii hore ka koobnaa 275 XDH oo matalaya afarta qabiil ee Soomaaliya ugu waaweyn oo midkiiba la siiyay 61 kursi halka qabiillada yaryarna la siiyay 31 kursi, la kordhiyay oo laga dhigay 550 kursi iyadoo lagu daray 200 oo kursi oo la siiyay Ururka Dib-u-xoreynta Soomaaliya (ARS) ka dib wadahadallo ay Qarammada Midoobay u qabatay DKMG iyo ARSta. Mudane Sheikh Sharif Sheikh Ahmed ayaa loo doortay Madaxweynaha Dawladda ku Meelgaarka ah ee Soomaaliya.

23. Xaaladda Soomaaliya kuma haboona nidaamka guud ee Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalimga ah -DXC- (UPR) maadaama ay DXC (UPR) sida caadiga ah dib u eegto xogaha xuquuqda aadanaha ee dawlada ku jirta xaalad caadi ah. Xaalka Soomaaliya sidaas waa ka duwan yahay, DKMG ahi waa inay wax ka qabataa xadgudubyo maalin kasta xuquuqda aadanaha laga galo oo aysan iyadu masuu'l ka aheyn. Arrintaasna waxaa sabab u ah iyadoo aysan DKMG ahi weli xukunkeeda ku baahin meelaha ay xadgudubyadaasi ka dhacayaan iyo xadgudbayaasha oo adeegsada xeelado ay ku carqaladeeyaan tallaabo kasta oo xukun dhexe lagu dhisayo.

24. Awoodda ay DKMG u leedahay inay muwaadiniinteeda ilaaliso way kooban tahay, gaar ahaan kuwa jooga goobaha xukunkeeda tooska ah ka baxsan. Tusaale ahaan dadka ku nool goobaha ay Al-shabaab ka taliso waxay la kulmaan xadgudubyo waaweyn oo xuquuqda aadanaha ka dhan ah oo ay ka mid yihiin dil oo aan maxkamad la marin, jir-dil iyo ciqaabo kale oo liita, baniaa'damnimadana ka baxsan sida gacan/lug gooynta iyo karbaashka.

25. Dawladda waxaa ka go'an inay waajibaadka saaran ka gudato goobaha xukunkeeda hoos yimaada, hase yeeshee waxaa dhibaato ka haysataa duqeynta aan kala joogsiga lahayn iyo is qarxinta kaga imaanaysa dhinaca fallaagada. Sidaa awgeed, warbixintaani waxay xoogga saareysaa caqabadaha hor yaalla DKMG, dadaalka ay ugu jirto ka gudbista caqabadahaas iyo meelaha ay rabto in beeshacaalamku ay ka gargaaraan.

26. Marka si guud loo fiiriyo, meesha muhiimka ah ee ay Dawladdu is leedahay waad ka buuxin kartaa qaar ka mid ah shuruudaha guud ee DXC (UPR) waxay noqon kartaa dhinaca qaab-dhismeedka qaanuun ee ilaalinta xuquuqda aadanaha.

## B. Qaab-dhismeedka qaanuuniga ah ee lagu ilaaliyo xuquuqda aadanaha

### *1. Gogoldhigga Federaalka ku Meelgaarka GFKMG (TFC)*

27. Cutubka 5aad ee Gogoldhigga Federaalka ku Meelgaarka GFKMG (TFC) oo ka dhashay shir nabadeed uu soo qabanqaabiyay urur goboleedka (IGAD) 2002 – 2004 oo ay martigelisay Kenya, ayaa qeexaya ilaalinta xuquuqaha iyo xorriyadaha asaasiga ah ee ummadda Soomaaliyeed. Qodobka 14aad wuxuu leeyahay Jamhuuriyadda Soomaaliya waxay aqoonsan doontaa oo hirgelin doontaa dhammaan heshiisyada iyo mucaahadooyinka caalamiga ah ee ay Jamhuuriyaddu qaybta ka tahay.1

28. GFKMG (TFC) wuxuu dammaanad qaadayaa xuquuqaha in qofku: si xornimo ah u deggenaado, uga sahqeysto oo ugu safro meel kasta oo dalka ka mid ah; dhiso, qayb ka noqdo urur siyaasadeed, shaqaale, xirfadeed ama bulsho oo sharciga waafaqsan; uu codkiisa dhiibto markuu gaaro 18 sano; oo u tartamo kursi kasta oo bannaan. Gogoldhiggu wuxuu mamnuucayaa in qofka xiriirradiisa la farogeliyo.3 wuxuuna dammaanad qaadayaa arrimaha ay ka midka yihiin u sinnaanta sharciga loo siman yahay.4 xaqa nolosha, xorriyadda qofka iyo ammaankiisa,5 xuquuqda la xiriirta dacwooyinka,6 shaqada, xaqa isu imaadka iyo xorriyadda shaqo joojinta,8 xorriyadda macluumaadka iyo warbaahinta,9 xaqa asaasidda xisbiyada siyaasadda,10 iyo xaqa asaasidda ururrada bulshada,11 magangelyada siyaasadda,12 waxbarashada,13 ilaalinta qoyska,14 isbahaysiga bulshada.15

### *2. Xeer ilaalinta*

29. Cutubka 9aad ee GFKMG (TFC) wuxuu qeexayaa heerka iyo awoodaha xeer ilaalinta federaalka. GFKMG (TFC) wuxuu aqoonsan yahay madaxbannaanida xeer ilaalinta marka ay waajibkeeda gudaneyso iyo kala saaridda awoodaha laamaha Dawladda ee xeer ilaalinta,

xeer dejinta iyo fulinta. Xubnaha xeer ilaalintu sharciga oo kaliya ayay u hoggansamayaan .16. Golaha Adeegga Maxkamadaha ayaa hagaya siyaasadda iyo maamulka xeer ilaalinta.17

### *3. Golaha xeer-dejinta*

30. Baarlamaanka Federaalka ku Meelgaarka ah BFKMG (TFP) wuxuu leeyahay awoodo xeer dejin. Wuxuuna ka kooban yahay 550 xubnood oo matalaya qabiillada Soomaaliya. Marka la eego dhinaca xuquuqda aadanaha, Baarlamaanku wuxuu sameeyay ergooyinka ay ka midka yihiin: ergada dastuurka federaaliga; ergada dib-u-heshiisiinta qaran; ergada qaran ee raadinta iyo diiwaangelinta hantida guud iyo midda gaar; ergada hub ka dhigista iyo hawlgelinta; ergada dib u soo nooleynta dhaqaalaha; ergada isku qabsiga dhulalka iyo hantida; ergada dib-u-dejinta qaran iyo ergada Olimbikada Soomaaliya.

31. Qodobka 71aad ee GFKMG (TFC) wuxuu dhigayaa in Gogoldhiggu uu yeelan doono raad qaanuun oo ku xiran dhaqangelinta Dastuurka Qaran ee Federaalka ee kama dambeysta ah iyo in Dastuurka Soomaaliya ee 1960 iyo sharciyada kale ee qaranka la raacayo wax kasta oo aan Gogoldhiggaan lagu sheegin ama aan la socon karin.

32. Inkasta oo ay haya'dahaani jiraan haddana waa taag daran yihiin si habsami ahna uma shaqeeyaan, sababta ugu weyn oo taag darrada keentayna waa dagaallada socda. Dawladdu waxay dadaal ugu jirtaa sidii ay u dhisi lahayd haya'daheeda, kartideeda, maamulladeeda iyo kaabaadka asaasiga ah. Tusaale ahaan, dawladdu waxay aad u ballaarisay canshuur ururinta waxayna sameysay xoogag la dagaallama musuqmaasuqa.

33. Dawladdu waxay ballaarisay adeegyada dadweynaha oo ay ku jiraan hagaajinta ammaanka dadweynaha, dhisidda iyo hagajinta xarummo cusub oo caafimaad, waxbarasho, nalalka waddooyinka iyo ururinta qashinka. Taliyayaasha musuqmaasuqa lagu soo eedeeyayna waa laga cayriyay shaqaadii ay ciidammada ammaanka ka hayeen.

34. Qarammada Midoobay waxay ku deeqeen xeeldheerayaal dhinaca farsamada ah, tageero dhaqaale oo ay siiyaan qaar wasaaradaha DKMG ka mid ah oo ay u horreeyaan Wasaaradda Maaliyadda, hawlaha Guud, Arrimaha Gudaha iyo weliba maamulka gobolka Benaadir. Haya'daha Qarammada Midoobay waxay kaloo dib u dhis iyo qalabayn ku wadaan wasaaradda Cadaaladda iyo Wasaaradda Maaliyadda.

### *4. Habka dastuur-dejinta*

35. Qodobka 71 (7) ee GFKMG wuxuu leeyahay waa in Dastuur Federaal oo cusub lagu dejiyaa muddo labo sano iyo bar ah oo laga soo bilaabo marka la dhiso Guddiga Dastuurka Federaalka ee Madaxabannaan (IFCC), laguna dhaqangeliyaa afti dadweyne oo la sameeyo sannadaha ugu dambeeya ee ku meelgaarka. Dastuurkaan Federaaliga ahi waa inuu ku saleysan yahay GFKMG oo uu xaqiijiyaa in federaalka la gaaro inta muddadaas lagu jiro.

36. Soomaaliya waxay dejinta dastuurkeeda bilowday xilli aad iyo aad u adag. Dawladdu way ogsoon tahay in dalku si degdeg ah ugu baahan yahay dastuur mabaadii'da Islaamka ku saleysan.

37. Guddiga Dastuurka Federaalka ee Madaxabannaan (IFCC) ee la asaasay bishii June 2006, waxaa la saaray xil adag oo ah inay Soomaaliya dastuur u dejiyaan. Guddigu wuxuu hawshaan ka faroxashay 30kii June 2010 markaasoo uu soo saaray Qabyo Qoraalka Dastuurka Wadatashiga loogu talogalay QQD (CDC), hase yeeshee uma suurtogelin inay dadweynaha la tashadaan ka hor inta aysan soo saarin Qabyo Qoraalka Dastuurka QQD (CDC). Sidaa awgeed QQD looma soo saarin inuu noqdo mid kama dambeys ah oo ay tahay in dadweynuhu ay go'aan ka gaaraan.

38. Inkasta oo dhaqaale badan ay beeshacaalamku ku bixisay, haddana goldaloollo badan ayaa ka muuqda QQD. Dastuurku ma faahfaahinayo waxyaabaha muhiimka ah ee ku meelgaarku uu ka kooban yahay sida; federaalka, nidaamka xukuumadda, qaabka dawladda iyo barnaamij siyaasadeedka lagu soconayo marka ku meelgaarku dhammaado. Dawladda waxaa ka go'an inay dastuurka dejiso. Si kastase ha ahaatee, in lagu guuleysto dastuur dejinta waxaa laf-dhabar u ah ka qaybgelinta dadweynaha Soomaaliyeed.

39. Dawladda waxaa ka go'an in inta aan Dastuurka la dhammeyn lagu daro dhammaan mabaadii'da asaasiga ah ee xuquuqda aadanaha

## C. Heshiisyo goboleedka iyo kuwa caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha

### *1. Xuquuqda aadanaha*

40. Soomaliya waxay saxiixday heshiisyada xuquuqda aadanaha caalamiga ah ee soo socda:

- Mucaahadada Caalamiga ah ee Xuquuqaha Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka;
- Mucaahadada Caalamiga ah ee Xuqquaha Rayidka iyo kuwa Siyaasadeed;
- Mucaahadada Caalamiga ah ee Ciribtirka Dhammaan Takoorka Isirka ku saleysan;
- Mucaahadada Mamnuucista Macaamilka ama Ciqaabta Jir-dilka iyo Xaasidnimada ah ee Bani'aadamnimada ka baxsan ama Liidata;
- Mucaahadada 1951 ee la xiriirta Xaaladda Qaxootiga iyo Borotokoolkeeda 1967.

41. Soomaliya waxay saxiixday Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha bishii May 2002, Borotokoolkeeda aan Khasabka ahayn ee ka qaybgelinta carruurta colaadaha hubeysanna waxay saxiixday September 2005.

42. Soomaliya waxaysidoo kale ansixisay Mucaahadooyinka Ururka Shaqaalaha Adduunka ee soo socda:

- Mucaahadada Takoorka (Shaqada iyo Shaqaaleynta);
- Mucaahadada Baaritaanka Caafimaad ee Dhallinyarada (Badda);
- Mucaahadada Magdhowga Muruqmaalka (Shilalka);
- Mucaahadada u Sinnaanta (Magdhowga Shilalka);

- Mucaahadada Heshiiska qodobbada Badmaaxyada;
- Mucaahadada Dib-u-dejinta Badmaaxyada;
- Mucaahadada Shaqada la isku Jujuubo;
- Mucaahadada Shaqada Qarsoon ee (Dumarka);
- Mucaahadada Shaqaaleynta Shaqaalaha dhulka loogu yimid;
- Mucaahadada Heshiiska Shaqaaleynta (Shaqaalaha dhulka loogu yimid);
- Mucaahadada Xeerka Ciqaabta ee (Shaqaalaha dhulka loogu yimid);
- Mucaahadada Qodobbada Shaqada (Heshiisyada Guud);
- Mucaahadada Ilaalinta Mushahaaraadka;
- Mucaahadada Ciribtirka Shaqada la isku Jujuubo.

*2. Sharciga caalamiga ee bani'aadamnimada*

43. Soomaaliya waxay kaloo qayb ka tahay 4 Mucaahadooyinka Geneva ee 12ka August 1949 oo kala ah:

- Mucaahadada (I) Baxnaaninta Dhaawaca iyo Bukaanka Ciidammada Qalabka sida ee goobta;
- Mucaahadada (II) Baxnaaninta Dhaawaca iyo Bukaanka iyo kuwa badda ku daatay ee Ciidammada Qalabka sida ee badda. Geneva, 12 August 1949;
- Mucaahadada (III) ee la xiriirta la Dhaqanka Maxaabiista Dagaalka;
- Mucaahadada (IV) ee la xiriirta Ilaalinta Dadka Rayidka ah Waqtiyada Dagaalka.

*3. Heshiisyo goboleedka*

44. Soomaaliya waa dawlad qayb ka ah Gogoldhigga Afrika ee Xuquuqda Aadanaha iyo Dadweynaha. Soomaaliya waxaa kaloo laga sugayaa ballanqaadyadii kale ee la xiriiray xuquuqda aadanaha ee ay la gashay urur goboleedka (IGAD).

45. Ka qayb ahaanshaha mucaahadooyinka caalamiga ah darteed, ayay Dawladdu oggolaatay inay waajib qaanuuni ah ku tahay u hoggaansanka mucaahadooyinkaas. Dawladdu way ka dheregsan tahay in dadweynaha Soomaaliyeed muddo labaatan sano ka badan loo geysanayay xadgudubyo ka dhan ah xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada. Dawladdu waxay daweynaha Soomaaliyeed iyo beeshacaalamkaba u ballanqaadeysaa in marka ay Soomaaliya noqoto dawlad si buuxda u shaqeynaysa oo lugeheeda ku taagan, ay dhisi doonto asaas adag oo lagu fariisiyo xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada (IHL).

46. Si loo xoojiyo ilaalinta xuquuqda aadanaha ee dadweynaha oo dhan iyadoo la marayo xeer ilaalinta dawladda, ayay Dawladdu damacsan tahay inaysan ku ekaan dhaqangelinta heshiisyada ay saxiixday oo kaliya, balse ay dhaqangeliso heshiisyadaan kale ee soo socda:

- Mucaahadada Ciribtirka Dhammaan Qaababka Takoorka ee Haweenka lagula kaco;
- Mucaahadada Xuquuqda Dadka Naafada ah;
- Mucaahadada Xuquuqda Dhammaan Shaqaalaha Muhaajiriinta ah iyo Xubnaha Qoysaskooda;
- Mucaahada Qarammada Midoobay ee Danbiyada Habaysan ee Xuduudaha ka Tallaaba iyo Borotokoolladeeda saddexda ah ee raacsan ee loola jeedo in looga hortago, lagu baabi'yo oo lagu ciqaabo Xambaarista (Tahriibinta) Dadka, gaar ahaan dumarka iyo carruurta, Xambaarista (Tahriibinta) socotada iyo alaabta sharci darrada ah iyo gudbinta hubka iyo saanadda;
- Mucaahadada Xuquuqaha Dadka Naafad ah iyo Borotokoolkeeda aan Khasabka ahayn;
- Borotokool raacsan Mucaahadada Geneva ee 12ka August 1949, ee la xiriira Ilaalinta Dhibbanayaasha Iska horimaadyada Hubeysan ee Caalamiga ah (Borotokool I) 8 June 1977;
- Borotokool raacsan Mucaahadada Geneva ee 12ka August 1949, ee la xiriira Ilaalinta Dhibbanayaasha Iska horimaadyada Hubeysan ee Aan Caalamiga ahayn (Borotokool II) 8 June 1977;

47. Dawladdu waxay beeshacaalamka uga baahan tahay taageeradii ay ku dhaqangelin lahayd mucaahadooyinka kor ku xusan.

# III. TAABBAGELINTA IYO ILAALINTA XUQUUQDA AADANAHA

## A. Xuquuqaha rayidka iyo kuwa siyaasadeed

*1. Xuquuqaha nolosha, xornimada qofka iyo ammaanka*

48. Qodobka 16aad ee ee GFKMG (TFC) wuxuu aqoonsan yahay xaqa nolosha wuxuuna sheegayaa in aan qofna nolshiisa loo qoonsan karin. Si kastase ha ahaatee, xadgudubka xaqa nolosha lagu hayo wuxuu badanaa ka yimaadaa weerarrada ula kaca ah oo aan loo meel dayin ee dadka rayidka ah lagu laayo iyo is qarxinta iyo weerarrada ay Al-Shabaab geystaan. In kasta oo GFKMG (TFC) uu xaqa nolosha u aqoonsan yahay xaq asaasi ah, haddana dagaalka sokeeye ee dabada dheeraaday ayaa burburiyay asaaskii dawladda iyo haya'dihii ammaanka taasoo ka dhigtay wax aad u adag in dawladdu ay ay gudato waajibkii ka saarnaa ilaalinta muwaadiniinteeda.

49. Dawladdu waxay si degdeg ah ugu baahan tahay ciidammo dheeraad ah sida uu dhigayo Go'aanka 1964 ee Golaha Ammaanka ee Qarammada Midoobay ee la isku wada raacay 22kii December 2010. DKMG waxay si degdeg ah ugu baahan tahay inay hawlgeliso cutubyo ciidan injineerro ah si loo abuuro oo loogu shaqeeyo wadiiqooyin bani'aadamnimo oo la mariyo

adeegyada bulshada asaasiga ah iyo in la abuuro Cutubyo Soomaali oo Ilaalinta Degaanka u xilsaaran oo askar iyo shibil ka kooban heer qaran iyo heer gobolna leh.

50. Iyadoo xaaladdu ay sidaas u adag tahay, ayay haddana Dawladda ka go'an tahay inay qaaddo tallaabo kasta oo ay ku sugeyso xaqa nolosha ee muwaadiniinteeda. Iyadoo maskaxda ku haysa in iskaashi dibadda ka yimaada loo baahn yahay, ayay dawladdu iskaashi joogto ah la sameysaa AMISOM iyo ciidamadeeda ammaanka si loo yareeyo dhibaatooyinka aan laga fursan karin.

*2. Xukunka dilka*

51. Qaanuun ahaan xukunka dilka weli waa looga dhaqmi karaa Soomaaliya. DKMG ma doonayso in ku dhaqanka xukunka dilku uu sii kordhiyo nafaha badan ee go'aya. Dawladdu waxay ku talo jirtaa inay joojiso xukunka dilka.

*3. Gudniinka Dumarka ee Fircooniga*

52. Waayadaan dambe waxaa jiray in dalal badan ay hadal hayeen in dhaqankaan xanuunka badan la soo afjaro. Xeerka ciqaabta ee Soomaaliya wuxuu caadadaan ku sheegay "dhaawac", "dhaawac halis ah" iyo "dhaawac aad halis u ah" Islaamkuna waa mamnuucay dhaqankaan xanuunka badan. Si kastase ha ahaatee, dhaqanka xun ee Gudniinka Dumarka ee Fircooniga ahi (FGM) aad ayuu ugu baahsan yahay geyiga Soomaaliya. In yar mooyee haweenay ama gabar kasta oo Soomaali ahi way soo martay dhaqankaan xanuunka badan. Maadaama dhaqankaani uu bulshada si aad ah ugu baahsan yahay, oo dad badani ay nolol-maalmoodkooda dhaqankaas ka soo saarsadaan, waa in Dawladdu ay dadkaas ilo dakhli oo kale u heshaa.

53. DKMG way ka go'an tahay inay gebi ahaanba ciribtirto dhaqankaan xanuunka badan. Dawladdu waxay rabtaa inay xeerkeeda ciqaabta ee hore wax ka beddesho oo ay si gaar ah ugu sheegto in dhaqankaani uu mamnuuc yahay. Waxaan ugu yeeraynaa beeshacaalamka inay nagu biiriyaan wixii hawlgal fiican ah oo arrintaan ku saabsan oo xaaladdayayda ku haboon.

*4. Xorriyadda saxaafadda iyo muujinta (ra'yiga)*

54. Qodobka 20aad ee GFKMG (TFC) ayaa dammaanad qaadaya xorriyadda saxaafadda iyo in warbaahintu madaxbannaanaato iyo in qof kasta uu si xor ah ra'yigiisa u muujiyo iyadoo la xaqdhowrayo xudduudda uu sharcigu arrintaas u dhigay si loo ilaaliyo akhlaaqda iyo ammaanka guud.

55. Dawladdu way ogsoon tahay muhimmada ay saxaafadda xorta ah oo madaxabannaani u leedahay taabbagelinta xasilloonida bulshada, nabadda iyo xaqdhowrka xuquuqda aadanaha. DKMG way ogtahay halista iyo caqabadaha wariyayaasha hor yaal marka ay hawshooda ku gudanayaan dalka gudihiisa. Inkastoo aysan mar kasta hirgelin, haddana dawladdu waxay ciidammadeeda ammaanka siisay tilmaamo adag oo ay ugu sheegeyso inay xaqiijiyaan in ammaanka wariyayaasha la ilaaliyo.

56. Si kastase ha ahaatee, dawladda way ka go'an tahay inay xoojiso ilaalinta iyo ammaanka wariyayaasha, arrintaasina waxay qayb ka tahay dadaallada lagu xoojinayo maamulka caddaaladda, booliska iyo maxkamadaha. Dawladdu waxay rabtaa inay dib ugu noqoto sharciga warbaahinta si ay u soo gaarsiiso heerka caalamiga ah ayna abuurto xaalad horseedeysa xorriyadda muujinta ra'yiga.

57. Laga soo bilaabo 1991kii, warbaahintu, gaar ahaan idaacaduhu waxay kaalin weyn ka ciyaareen sidii dadweynuhu uu macluumaadka u heli lahaa. Raadyuhu wuxuu kaloo xiriiriye u noqday Soomaalida dalka joogta iyo kuwa dibadda jira.

## B. Xuquuqaha dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka

*1. Xaqa cuntada*

58. Inkastoo cuntadu weligeed Soomaaliya ku yarayd, haddana abaarta hadda jirtaayi xaaladda waa uga sii dartay. Biyo yaraanta ka jirta meelo badan oo Soomaaliya ahi waxay halis ku tahay nolosha dad malaayiin ah. Baahida ay dadku cuntada u qabaani waxay ku khasbeysaa inay quud u raadsadaan xero barakacayaal oo dadkeedii hore ka bateen. Meesha ay barakacayaashu cuntada uga baahan yihiin, dadka aan cid taageerta haysan ee laga soo tegayi ma helayaan gargaarka ay u baahan yihiin. Xaaladdu way ka sii daran tahay meelaha ay Al-Shabaab ka taliso, meelahaasoo ay u diideen dadka baahan in cuntada gargaarka ah la gaarsiiyo. Waa arrin lamahuraan ah in la iska kaashado sidii goobaha ay Al-Shabaab ka taliso cunto loo gaarsiin lahaa.

59. Waddada kaliya ee xaaladdaan taagan looga bixi karo waa in colaadda la soo afjaro. Waa in Dawladda laga gargaaraa sidii ay colaaddaan u soo afjari lahayd si xuquuqahana loo ilaaliyo baahiyaha jirana wax looga qabto.

*2. Xaqa caafimaadka*

60. In muwaadiniinta Soomaaliyeed ay adeeg caafimaad helaan waxaa dammaanad qaaday qodobka 26aad ee GFKMG (TFC). Dawladda waxaa mas'uuliyadi ka saaran tahay inay ilaaliso oo gacan ka geysato caafimaadka dadweynaha. Wasaaradda caafimaadka ayaa mas'uul ka ah maamulka iyo maareynta adeegyada caafimaadka. Waxyaabaha ay Dawladdu ilaa hadda qabatay waxaa ka mid ah furista cisbitaal Martini, xafiiska kormeerka caafimaadka ee Gegida Diyaaradaha Caalamiga ah ee Adan Adde, furista xarumaha Gargaarka Degdegga ah ee Digfeer iyo Sayidka oo kulligood Muqdisho ku yaal. Dawladdu waxay sidoo kale daawooyin u qaybisay cisbitaallo, Xarumo Hooyo iyo Dhallaan (MCHs) iyo xarummo kale oo caafimaad oo ku yaal Galmudug iyo Puntland.

61. Si kastase ha ahaatee, waxyaabahaani aad bay u yar yihiin marka loo eego baahida ay qabaan dadka ku nool aagagga aysan Dawladdu gacanta ku hayn.

62. Rabshadaha socdaayi waxay saameyn ku yeesheen nolosha iyo caafimaadka muwaadiniinta iyagoo kor u qaaday baahidooda caafimaad xilli agabkii caafimaadku uu meesha ka maqan yahay. Nidaamka caafimaad ee Soomaaliya waxaa hor yaalla caqabado waaweyn oo ay ka mid yihiin yaraanta shaqaale caafimaad oo aqoon sare leh iyo iyadoo aan adeegyada caafimaadka maalgelin loo hayn.

### *3. Xaqa waxbarashada*

63. Sida uu dhigayo GFKMG (TFC), waa in waxbarashada loo aqoonsadaa xaq asaasi ah oo muwaadin kasta oo Soomaali ahi leeyahay,18 waana in muwaadin kasta uu xaq u helaa waxbarasho hoose iyo mid sare oo lacag la'aan ah.19

GFKMG (TFC), wuxuu kaloo Dawladda ka rabaa inaysan ku ekaan kor u qaadista, ballaarinta iyo u ololeynta waxbarashada oo kaliya,20 ee ay sidoo kale ku dadaasho sidii ay waxbarashadu dalka oo dhan u gaari lahayd.21

64. 24kii March 2011, ayay Dawladdu markii ugu horreeysay tan iyo 1991, magaalada Muqdisho ka furtay dugsi hoose/dhexe oo waxbarashadiisu lacag la'aan tahay. Hirgelinta iskuulkii ugu horreeyay ee lacag la'aanta ahi wuxuu qayb ka yahay ballanqaadyada cusub ee Dawladdu ay 100ka maalmood ee ugu horreeyay inta ay talada haysay, kor ugu qaadeyso xaaladda bulsho-dhaqaale ee dadweynaha.

65. Si kastaba arrintu ha ahaatee, dagaalkaan dabada dheeraaday wuxuu sabab u noqday in jiil dhan oo dhallinyaro ahi aysan waxbarasho rasmi ah helin. Albaab ay quudkooda ku raadsadaan dhallinyaradaas uma furna, sidaa awgeed ayay qaarkood ku biireen kooxaha xag-jirka ah. Sida kaliya oo xaaladdu ku wanaagsanaan kartaa waa iyadoo colaaduhu dhammaadaan oo Dawladdu ay isku fidiso aagagga aysan hadda ka talin.

66. Inkastoo waxbarashadu ay safka hore kaga jirto qorshayaasha DKMG maadaama ay fure u tahay horumarka Soomaaliya, haddana waxaa weli taagan caqabadaha ay ka midka yihiin burburka ku yimid iskuulladii waxbarashada iyo yaraanta barayaal xirfad leh iyo agab dhaqaale intaba.

### *4. Xuquuqda naafada*

67. Sida uu dhigayo Qodobka 26 ee GFKMG (TFC), dawladda ayaa mas'uul ka ah daryeelka dadka naafada ah. Dagaalka dabada dheeraaday awgiis, ayaa dad badan oo Soomaali ahi ay jirka ama maskaxda ka naafoobeen. Dadka naafoobay badankood, haddaysanba kulligood ahayn, dhibaato aad u adag ayaa nolosha ka haysata. Tusaale ahaan, dadka jirka ka naafoobayi way tuugsadaan, halka kuwa maskaxda ka naafoobay ay silsilado ama xabsi ku xiran yihiin.

68. Maadaama aysan dhaqaalihii loo baahnaa gacanta ku hayn, Dawladdu ma joogto xilligii ay taageero dhab ah oo culeyska ka qaadda u fidin lahayd muwaadiniinteeda naafada ah. Iyadoo ay taasi jirto, ayay haddana Dawladda ka go'an tahay inay qaaddo tallaabooyin ay ka mid

yihiin dhaqangelinta qaanuun, maamul iyo tallaabooyin kale oo arrintaan wax looga qabanayo. Dawladdu waxay ku talo jirtaa inay ansixiso Mucaahadada Xuquuqda Dadka Naafada ah.

### *5. Barakacayaasha*

69. Dagaalka Soomaaliya wuxuu sabab u noqday barakacayaashii (IDPs) ugu badanaa oo weligood la arko. Dad lagu qiyaasay 1.5 malyan (hal malyan iyo bar) ayaa dalka gudihiisa ka barakacay oo u barakacay. Dhibaatooyinka tirada badan ee dalka ka jira awgood, tixgelin sidaa u weyn lama siin karo barakacayaasha gudaha.

70. Inkastoo Puntland ay dhibaatadeeda gaarka ah qabto, haddana waxay martigelisay tiro aad u badan oo barakacayaal ah. Beeshacaalamku waa inay maamulka Puntalnd taageero u fidisaa.

### *6. Dadka laga tirada badan yahay*

71. Taariikh ahaan, dadka laga tirada badan yahay Soomaalidu weligood way takoori jireen. Xaaladdoodu aad bay u liidataa waayo dagaalku iyaga waa uga sii daray. Dawladdu way ogsoon tahay mas'uuliyadda ka saaran dadka laga tirada badan yahay, xaaladdoodana mar kasta way la socon doontaa.

### *7. Wacyigelinta guud ee xuquuqda aadanaha*

72. Dawladda waxaa ka go'an inay abuurto dhaqan dadku ku fahmaan xuquuqda aadanaha. Si arrintaas loo xaqiijiyo, Dawladdu waxay qaadeysaa tallaabooyin haboon oo ay ka mid yihiin tababarro, waxbarasho xuquuqda aadanaha la xiriirta iyo ololayaal wacyigelin ah oo wacyiga dadweynaha ee xuquuqda aadanaha kor loogu qaadayo.

## IV. SHARCIGA CAALAMIGA EE BANI'AADAMNIMADA

73. Maadaama ay qayb ka tahay Mucaahadooyinka Geneva ee 12ka August 1949, waxaa Dawladda Soomaaliya xil ka saaran yahay xeerarka sharciga caalamiga ee bani'aadamnimada (IHL) ee ku lug leh dagaallada hubeysan ee aan caalamiga ahayn. Sharciga caalamiga ee bani'aadamnimada (IHL) ee ku lug leh dagaallada Soomaaliya waxaa laga heli karaa xeerka heshiiska iyo xeer hoosaadka IHL labadaba.

74. Marka la eego xeerka heshiiska, Qodobka Guud ee 3aad ee Mucaahadad Geneva ee 1949 ee la iska rabo in si bani'aadamnimo ah loola dhaqmo oo sida ugu fudud hawshiisa loo socodsiiyo kooxaha hubeysan ee aan markaas dagaalka ku jirin ama kuwa, iyagoo dagaalka ka qayb qaatay, hubkooda dhigay ama kuwa "dagaalka uga maqnaa" jirro, dhaawac, xarig ama sababo kale iyo Borotokoolka heshiiskaas la socda ee II (AP II) ee Mucaahadad Geneva ayaa lagu maareynayaa dagaalka Soomaaliya ka socda.

75. Soomaaliya ma aysan ansixin AP II sidaa awgeed ayuusan qodobkaani si toos ah ugu haboonayn marka laga eego dhinaca xeerka heshiiska. Dawladdu way ogtahay in xeerar badan oo AP II ka mid ahi ay ka taagan yihiin xeer hoosaadka sharciga caalamiga ee bani'aadamnimada (IHL) oo sidaas darteed ay xaaladda Soomaaliya ku haboon yihiin. Xeerarkaas waxaa ka mid ah Qodobka 4aad ee dammaanadda siinaya dadka aan si toos ah dagaalka ugu jirin. Qodobka 5aad wuxuu dhigayaa in si bani'aadamnimo ah loola dhaqmo dadka xornimadooda la koobay, Qodabka 6aadna wuxuu qeexayaa xeerka ciqaabta iyadoo la doonayo in tallaabooyinkaas oo dhammi ay ka turjumaan Qodobka Guud ee 3aad ee Mucaahadad Geneva.

76. Ciidammada Dawaladda waxaa kaloo waajib ka saaran yahay inay ixtiraamaan xeer-hoosaadka sharciga caalamiga ee bani'aadamnimada (IHL) ee la xiriira hababka iyo qalabka dagaal ee mamnuuca ah oo ay ka mid yihiin mabaadii'da kala soocidda (rayidka iyo askarta), mamnuucidda weerarka ula kaca ah oo aan loo meel dayin ee rayidka lagu qaado, weerarka lala beegsado alaabada rayidka, mabaadii'da talaxtagga, taxaddarka la sameeyo marka wax la weerarayo, taxaddarka laga sameeyo raadadka uu weerarku keeni karo, diidista is-dhiibka, bililiqada, ballan-furka iyo gaajo u leynta dagaal ahaan loo isticmaalo.

77. DKMG way ogtahay in xadgudbyo la xiriira sharciga caalamiga ee bani'aadamnimada (IHL) ay dhacaan marka ay dagaalka kula jirto kooxaha hubeysan ee xag-jirka ah. Dawladdu waxay qaadeysaa tallaabo kasta oo ay ku xaqiijineyso inaan xadgubyo lala imaan oo sharciga caalamiga ee bani'aadamnimada (IHL) la xaqdhowro.

78. Midowga Afrika iyaguna waxay qaadeen tallaabooyin ay ku xaqiijinayaan in ciidammadoodu ay ilaaliyaan sharciga caalamiga ee bani'aadamnimada (IHL) oo ay soo gelayso duqeynta ula kaca ah oo aan loo meeldayin oo dadka rayidka ah loo geysnayo.

79. Dawladda waxaa waajib ku ah inay "xaqdhowrto oo xaqiijiso in la xaqdhowro" sharciga caalamiga ee bani'aadamnimada (IHL). Sidaa awgeed, ayay soo jeedinaysaa in tababarka sharciga caalamiga ee bani'aadamnimada (IHL) lala falgeliyo barnaamijka tababarrada ciidammadeeda qalabka sida iyo kuweeda ammaanka ee heer kasta.

80. Si uu u noqdo u hoggaansanka sharciga caalamiga ee bani'aadamnimadu (IHL) mid la taaban karo, Dawladdu waxay u baahan tahay in lagu taageero xeel-dheerayaal sharciga caalamiga ee bani'aadamnimada (IHL) oo ciidankeeda tababar iyo talooyinba u fidiya. Sidoo kale, Dawladdu waxay u baahan tahay in taageero looga fidiyo sidii ay wax uga beddeli lahayd xeerarka ciqaabta ciidammada: Xeerka Ciqaabta Ciidammada ee waqtiga Dagaalka (Codice Penale Militare di Guerra) iyo Xeerka Ciqaabta Ciidammada ee waqtiga Nabadda (Codice Penale Militare di Pace) waayo labaduba way ka horreeyeen Mucaahadad Geneva ee 1949, sidaa awgeed dhammeystir ayay u baahan yihiin.

## V. CARRUURTA ASKARTA AH

81. Colaadda Soomaaliya waxaa astaan u noqotay in si baahsan oo is dabajoog ah carruurta loo askareeyo. Dawladdu way ogsoon tahay waajibaadkeeda caalamiga ah ee ku aaddan mamnuucista

in carruurta colaadaha laga qaybgeliyo. Sdiaa awgeed, ayaysan, siyaasad ahaan, carruur askar u qoran ama aysan oggolayn in ciidammadeeda ammaanku qortaan askar carruur ah, waxaana dawladda ka go'an inay Soomaaliya ka ciribtirto caadada carruurta askarta loo qoranayo.

82. Ka dib markii uu la kulmay Ergayga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ugu Qaabilsan Carruurta iyo Dagaallada Hubeysan Radhika Coomaraswamy 3dii November 2010, ayuu Ra'iisalwasaaruhu, Mohamed Abdullahi Mohamed, u magacaabay wasiiru-dawlaha xafiiska Ra'iisalwasaaraha, Marwo Zahra Mohamed Ali Samantar barta kulanka ee ilaalinta carruurta iyo xuquuqda aadanaha isagoo soo saaray wareegto adag oo lagu mamnuucayo askareynta carruurta.

83. Dawladda waxaa ka go'an hirgelinta siyaasad ballaaran oo looga hortagayo in carruurta askar loo qorto. Si kastase ha ahaatee, goobaha ku jira gacanta Al-Shabaab carruurta si khasab ah ayaa hadda loo askareeyaa. Sababta ay sidaas u sameynayaan waa iyadoo dagaalladii looga adkaaday. Dawladdu waxay xiriir la sameysay hoggaamiyayaasha dhaqanka iyo kuwa diinta si arrinta xal loogu raadiyo.

84. Si kasta arrintu ha ahaatee, waxaa iyaduna mudan in la sheego in carruurta qaarkood ay iskood ugu biireen Al-Shabaab sababo dhawr ah awgood. Saboolnimmada iyo rafaadka, gaar ahaan carruurta dagaalka ku agoomoobay ayaa ah sababaha ugu waaweyn ee carruurtu ay ugu biiraan Al-Shabaab. Waalidiintuna maadaama ay sabool yihiin oo aysan quud haysan ayay carruurtooda u oggolaadaan inay Al-Shabaab ku biiraan.

85. Sida kaliya oo arrintaas loo joojin karo waa iyadoo la helo fursado kale; sida helista fursadaha waxbarashada, tababarrada xirfadaha iyo fursadaha dakhli abuurista.

## VI. MUSIIBOOYINKII HORAY U DHACAY, CADDAALADDA IYO DIB-U-HESHIISIINTA

86. Dagaalka sokeeye ee Soomaaliya wuxuu dhibaato ku hayaa dadweynaha iyo hantidooda. Dagaalka waxaa astaan u noqotay xadgudubyo halis ah oo loo geysto xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ee bani'aadamnimada. Iyadoo taas maskaxda lagu hayo, ayay Dawladdu garowsan tahay inaysan waajib siyaasi ah oo kaliya ahayn ee ay sidoo kale baahi bulsho tahay in si caddaalad iyo dib-u-heshiissiin ku dhisan looga xaaltamo boogihii ka dhashay musiibooyinkii dhacay. Dawladdu waxay tallaabooyin lamahuraan ah u qaadeysaa dhinaca dhisidda Soomaaliya xasilloon, iyadoo dhinaca kalena ay ka heystaan duqeymo iyo is qarxis maalin kasta ah oo uga imaanaya dhinaca malleeshiyaadka xag-jirka ah.

87. Dawladdu waxay sameysay Wasaarad la shaqeysa haya'dda Federaalka ee Dastuurka iyo Dib-u-heshiisiinta Qaaranka iyo weliba Ergada Qaran ee Dib-u-heshiisiinta oo lagu dhisay qodobka 68 (b) ee GFKMG (TFC). Hawsha Ergada Dib-u-heshiisiintu waa inay dadweynaha la tashadaan oo ay soo bandhigaan istaraatiijiyad lagu xallinayo xadgudubyadii dhacay oo dib-u-heshiisiin lagu bilaabo.

88. Inkastoo Dawladda ay hor yaalliin caqabado ay ka mid yihiin ammaan darro, burbur ku yimid dhammaan hay'adihii xeer beegista, ayay haddana tahay in la ogaado in dhaqanka Soomaalida ay ka buuxaan hab dhaqameed "Xeer" loo yaqaan oo colaadaha lagu furdaamiyo.

89. Is qabqabsiga iyo colaadaha waxaa lagu dhammeyn jiray iyadoo la maro habka "Xeer" Soomaaliga, waxaana garta gooyn jiray hoggaamiyayaasha diinta iyo dhaqanka ee xaqdhowrka mudan. DKMG ahi waddadaan ayay dhiirrigelinaysaa iyadoo ku qanacsan in waddadaani ay tahay tan kaliya ee lagu gaari karo nabad waarata iyo xasillooni.

## VII. CAQABADAHA IYO SEETOOYINKA

90. Soomaaliya waxaa hor yaalla caqabado adadag oo ay ka mid yihiin saboolnimada, abaarta iyo ammaan darrada oo ay sii hurinayaan maqnaanta haya'do xeer beegis (boolis, maxkamado iyo asluub) oo si buuxda u shaqeeya. Inkastoo caqabaduhu ay aad u badan yihiin, haddana kuwaan hoose ayaa mudan in la tilmaamo:

- Barakacayaasha iyo qaxootiga;
- Ammaan xumada;
- Tabar darrada haya'daha Dawladda;
- Jiritaan musuqmaasuq;
- Saboolnimada iyo shaqo la'aanta;
- Xaaladda aadka u liidata ee xabsiyada;
- Maqnaanshaha xarumaha dhaqancelinta dhallinyarada;
- Carruurta askarta ah (iyo "baxsadka");
- Tabar darrada bulshada rayidka ah;
- Awood darrada hay'adaha fulinta xeer beegista dalka.

91. Dawladdu horumar ayay ka sameynaysaaa dagaalka ay kula jirto Al-Shabaab, gaar ahaan Muqdisho iyo aagag koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya ah. Dawladdu waxay rajeynaysaa inay aagagga la xoreeyay geyso adeegyada dadweynaha ee asaasiga ah ee aadka loogu baahan yahay.

## VIII. MUDNAANTA, IS-XILQAANKA IYO BALLANQAADYADA

92. Si xal loogu helo caqabadaha iyo seetooyinka, Dawladdu waxay isu-xilsaartay inay tallaabooyin haboon ka qaaddo arrimaha soo socda:

- Caafimaadka;
- Waxbarashada;

- Biyaha;
- Haya'daha xeer beegista;
- Booliska;
- Maxkamadaha;
- Adeegyada xabsiyada;
- In xuquuqda aadanaha laga dhigo asaaska u gudbidda Soomaaliyada cusub;
- Qorshe hawleed loo sameeyo xuquuqda aadanaha;
- In tababar haboon oo Xuquuqda Aadanaha iyo sharciga caalamiga ee bani'aadamnimada (IHL) loo sameeyo haya'daha ammaanka ee Soomaaliya;
- Wacyigelin la xiriirta xuquuqda aadanaha iyo olole waxbarasho;
- Fidinta adeegyada bulsho ee asaasiga ahi waa lamahuraan;
- DKMG iyadoo wadahadal siyaasadeed oo dhinacyo badan ah la gelaysa dhammaan kooxaha gudaha ee dantu ka dhexeyso, ayay haddana ka go'an tahay inay abuurto dawlad adag oo waarta;
- DKMG waxaa ka go'an inay dhisto haya'do waxtar leh oo taabbagal ah lalana xisaabtami karo oo u adeega dadweynaha Soomaaliyeed, iyadoo dhinaca kalena ku hawshan nabdeynta, caddaaladda iyo dib-u-heshiisiinta;
- DKMG waa ka go'an tahay inay kor u qaaddo oo taabageliso xuquuqda aadanaha, annagoo rajeynayna in adduunka oo dhan gaar ahaan dawladaha walaalaha ha iyo kuwa saaxiibaaduba ay gacan noo fidin doonaan;
- DKMG waxy u aragtaa nidaamka Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalamiga ah DXC (UPR) inuu udub dhexaad u yahay dib-u-jiheynta dadaalladayada wadajirka ah ee aan wax kaga qabaneyno caqabadaha waaweyn ee hor yaal hagaajinta xuquuqda aadanaha dadweynaha Soomaaliyeed.

## IX. TAAGEERADA FARSAMO EE LOO BAAHAN YAHAY

93. Dawladuu si buuxda ayay u garowsan tahay dhammaan talooyinka uu soo jeediyay Xeeldheeraha Madaxabannaan ee xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya. Hase yeesshee, marka la fiiriyo dhibaatooyinka iyo seetooyinka kor lagu soo sheegay, waxaa loo baahan yahay guddi qiimeyn oo caalami ah oo isku dhafan ayna ku jirto Dawladda Soomaaliya oo heer qaran iyo heer gobolba leh, oo soo qiimeeya baahida karti bilidda iyo tan taageerada farsamo ee Soomaaliya ay uga baahan tahay dhinacyada soo socda:

- Xeer dejinta;
- Xeer Ilaalinta;
- Xeer fulinta;
- Waxbarashada;

- Ololaha wacyigelinta dadweynaha iyo tababarka xuquuqda aadanaha iyo sharciga bani'aadamnimada;
- Barakacayaasha;
- Dadka laga tirada badan yahay iyo kuwa naafada ah.

94. Inkastoo afar go'aan oo oo muhiim ah ay soo saareen Golaha Xuquuqda Aadanaha oo sidoo kale natiijo ay ka soo baxday wadahadalkii Soomaaaliya loogu talogalay ee ugubka ahaa, sida fiicanna la isugu wareystay ee ka dhacay Geneva 29 September 2010, ayaa haddana gaabiska ku jira nidaamka go'aan gaarista ee Qarammada Midoobay uu keenay in horumarkii la sameyn lahaa uu daaho. Xafiiska Ergayga Sare ee Qarammada Midoobay u qaabilsan Xuquuqda Aadanaha (OHCHR) ayay tahay inuu hubiyo in la qaado jid-gooyada u taalla hirgelinta codsiyo kala duwan oo la soo gudbiyay oo la xiriiray sidii Soomaaliya dhinaca xuquuqda aadanaha looga gacan qaban lahaa. Dawladda Federaalka Ku Meelgaarka ah ee Soomaaliya waxay ugu yeeraysaa dalalka walaalaha ah iyo kuwa saaxiibka ah iyo dalkii kale oo doonaba inay u fidiyaan taageero lammaane oo waqtiyeysan oo wax ku ool ah, taageeradaasoo kor loogu qaadayo laguna ilaalinayo xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya, iyadoo laga shidaal qaadanayo qaab-hawleedka qaanuun ee go'aammadii lagu dhaqangeliyay is afgarashadii aan horay loo arag ee Golaha Xuquuqda Aadanaha ee Qarammada Midoobay.

## Notes

1 Qodobka 14, tud. 1.

2 Lamid. para. 2.

3 Lamid. para. 3.

4 Qodobka 15.

5 Qodobka 16.

6 Qodobka 17.

7 Qodobka 18.

8 Qodobka 19.

9 Qodobka 20.

10 Qodobka 21.

11 Qodobka 22.

12 Qodobka 23.

13 Qodobka 24.

14 Qodobka 25.

15 Qodobka 26.

16 Qodobka 55.

17 Qodobka 63 tud. 1.

18 Qodobka 24 (1).

19 Lamid. (2).

20 Lamid. (3).

21 Lamid. (4).

# Kulmin uu diyaariyay Xafiiska Ergeyga Sare ee Xuquuqda Aadanaha iyadoo la raacayo tuduca 15 (b) ee lifaaqa go'aanka Golaha Xuquuqda Aadanaha 5/1

**A/HRC/WG.6/11/SOM/2**

**Golaha Xuquuqda Aadanaha**

**Koox Hawleedka Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalamiga ah**

**Kalfadhiga kow iyo tobnaad**

**Geneva, 2–13 May 2011**

**Somalia**

Warbixintaani waxay kulmineysaa macluumaadkii ku jiray warbixinnadii haya'daha mucaahadooyinka, cabashooyin gaar ah oo ay ku jiraan u kuur-gelid iyo faallo ka bixin Dawladda ay arrintaasi khuseyso iyo dukumintiyada kale ee Qarammada Midoobay ee arrintaan xiriirka la leh. Warbixinta kuma jiraan wax aragti, ra'yi ama talooyin ah oo ka yimid Xafiiska Ergeyga Sare ee Qarammada Midoobay u qaabilsan Xuquuqda Aadanaha (OHCHR), marka laga reebo waxyaabaha ku jira warbixinnada guud ee uu soo saaray OHCHR. Warbixintu waxay raacaysaa qaabka tusmooyinka guud ee uu jeexay Golaha Xuquuqda Aadanuhu. Macluumaadka halkaan ku jira si nidaamsan ayaa tixraac loogu sameeyay dhammaadka bogga. Warbixinta waxaa la diyaariyay iyadoo la tixgeliyay in wareegga ugu horreeya ee dib-u-eegistu ay afar sano ku xilliyeysan tahay. Maadaama ay warbixintu kulmineyso macluumaad ku jira dukumitiyada rasmiga ah ee Qarammada Midoobay, macluumaad yarida ama in arrimo gaar ah xoogga la saaro waxaa sabab u noqon kara inaan mucaahadaads la ansixin iyo/ama iskaashiga ama wadashaqeynta barnaamijyada xuquuqda aadanaha la lahaa oo hooseeyay.

# I. MACLUUMAADKA DAHSOON IYO QAAB-DHISMEEDKA

## A. Heerka Waajibaadka Caalamiga ah1

| Xuquuqda aadanaha caalamiga[2] | Taariikhda la ansixiyay, Ku biiris ama ku wareegis | Baaqyada/ hakashooyinka | Aqoonisga qaybo gaar ah oo Mucaahadada ah |
|---|---|---|---|
| ICERD | 26 August 1975 | Maya | Dacwadaha shakhsiga (qod.14): May |
| ICESCR | 24 January 1990 | Maya | - |
| ICCPR | 24 January 1990 | Maya | Dacwooyinka Dawladda-dhexdeeda (qod. 14): May |
| ICCPR-OP 1 | 24 January 1990 | Maya | - |
| CAT | 24 January 1990 | Maya | Dacwooyinka Dawladda-dhexdeeda (qod . 21): May |
| | | | Dacwadaha shakhsiga (qod. 22): May |
| | | | Tallaabooyinka baarista (qod. 20): Haa |

| Heshiisyada kale waaeyn ee caalamiga ahs | Ansixin, ku biiris ama ku wareegis |
|---|---|
| Mucaahadada ka Hortagga iyo Ciqaabista Danbiga Dabargoynta | May |
| Tubta Rome ee Maxkamadda Danbiyada Caalamiga ah | May |
| Borotokoolka Palermo4 | May |
| Qaxootiga iyo dadka aan dawladda lahayn5 | Haa, marka laga reebo mucaahadooyinka 1954 iyo 1961 |
| Mucaahadada Geneva ee 12 August 1949 iyo Borortokoollada la Socda | Haa, marka laga reebo Borortokoollada la Socda oo dhan |
| Mucaahadooyinka ILO ee asaasiga ah7 | Haa, marka laga reebo Lam. 87, 98, 100, 138 iyo 182 |
| Mucaahadada UNESCO ee la dagaalanka Takoorista goobaha Waxbarashooyinka | May |

1. Sannadkii 2009, Ergeyga Sare ee Qaarammada Midoobay u qaabbilsan Xuquuqda Aadanuhu wuxuu soo dhoweeyay dadallada ay Dawladdda Federaalka ku Meelgaarka ah (DFKMG) ku ansixineyso Mucaahadada Xuquuqda Carruurta (CRC), waxayna ku dhiirrigelisay Xukuumadda iyo Baarlammaanka Soomaaliya inay ka dhabeeyaan ballankooda. Barnaamijka Qaranmmada Midoobay ee Horumarinta (UNDP) ayaa tilmaamay in Golaha Wasiirrada ee DFKMG ay sheegeen inay doonayaan ansixinta CRC iyagoo dhisay guddi ka soo baaraandega sidii qodobada mucaahadada loogu dhafi lahaa qaanuunka qaranka xeerka shareecada.

2. Sannadkii 2010, Xafiiska Ergeyga Sare ee Qarammada Midoobay u qaabbilsan (UNHCR) ayaa DFKMG kula taliyay inay ansixiyaan Mucaahadada Ciribtirka Dhammaan Qaababka Takoorka Haweenka iyo CRC.

3. Wakiilka Xoghyaha Guud ee xuquuqda aadanaha barakacayaasha11 iyo UNHCR ayaa DFKMG kula taliyay inay ansixiso Mucaahadada Midowga Afrika ee Ilaalinta iyo Taageerista Barkacayaasha Afrika gudeheeda

## B. Qaab-dhismeedka dastuuriga ah iyo kan qaanuuniga ah

4. UNHCR waxay tilmaantay in laga soo bilaabo January 1991, Soomaaliya aysan helin dawlad shaqeynaysa. Dhulka soomaaliya dhab ahaan wuxuu u qaybsan yahay saddex aag oo maamul: "Somaliland", "Puntland" iyo koonfurta iyo bartmaha Soomaaliya. Aag kasta waxaa gooni u ah xaaladdiisa siyaasadeed, tan xuquuqda aadanaha iyo midda nabadgelyo. UNHCR waxay tilmaantay in koonfurta iyo bartmaha Soomaaliya ay hoos yimaadaan DFKMG oo, iyadoo gacan ka helaysa xoogagga nabad ilaalinta ee Afrika (AMISOM), gacanta ku haysa 6 degmo oo Muqdisho ka tirsan, halka 39ka degmo ee kale ay maamulaan Al-shabaab iyo malleeshiyooyin kale oo Islaami ah. Dawlad goboleedka Puntland State, oo ah maamul xukun-hoosaad leh oo ku yaal woqooyiga bari ee dalku, wuxuu ku dhawaaqay inuu ka mid yahay Soomaaliya federal ah, halka Jamhuuriyadda iskeed isu magacowday ee Somaliland ee woqooyi galbeed ay sheegtay inay tahay qaran gooniya. Xoghayaha guud wuxuu sheegay in ka dib doorasho si nabadgelyo ah u dhacday, ay Puntland doorotay madaxweyne cusub bishii January 2009. Goobjoogayaal caalami ahina waxay caddeeyeen in doorashooyinkii Somaliland ee June 2010, ay u dheceen si xor ah, oo hufan oo furan.

5. Sannadkii 2010,xoghayaha guud ayaa xusay in Ergada Madaxabannaan ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya ay ka shaqeynayeen qabyo-qoraalka dastuurka lagu wado inuu dhammaado December 2010. Xeeldheeraha madaxabannaan ee xaaladda xuquuqda aadanaha Soomaaliya (xeeldheere madaxbannaan) ayaa xusay in horumar la taaban karo laga gaaray qoraalka Dastuurka Federaalka ah, wuxuuna intaa ku daray in arrintaani ay udub-dhexaad u noqon karto dib-uga-kabashada wixii dhacay haddii aragtida dadweynaha Soomaaliyeed la tixgeliyo ka hor inta aan qormada kama dambeysta ah afti loo qaadin.

6. Golaha Ammaanka ayaa 2009kii u yeeray DFKMG si loo sameeyo qaab-hawleed qaanuun iyo mid siyaasadeed, oo soo hoos gelaya istaraatiijiyada qaran ee ammaanka, laguna maareeyo hawlgallada ciidammadeeda ammaanka oo ay ku jirto maamulka, baaritaanka iyo nidaam kormeer oo lagu xaqiijinayo xaqdhowrka xeer-beegista iyo xuquuqda aadanaha.

## C. Asaaska Haya'deed iyo kan xuquuqda aadanaha

7. Sida xaalku yahay 31 December 2010, Soomaaliya ma laha haya'ad xuquuqda aadanaha oo ka sahrciyeysan Guddiga Caalamiga ah ee Isku-xirka Haya'daha Qaran ee Xaqdhowrka iyo Ilaalinta Xuquuqda Aadanaha (ICC). xeeldheeraha Madaxabannaan wuxuu ku taliyay in Ra'iisalwasaaruhu uu bixiyo dammaanad lagu sameynayo Ergada Madaxabannaan ee Xuquuqda Aadanaha Qaranka oo sida ugu dhakhsaha badan arrintaas looga.

8. UNDP ayaa Sannadkii 2010 timaantay in dadaallada karti bilidda ee haya'daha dawladdu uu weli hooseeyo iskuna dhexyaacsan yihiin. Si gaar ah, DFKMG waxaa ka hor yimid caqabad adag oo dhinaca haya'daha iyo hawlgallada ah. Shaqaalaha badankoodu waxay ku shaqeeyaan iskaa wax-u-qabso oo waxay ku joogaan taageero gunno oo Xirmada Bilowga ee UNDP ay bixiso ah.

9. UNDP waxay sheegtay in Guddiga Talo-bixinta Boolisku (PAC) uu weli kormeer ku sameeyo siddeed saldhig boolis oo ku yaal aagagga ay DFKMG gacanta ku hayso ee magaalada Muqdisho. PAC waxay booqasho joogto ah ku sameeyeen Xabsiga Dhexe ee Muqdisho.

## D. Tallaabooyinka siyaasadeed

10. UNDP waxay sheegtay in, mudddaii 20ka sano ka badnayd ee colaadaha, uu Soomaaliya soo gaaray burbur dhinaca hay'adaha, dhismaha hoose, hantida bulsho iyo midda bani'aadam. Weli waxaa dib-u-dhac ka jiraa dhinaca siyaasad dejinta, barnaamij diyaarinta iyo fulinta intaba. Wacyiga xuquuqaha ee Dawladda dhexdeeda iyo dadweynuhuba wuu hooseeyaa, bulshada rayidkuna way dambeeyaan, dhismaha hoosena waa liitaa.

11. Xafiiska Siyaasadda Qarammada Midoobay ee Soomaaliya (UNPOS) wuxuu walaac ka muujiyay in xannibaadaha gelista Soomaaliya ay si xun u wiiqday horumarka hawlaha xuquuqda aadanaha ee dalka, ee kormeeristu ka mid tahay. Hawlwadaagyada guduhu ma awoodi karaan inay kormeer u kuurgal ah sameeyaan cabsi ay aargudasho ka cabsanayaan awgeed; aad bay u adag tahay in caddeyn buuxda la helo, gaar ahaan koonfurta iyo bartamaha dalka. Golaha Ammaanku waxay sannadkii 2009 hoosta ka xarriiqeen sida ay lamahuraan u tahay in dhinacyada is haya oo dhammi ay, iyagoo aan la daahin, qaadaan tallaabooyin haboon oo ay ku xaqiijinayaan furista marimmo la mariyo gargaarka bani'adamnimo ee lagu taageerayo dadweynaha Soomaaliyeed.

12. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu sheegay in Dawladda laga sugayo inay la dagaalanto waxyaabaha ay ka midka yihiin musuqmaasuqa, qabiileysiga iyo eexeysiga oo ay xeer-beegista dhaqangeliso. Wuxuu Dawladda ugu baaqay inay cid kasta oo ku haboon ay u fidiso tababar asaasi ah oo ku saabsan xuquuqda aadanaha iyo sharciyada caalamiga ah ee bani'aadamnimada.

13. Ergeyga Sare wuxuu farta ku fiiqay arrimaha salka u ah dhismaha ciidammo ammaan oo lala xisaabtami karo si fiicanna u tababaran; arrinta caddaaladda iyo dib-u-heshiisiinta iyo hawlaha dastuur dejinta. Xoghayaha Guud wuxuu DFKMG ugu baaqay inay xoogga saarto

sidii ay dadweynaha Soomaaliyeed u gaarsiin laheyd adeegyada asaasiga ah, oo u bixin laheyd mushahaaraadka ciidammada ammaanka una sii wadi laheyd dadaalkeeda ku aaddan dhisidda waaxda ammaanka.

# II. TAABBAGELINTA IYO ILAALINTA XUQUUQDA AADANAHA EE DALKA GUDIHIISA

## A. Iskaashiga lala sameynayo barnaamijyada xuquuqda aadanaha

14. Golaha Ammaanku waxay go'aankoodii 1863 (2009), dib ugu soo celiyeen xilkii Xafiiska Siyaasadda Qarammada Midoobay ee Soomaaliya (UNPOS) ee markii hore uu Xoghayaha Guud dhisay sannadkii 1995.

Go'aankoodii 1744 (2007), waxay Golaha Ammaanku soo dhoweeyeen rabitaanka ay Midowga Afrika rabaan inay Soomaaliya ka sameeyaan hawlgalka (AMISOM) iyagoo goluhu uu hawlgalka oggolaaday. Xilka xeeldheeraha madaxa bannaan ee xaaladda xuquuqda aadanaha Soomaaliya waxaa lagu dejiyay go'aanka 1993/86 ee ay soo saareen Ergada Xuquuqda Aadanaha, ka dibna ay Golaha Xuquuqda Aadanuhu ku ansixiyeen go'aankoodii 5/1 (lifaaqa I). Golaha Xuquuqda Aadanuhu iyagoo raacaya go'aankoodii 14/119, ayay kalfadhigoodii shan iyo tobnaad wadahadal gooni ah oo fool-ka-fool ah ka yeesheen arrimaha Soomaaliya.

*1. Iskaashiga Lala Sameeyay Haya'adaha Mucaahadooyinka*

| Haya'dda mucaahadada[33] | Warkii ugu dambeeyay ee gudbinta iyo tixgelinta | Fallo-bixintii ugu dambeysay | Jawaabtii dabagalka | Heerka warbixinta |
|---|---|---|---|---|
| CERD | 1984 | August 1996 | - | Laga soo bilaabo 2006 ayaa warbixintii shanaad ilaa lix iyo tobnaad oo isku xiran la sugayaa. |
| CESCR | - | - | - | Laga soo bilaabo 1992 ayaa warbixintii bilowga la sugayaa. |
| HR Committee | - | - | - | Laga soo bilaabo 1991 ayaa warbixintii bilowga la sugayaa. |
| CAT | - | - | - | Laga soo bilaabo 1991 ayaa warbixintii bilowga la sugayaa. |

15. Sannadkii 1996, Guddiga Ciribtirka Takoorka Isirka ku Saleysan ayaa sheegay in sharcigii iyo kala-dambeyntii Soomaaliya ay gebi ahaanba burburtay, dawlad shaqeyneysaana aysan

Soomaaliya ka jirin, sidaa awgeedna uu guddigu go'aansaday in marka xasillooni siyaasadeed la helo uu dib u eego sida dalku uu Mucaahadada u hirgeliyay.

*2. Iskaashiga Lala Sameeyay Warbixiyayaasha Gaarka ah*

| | |
|---|---|
| *Martiqaad furan ma la soo saaray* | May |
| *Warbixinno Booqashooyin ama hawlgal* | Xeeldheeraha madaxabannaan ee xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya (26 July–6 August 2010) |
| *Booqashooyinka mabda' ahaan lagu heshiiyay* | |
| *Booqashooyinka la codsaday oon weli lagu heshiin* | Warbixiyaha Gaarka ah ee rabashadaha haweenka lagula kaco, sababohooda iyo raadadkooda (2009) |
| *Xiriirinta/iskaashiga muddada hawlgalka* | |
| *Dabagal booqashada ku xiga* | |
| *Jawaabaha warqadaha eedeymaha iyo qaylodhaanta* | Muddadii dib-u-eegista lagu jiray, 21 xiriir ayaa la diray. Dawladdu midna kama soo jawaabin |
| *Degdegga ah* | |
| *Jawaabaha xog-baarista ee mawduucyada ku saleysan* | 26kii xog-baaris ee xilqaadayaasha warbixinta gaarka ahi ay Soomaaliya u direen, midna lagama soo jawaabin[35]. |

*3. Iskaashiga lala sameeyay Xafiiska Ergeyga Sare ee Xuquuqda Aaadanaha*

16. Sannadkii 2008, xafiiska UNPOS wuxuu ka warbixiyay in xaaladda xuquuqda aadanuhu ay ka sii dartay, arrintaasoo keentay in xafiiska UNPOS dhexdiisa dib looga dhiso Unugga isku-dhafan ee Xuquuqda Aadanaha ee Qarammada Midoobay. Sannadkii 2009, Unuggaani wuxuu DFKMG iyo madaxda kaleba kala shaqeeyay sidii loo sameyn lahaa qaab-hawleed loogu talogalay iskaashiga farsamo ee xuquuqda aadanaha. Ku xigeenka Ergeyga Sare ee Xuquuqda Aadanaha ayaa dalka booqday sannadkii 2010.

## B. Hirgelinta waajibaadka xuquuqda aadanaha caalamiga ah, iyadoo la tixgelinayo sharciga haboon ee bani'aadamnimada caalamiga ah

*1. Sinnaanta iyo takoor la'aanta*

17. Ergeyga Sare ee Xuquuqda Aadanaha ayaa sannadkii 2008 sheegay in haweeka ay weli haysato takoor la xiriira xeerarka dhaqanka iyo kuwa caadada. Waxayna intaa ku dartay in ka dhex muuqashada dumarka ee xukuumadda iyo xeer-beegistu uu hooseeyo.

18. UNHCR waxay sheegtay in caddaaladdu (garsoorku) ay kooban tahay, gaar ahaan dhanka dumarka, arrimaha walaaca keenayana ay ka mid yihiin karti yarida xeer-beegista iyo takoorista ka timaadda nidaam dhaqameedka furdaaminta colaadaha.

19. Ergeyga Sare ee Xuquuqda Aadanuhu wuxuu kaloo sheegay in si joogto ah loo soo sheego takooris lagu hayo dadka laga tirada badan yahay iyo dadka naafada ah. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu sheegay in, inkastoo uusan cusbayn, uu dhaqanka xayndaabku aad u batay, gaar ahaan xaaladaha uusan qaab-dhismeedka qabiilku qofka sida laga rabay u ilaalin karin, xaaladaha noocaan ahina waxay inta badan ku dhacaan dhibbanayaasha ka soo jeeda qabiillada laga tirada badan yahay.

*2. Xaqa nolosha, xorriyadda iyo ammaanka qofka*

20. Sannadkii 2010, Golaha Xuquuqda Aadanuhu waxay walaac xooggan ka muujiyeen waxyeellada ballaaran ee rayidka ka soo gaartay colaadaha aan dhammaadka lahayn iyo qorashada, tababarista iyo u adeegsiga carruurta loo adeegsanayo colaadaha socda, iyagoo dhinacyada oo dhan ku guubaabiyay inay ka waantoobaan dhammaan qaabka kala duwan ee colaadaha iyo waxyeellada dadka rayidka ah. Xoghayaha Guud wuxuu sheegay in dagaallada ba'an ee Muqdisho ka dhacay bilihii June iyo July ay sii badiyeen waxyeellada dadka rayidka ah, arrintaasoo muujineysa baahida loo qabo in dhinacyada oo dhan ay si aad ah u ilaaliyaan sharciyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo kuwa bani'aadamnimada ee la xiriira ilaalinta dadka rayidka ah. Xoghayuhu wuxuu sheegay in inkastoo ay ammaan xumo isa soo tareysaa jirto, ay haddana Puntland iyo Somaliland xasilloon yihiin marka loo eego koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya. Xoghayaha Guud wuxuu kaloo sheegay in ammaan darrada iyo colaadaha ka jira qaybo dalka ka mid ahi ay soo jiiteen xubno shisheeye oo xag-jirro ah.

21. UNHCR waxay tilmaantay in goobaha ay Al-shabaab Muqdisho ka xukumaan ku can noqdeen xadgudubyo ballaaran oo xuquuqda aadanaha loo geysto iyo iska indhatir xuquuqda asaasiga ah ee qofka. Dagaalka joogtada ah ee u dhexeeya DFKMG (oo garab ka heleysa AMISOM) iyo Al-shabaab ayaa wuxuu la soo baxay ku tumasho qaawan oo loo geysto mabaadii'da sharciyada caalamiga ah ee bani'aadamnimada ee la xiriira ilaalinta dadka rayidka ah. UNHCR waxay ku talisay in, si loo yareeyo waxyeellada dadka rayidka ah, ay DFKMG qaaddo tallaabooyin lagu xaqiijinayo in dhammaan hawlgallada askareed ay noqdaan kuwo waafaqsan sharciyada caalamiga ah ee bani'aadamnimada.

22. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu sheegay in dagaalkii cuslaa ee ka dhacay magaalada Muqdisho bishii August 2010 uu mar kale khasaare aad u ballaaran rayidka soo gaarsiiyay. Wuxuu dhammaan dhinacyada ay arrintaani khuseyso, gaar ahaan DFKMG ugu baaqay inay xoogga saaraan ilaalinta dadka rayidka ah. Waxaa is soo taraya wararka sheegaya in colaadda dhexdeeda ay ka dhacaan dilal, doorin iyo rabshado galmood iyo lab-dheddig ku saleysan.

23. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu beesha caalamka ku guubaabiyay inay albaab kasta furaan si loo joojiyo toogashada degdegga ah oo ay ku jiraan qoor-goynta dadka aan waxba galabsan, xubno jariista, karbaashidda, guurka jajuubka ah ee nimanka malleeshiyooyinku gabdhaha yaryar ku guursanayaan, rayidka gaashaanka laga dhiganayo, dumarka lagu soo

rogayo dharka nooca ugu qallafsan, mamnuucista warbaahinta dadweynaha iyo diidista lagu soo rogay dhegeysiga muusigga iyo kulammada dadweynaha . Ergeyga Sare ee Xuquuqda Aadanuhu isaguna arrimahaan oo kale ayuu muujiyay.

24. Ergeyga Sare wuxuu kaloo sheegay in 2008 uu ahaa sannad ay si aad ah u kordheen dilka iyo afduubka hawlawdeennada gargaarku. Ergeyga Sare wuxuu xusay in weerarrada lagu hayo hawlawdeennada gargaarka iyo bulshada rayidka ah aysan marnaba joogsan, isagoo xusay dilal qorshaysan oo loo geystay darsimmo ka tirsan hawlawdeennada gargaarka iyo dadka u dhaqdhaqaaqa bulshada rayidka.

25. Xoghayaha Guud wuxuu sheegay in Puntland, dad la sheegay in lagu tuhmay inay geysteen dilal is dabajoog ah oo isku dayay inay dilaan dadka bulshada ka dhex muuqda, lagu maxkamadeeyay maxkamado degaanka ah oo saddex ka mid ah dil lagu xukumay.

26. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu xusay in xarig gardarro ah iyo xabsi ku hayn ay ku jirto qofka oo muddo dheer xabsiga lagu hayo ka hor inta aan maxkamadda la horgayn, iyo toogasho ku timaadda ka dib dacwo la marsiiyay maxakamado Islaami ah ayaa laga soo xaqiijiyay qaybo dalka ka mid ah.

27. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu walaac ka muujiyay inaysan jirin tiro-xoorin lagu kalsoonaan karo oo muujineysa rabshadaha lagula kaco haweenka. Haweenku kufsi ayay inta badan dagaal-oogayaasha kala kulmaan, waxaana la sheegay inay maalin kasta loola dhaqmo si xaasdnimo ah oo liidata, bani’aadamnimadana ka baxsan, gaar ahaan goobaha ay Al-Shabaab gacanta ku hayaan. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu yiri waa inaan la cafiyin rabshadaha dumarka lagula kacay ee gaarsiisan danbiyada bani’aadamnimada ka dhanka ah, sida ay dhigayaan go’aannada Golaha Ammaanka ee 1325 iyo 1820. Xoghayaha Guud wuxuu kaloo xusay in rabshadaha lab/dheddiga ku saleysan wax aad u yar uun laga soo gudbiyo, gaar ahaan koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya.

28. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu tibaaxay in rabshadaha guryaha ee dumarka lagula kaco ay dhibaato weyn ku hayaan Soomaaliya oo dhan. Maadaama uu burburay qaab qabiileedkii horay u shaqeyn jiray, meelo badan ayaysan haweenku haysan ilaalin rasmi ah iyo mid dahqameed toona.

29. UNDP waxay xustay in dadka dhibaatooyinku ka soo gaaraan rabshadaha galmoodka iyo lab/dheddigga ay ku adkaato inay helaan adeegyo daryeelka ka dambeeya sida daawo bixin, taageero nafsaani ah iyo mid qaanuuni ah. Waxaa intaas dheer, iyadoo inta badan kiisaska rabshadaha galmoodka lagu xalliyo xeer dhaqameedka gar-gooynta. UNDP waxay sheegtay in Xarunta Qabashada Xadgudubyada Galmoodka oo mashruuc tijaabo ah laga furay Hargeysa bishii October 2008.

30. Xeeldheeraha madaxabannaan, Warbixiyaha Gaarka ah ee xukummada aan maxkamadaha la marin, toogashooyinka degdegga ah ama kuwa gardarrada ah, Warbixiyaha Gaarka ah ee Jir-dilka iyo Xaasidnimada kale, macaamilka ama ciqaabta Bani’aadamnimada ka baxsan ama Liidata iyo Warbixiyaha Gaarka ah ee rabshadaha haweenka lagula kaco, sababohooda iyo

raadka ay reebaan ayaa 6dii November 2008, warqad cabasho ah Dawladda u wada diray, iyagoo muujiyay siday uga walaacsan yihiin gabar 13 sano jir ah oo dhagax lagu dilay ka dib markii Maxkamadda Shareecad ee Kismayo ay ku heshay inay dhilleysatay. Eedeynta dhilleysiga waxaa la sameeyay ka dib markii ay gabadhu isku dayday inay malleeshiyada Al-shabaab ee Kismayo gacanta ku haya u sheegto in saddex nin ay kufsadeen. Xoghayaha Guud iyo Wakiilkiisa Gaarka ah ee carruurta iyo colaadaha hubeysan ayaa iyaguna kiiskaan laftigiisa walaac ka muujiyay.

31. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu xusay in Dastuurkii Soomaaliya ee 1991 uu danbi ka dhigayay Gudniinka Dumarka ee Fircooniga. Wuxuu kaloo sheegay in Soomaaliya gudeheeda Gudniinka Dumarka ee Fircooniga uu ka yahay boqolkiiba 98, si gaar ahna loogu sameeyo gabdhaha da'doodu u dhexeyso 4 ilaa 12 sano. Dhaqankaani wuxuu si gaar ah ugu badan yahay beelaha miyiga ku nool.

32. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu sheegay in kufsiga iyo rabashadaha galmoodka ee carruurta lagula kaco ay yihiin walaaca ilaalineed ee ugu weyn. Xayndaabka ay ku jiraan dadka carruurta kula kaca danbiyada xadgudubka ah ee ay ka midka yihiin rabshadaha galmoodku wuxuu Soomaaliya oo dhan ka noqday noqday wax caadi ah.

33. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu sheegay in xambaarista (tahriibinta) dadka, gaar ahaan marka ujeeddadu tahay uga faaiideysi galmood iyo ku adeegasho guri ee dalka gudihiisa iyo dibaddiisuba ay tahay arrin walaac badan xambaarsan. The Secretary-General raised similar concerns.

34. Xoghayaha Guud wuxuu xusay in qiimeyn la sameeyay ay muujisay in rabshadaha galmoodka ay aad ugu badan tahay xeryaha barakacayaasha (IDPs), gaar ahaan kuwa Somaliland, halkaasoo dhibbanayaashu ay guud ahaan ka soo jeedaan qabiillada laga tirada badan yahay ee aan haysan qabiil ay ku gabbadaan. Xeeldheeraha madaxabannaan isaguna sidaas oo kale ayuu sheegay.

35. Sannadkii 2010, ayuu Xoghayaha Guud walaac ka muujiyay in qorashada carruurta iyo colaad u adeegsigoodu ay dhinacyo badani sameynayaan uu kor u kacay sannadkii 2009. Wuxuu farta ku fiiqay in carruurtu ay weli la il daran yihiin colaadaha koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya, isagoo tibaaxay in qiyaas ahaan kumannaan carruur ahi ay ku xiran yihiin kooxaha Al-Shabaab iyo Xisbul Islam. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu isaguna sidoo kale sheegay in carruurtu ay dadka kale ka badsadeen raadka colaadda koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya. Carruurta loo qorto in safka hore ee dagaalka la geliyo ayaa noqotay arrin walaac weyn keentay. Xoghayaha Guud wuxuu DFKMG ku guubaabiyay inay joojiso qorashada carruurta noocay doonto ha noqotee, isagoo ugu baaqay inay si dhab ah ugu dadaalaan sidii loo sii deyn lahaa carruurta ka tirsan ciidmmadeeda ammaanka iyo kuwa xulafada la ahba.

36. ILO waxay xustay in shaqaaleynta ilmuhu ay tahay welwel weyn oo Soomaaliya ka jira, iyadoo ay jiraan carruur askar ah, carruur guryaha ka adeega iyo kuwo waddooyinka ka tuugsada (dawarsada). Daraasado ayaa muujiyay in ugu yaraan boqolkiiba 45 oo carruur lab ah iyo boqolkiiba 54 carruur dheddig ah, oo da'doodu u dhexeyso 5 ilaa 14 sano, ayaa ku xisaabsan ilamaha sahqeeya.

37. Bishii August 2010, Xoghayaha Guud ayaa walaac ka muujiyay in toddobadii bilood ee tegay ay baadda ka baxsan xeebaha Soomaaliya ka dheceen 139 dhacdo oo burcad-badeednimo la xiriira. Soddon markab ayaa la afduubtay halka 17 markab iyo 450 badmaax weli madax-furasho loo heysto. Xoghayaha Guud wuxuu kaloo tilmaamay in ay macquul tahay in maxkamad la soo taago qofkii ku kaca burcad-badeednimo iyo dhac hubeysan oo badda Soomaaliya xeebaheeda ka baxsan ah.

*3. Maareynta caddaaladda (garsoorka), oo ay ku jiraan xayndaabka iyo xeer beegista*

38. Sannadkii 2010, UNODC waxay tilmaantay in meelo badan oo Soomaliya ah uusan ka jirin nidaam shaqeynaya oo garsoorka danbiyada ah, oo aysan jirin wax dib-u-habayn ah oo xeerarka lagu sameeyay, summadaha hadda jiraana aysan ku filneyn wax ka qabashada hawlaha nidaamka garsoorka danbiyada.

39. Xeeldheeraha madaxabannaan weli wuxuu ka welwelsan yahay isku horimaadka xeerarka Soomaaliyeed marka xeer beegista la keeno, wuxuuna sheegay in si degdeg ah loogu baahan ayahay in la isku dhafo xeer dhaqameedka, Shareecada iyo xeerka casriga ah ee rasmiga ah, iyagoo la waafajinayo halbeegyada xuquuqda aadanaha caalamiga ah.

40. UNDP waxay tilmaantay in dadka xeer beegista ka shaqeeya badankoodu aysan haysan wax shahaado ah oo sharciyeysan. Waxaa aad u yar dad shahaado sare oo sharci ah haysta, haweenkuna aad bay ugu yar yihiin dhammaan qaybaha shaqooyinka sharciga oo ay ku jiraan booliska, xeer beegista iyo kala xukun ridistaba.84 Xoghayaha Guud wuxuu sheegay in sannadkii 2009 ay qaalliyaal 10 ka badan oo koonfurta iyo bartmaha Soomaaliya jooga ama la dilay ama lagu khasbay inay shaqadooda ka tagaan.

41. Sida uu sheegay xeeldheeraha madaxabannaan, ma jiro nidaam caddaaladda lagu keenayo dhibbanayaasha ama tallaabo lagula xisaabtamayo dhagar qabayaasha, taas oo keenaysa in caadada xayndaabka, oo ah arrinta aabbaha u ah dagaalka aan dhammaadka lahayn ee Soomaaliya, ay sii badato. Dawladdu waa inay walaceeda ugu weyn ee xuquuqda aadanaha ka dhigataa xal u helidda arrinta xayndaabku. Ergeyga Sare ee Xuquuqda Aadanuhu sidaas oo kale ayay sheegtay. Waxay kaloo xustay in iyadoo ay Maxkamadda Danbiyada Caalamiga ahi kaalin weyn ciyaari karto, haddana qaabab kale oo la xisaabtan ah iyo garsoor ku meelgaar ah ayaa loo baahan doonaa six al loogu helo arrinta xayndaabka. Xoghayaha Guud wuxuu muujiyay taageerada uu u hayo in la diiwaangeliyo xadgudubyada ugu waaweyn ee la sameeyay, iyadoo arrintaas laga dhigayo tallaabo lamahuraan u ah la dagaallanka xayndaabka iyo abuurista nidaam caddaalad iyo dib-u-heshiisiin ah. Wuxuu ku celiyay in ciddii lagu helo masuu'liyadda danbiyo dagaal ay tahay in caddaaladda la hor keeyo. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu ugu baaqay dhammaan dawladaha iyo ururrada dawladaha ku xiran ee DFKMG kaalmo u fidiya, ay taageeraan tallaabooyinka Soomaaliya xayndaabka looga dhammeynayo, oo ay ku jiraan dhisidda ergo xog-raadis oo madaxbannaan dhexdhexaadna ah ama nidaam sidaas oo kale ah.

42. UNDP waxay xustay in maqnaanta gargaar qaanuun oo Dawladdu ay maalgeliso ay tahay jid-gooyada ugu weyn ee ka hortaagan in dadka dhibaatada u nuguli ay helaan cid xaqooda u raadisa. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu sheegay in haweenka dhibku ka soo

gaaro rabshadaha galmoodka iyo lab/dheddigga ku saleysan aysan haysan nidaam xeer beegis oo ay u noqon karaan. Kufsiga iyo rabshadaha kale ee galmoodka iyo lab/dheddigga ku saleysan waxay qabiilladu ula xisaabtamaan sidii is muran beeleed, aan dhibbanuhu qayb ka ahayn, oo badanaa lagu dhammeeyo in mag la bixiyo ama guur jajuub ah oo loo sameeyo dhibbanaha iyo dhagar qabaha.

43. Ergeyga Sare ee Xuquuqda Aadanuhu wuxuu walaac ka muujiyay xaaladda liidata ee xabsiyada Puntland iyo Somaliland, iyadoo xarumaha dadka lgu hayana aysan lahayn daryeel caafimaad oo asaasi ah iyo biyo socda toona. Xoghayaha Guud wuxuu sheegayin dadka ku jira xabsiyada Puntland ay bishiiba kor u kacaan ilaa boqolkiiba 10, maxaabiista badankoodna la soo xiro iyagoo aan nidaam dacwo soo marin.

44. Sida uu sheegay xeeldheeraha madaxabannaan , qaybaha Soomaaliya ka kooban tahay oo dhan ma laha xarummo ku haboon in dumarka lagu xiro, taasoo dumarka ka dhigeysa kuwo aad ugu nugul rabshadaha raga la xiran ama raga ilaalinaya. Gabdho dhallinyar ayaa qoysaskoodu xarumaha dadka lagu xiro u keenaan inay "anshx xumo" la yimaadeen oo xabsiga lagu hayaa ilaa qoyska soo dayntooda uu codsado. Dhallinyaro aan lagu soo oogin wax fal danbiyeed gaarsiisan, marka sharciga la eego, ayaa guddiga ammaanka ee gobalku ay xabsiga u diraan, guddigaasoo go'aammadooda ku saleeya X*eer* dhaqameedka Soomaalida.

45. UNDP waxay xustay in mashruucyo dhulka laga hirgeliyay oo wax looga qabanayo dhibaatada burcad-badeedda ayaa sannadihii 2009 iyo 2010ka hareeyay dadaallada u hoggaansanka sharciga ee Soomaaliya.

### *4. Xorriyadda diinta ama caqiidada, muujinta (ra'yiga), Iskaashiga iyo isu-imaadka nabadda ku saleysan iyo xaqa ka qayb ahaanshaha nolosha guud iyo midda siyaasadeed*

46. UNHCR waxay ku talisay in DFKMG ay qaaddo tallaabooyin la taaban karo oo ay ku xallineyso ismariwaaga ka dhex taagan (qod. 8) ee Gogoldhigga Federaalka ku Meelgaarka iyo waajibaadkeeda ku aaddan xornimada diinta ee uu dhigayo ICCPR, oo ay saxiixday, si loo xakameeyo takoorka lagu hayo Kirishtaanka ama diimaha kale iyo "murtadiinta" Soomaalida, muhaajiriinta, qaxootiga iyo magangelyo doonka ah.

47. Xoghayaha Guud wuxuu sheegay in xaqa xornimada muujinta ra'yiga si joogto ah loo hor istaago. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu sheegay in weriyayaasha dhammaan qaybaha Soomaaliya ay masuu'liyiinta iyo kooxaha mucaaradka ee hubeysan labadaba kala kulmaan hanjabaadyo iyo caga-jugleyn halis ah. Tiro badan oo weriyayaal ah ayaa sidoo kale la dhaawacay oo la xiray. ILO waxay tilmaantay in Soomaaliya weli ka mid tahay meelaha ugu halista badan marka la eego nabadgelyayada weriyayaasha.

48. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu sheegay in dadweynuhu aysan ka dhex muuqan hawlaha nabadeynta/dib-u-heshiisiinta. Iyadoo beesha caalamka kaashaneysa, DFKMG waa inay bishaa kartida Wasaaradda Warfaafinta si ay dadweynaha Soomaaliyeed mar kasta ula socodsiiso arrimaha dantoodu ku jirto.

49. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu kaloo sheegay in dib u dhigistii doorashooyinka Somaliland bishii March 2009 ay keentay mudaharaadyo, iaydoo masuu'liyiintuna ay taa kaga jawaabeen xarig aan loo aabbe-yeelin iyo mamnuucista mudaharaadyada. Weriyayaasha Somaliland waxay badanaa bartilmaameed u noqdaan caga-jugleyn iyo xadgudub, masuu'liyiintuna mar bay amar ku bixiyeen in weriyayaal loo soo xirxiro oo kaliya warbixin duris ah, ama in laga hortago warbixin noocaas oo kale ah.

50. Ku Xigeenka Ergeyga Sare ee Xuquuqda Aadanuhu wuxuu bogaadiyay dadaallada ay masuu'liyiinta Puntland iyo Somaliland ku kordhinayaan ka qaybgelinta haweenka dhammaan dhinacyada kala duwan ee bulshoweynta Soomaaliyeed oo, marka lagu daro dammaanad qaadista xornimada muujinta ra'yiga iyo ilaalinta weriyayaasha iyo difaacayaasha xuquuqda aadanaha, noqoneysa furaha horumarka.

*5. Xaqa shaqada iyo caddaaladda iyo xaalad shaqo oo wanaagsan*

51. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu sheegay in loo baahan yahay in barnaamijka isku-dhafka la sameeyo si loo xaqiijiyo in gunno/mushahaar loo dammaanad qaado dhammaan xubnaha booliska, asluubta iyo xeer beegista, isagoo xusay inaysan caqligal ahayn in shaqaalaha dawladdu ay mushahaar la'aan ku shaqeeyaan, taas oo muddo dheer Soomaaliya ka soo jirtay.

52. ILO waxay xustay in siyaasadaha iyo falalka ka turjumaya mabaadii'da asaasiga ah iyo xuquuqaha shaqadu (FPRW) ay qarka u saaran yihiin inay gebi ahaanba ka tirtirmaan Soomaaliya. Arrintaas waxaa sabab u noqon kara la'aanta ama liidashada qaab maamul oo aan karti u laheyn inuu sameeyo oo hirgeliyo halbeegyo lagu taabbagelinayo xuquuqaha shaqada la xiriira. ILO waxay xustay in helista FPRW buuxda ay fog tahay maadaama nidaamka ay dadku cod ku yeelanayaan uu yahay mid aan wax badani ka dhimman yihiin. Dhaqaalaha dagaalka ku dhex jira ama maqnaansho maamul adag ayay cilladdu ka imaaneysaa. ILO waxay tilmaantay in dadka badankiis ay ka fakaraan uun dhaqaale guud oo ku dhisan shaqo uu qofku noloshiisa kala soo baxo, taas oo dhaqan u noqotay bulsho caadooyinkeedii dhaawac weyni gaareen, haddii aysanba gebi ahaan burburin, oo FPRW six ad dhaaf ah loogu xadgudbay.

*6. Xaqa kafaalada bulshada iyo heer nololeed hagaagsan*

53. Xoghayaha Guud wuxuu sheegay socodka dadku ay ku khasbanaadeen oo ku beegmay xilli roob da'ayo, ayaa keenay inay yaraadaan biyaha nadiifka ah iyo adeegyada asaasiga ah ee cafimaadku. Wuxuu deeq bixiyayaasha ugu baaqay inay sii wadaan taageerada lamahuraanka ah ee ay u fidinayaan dadka Soomaaliyeed. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu isna ku daray in "dhibaatooyin caafimaadka daweynaha ah" ay ka jirto koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya. Dillaacidda cudurrada faafa ee ay ka midka yihiin daacuunka, dhuun-gooyaha iyo jadeecadu way soo noqonoqdaan, iyadoo ay ugu wacan tahay nadaafad xumada, yaraanta biyo nadiif ah oo la cabbo, difaaca jirka oo yaraada nafaqo darro awgeed iyo dar-xumada guud ee nolosha.

54. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu sheegay in xuquuqo kale oo badan oo dhaqaale, bulsho iyo dhaqan ay ku waxyeelloobeen colaadaha hubeysan ee labaatan sano ku dhowaadka

socday, si gaar ah waxaa dhabarka uga jabay xaqa shaqada, cuntada, hugga, hoyga, daryeelka caafimaad iyo adeegyada bulsho ee lamahuraanka ah iyo weliba xaqa.

55. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu sheegay mamnuucidda gargaarka bani'aadamnimo, hakinta cunto qaybinta iyo bartilmaameedsiga hawlwadeennada garagaarka ee ka imaanaya kooxaha hubeysani waxay xadgudub ku yihiin xuquuqaha badbaadinta, cuntada haboon, daryeelka caafimaadka iyo hoyga. Xoghayaha Guud wuxuu ugu baaqay dhammaan dhinacyada colaaddu inay xaqdhowraan mabaadii'da bani'aadamnimada oo oggolaadaan in gargaarka la gaarsiiyo dadka sida aadka ah ugu baahan.

56. UNDP waxay xustay in, marka la eego Yoolasha Horumarinta Kunleyda, Soomaaliya ay u baahan tahay inay maalgelin ballaaran ku sameyso karti bilidda shaqaalaha, kaabaadka hoose, haya'daha iyo kobcis ku saleysan qorshe muddo dheer socda iyo hirgelinta istaraatiijiyooyin muddooyin gaaban iyo kuwo dhexe isugu jira.

### *7. Xaqa waxbarashada*

57. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu tilmaamay in labaatanka sano ee colaaduhu socdeen ay ilaa labo jiil oo wiilal iyo gabdho yaryar ahi ay seegeen faa'iidooyinka laga dhaxlo waxbarashada dhammeystiran. Nidaamyada waxbarasho ee hadda jira, oo markoodii horeba iska koobnaa, waxaa wiiqay colaadaha jira.

Wax qorista iyo akhriska haweenku qiyaas ahaan waa boqolkiiba 12 ilaa 14. Wuxuu kaloo sheegay fikrado cusubi ay keeni karaan in dhallinyarada waxsoo saarkooda lagu badiyo iyadoo loo tababaro barnaamijyo dakhli soo saaris ah.

58. Xoghayaha Guud wuxuu sheegay in intii ay duqeymaha is weydaarsanayeen dhinacyada dagaallamayay ay iskuulladii burbureen ama waxyeelloobeen, macallimiintii iyo ardaydiina ay ama dhinteen ama dhaawacmeen. Dabayaaqadii sannadki 2008 iyo 2009ka dhexdiisii, waxaa kor u kacay weerarrada iskuullada lagu hayay, taasoo qayb ka ah male-awaalka ah in carruurta wax ka barata iskuullada Quraanka loo carbiyo inay ku biiraan kooxaha fallaagada, sidaa awgeedna ay iskuulladaasi noqdeen bartilmaameed askareed oo "sharciyeysan" .

### *8. Dadka laga tirada badan ayahay iyo kuwa dhulka loogu yimid*

59. UNHCR waxay sheegtay in aqoonsiga qabiilku uu weli xoog ku leeyahay dhaqanka Soomaalida uuna badanaa keeno takoorid dhaqaale, bulsho, siyaasad iyo dhaqan oo xad-dhaaf ah oo lagu sameeyo qabiillada yaryar. Barkacayaasha badankood waxay ka soo jeedaan qabiillada yaryar, sidaa awgeedna waxay la kulmeen takoorid fool-xun iyagoo guud ahaan la kulma xadgudubyo xayndaab wata oo ay kula kacaan beelaha ay ku soo degeen. Xeeldheeraha madaxabannaan sidaas oo kale ayuu tibaaxay.

60. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu sheegay in takooridda iyo xadgudubyada lagu hayo dadka laga tirada badan yahay iyo kuwa dhibaatada u nugul aysan marna joogsan. Soomaalida

laga tirada badan yahay sida reer banaadirka/xamarka, Midgaha (Gabooye), Tumaallada iyo si gaar ah Baantu Afrikaanka/Jareerta oo dhaqan ahaan Soomaalida laga dhex takooro, ayaa mar kasta la kulma xadgudubyo iyo meel ka dhac loo geysto xuquuqdooda bani'aadaminnimo.

*9. Muhaajiriinta, qaxootiga iyo magangelyo doonka*

61. UNHCR waxay xustay in Soomaaliya ay hayso ilaa 1,866 qaxooti ah, oo badankood ay Itoobiyaan yihiin ayna deggan yihiin gobollada Puntland iyo Somaliland, waxay kaloo Soomaaliya haysaa ilaa 20,000 oo qof oo magangelyo doon ah, kuwaasoo qayb ka ah dad magangelyo doon ah oo tiradooda lagu qiyaasay 24,961.

62. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu ku taliyay in dawladdu ay xoogga saarto saddex arrimood oo muhiim ah oo ka soo baxay wadahadal uu la yeeshay qaxootiga: abuurista fursado kasbasho; dib u furista iskuullada iyo taageerista haya'daha waxbarashada; iyo xoojinta adeegyada cafimaadka.

*10. Barakacayaasha*

63. Sanndkii 2010, Golaha Xuquuqda Aadanuhu waxay muujiyeen sida fog ee ay uga walaacsan yihiin musiibada ku habsatay barakacayaasha (IDPs) iyo qaxootiga iyo barakaca ballaaran ee ka dhashay colaadaha Soomaaliya iyo xadgudubyada lagu hayo xuquuqda aadanaha iyo sharciyada bani'aadamnimada .

64. UNHCR waxay tilmaantay in colaaduhu ay weli sababayaan barakac aan kala go' lahayn oo baaxad weyn, oo keenay in loo yaaco bartamaha Soomaaliya, Puntland, Somaliland iyo dalalka deriska ah. Dagaallada ugu dambeeyay ee ka dhacay koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya waxay keeneen dad ka badan 1.46 malyan barakacayaal oo 1,110,000 ka mid ahi ay joogeen Muqdisho iyo koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya. Laga soo bilaabo 2007dii, Soomaali lagu qiyaasay 91,960 ayaa Soomaaliya ka tegay, kuwaasoo badankood galeen socdaal halis ah oo ay kaga tallaabayeen Gacanka Cadmeed, halkaasoo ay kumannaan ka mid ahi ku dhinteen.

65. Xoghayaha Guud wuxuu sheegay in masuu'liyiinta Puntland ay si jajuub ah xeryohoodii uga saareen barkacayaal 900 gaaraya ayna masaafuriyeen shisheeye ay uga shakiyeen inay fallaagada xiriir la leeyihiin ama ay ka baqeen in fallaagadu qorato.

66. Wakiilka Xoghayaha Guud ee xuquuqda aadanaha dadka barkacayaasha ah wuxuu ku taliyay in masuu'liyiinta ay arrintaani khuseyso, iyagoo la shaqeynaya wakiillada haya'daha gargaarka, ay hagaajiyaan xaaladda nololeed iyo ammaanka barakacayaasha xeryaha ku jira, oo ay haweenka iyo gabdhaha siiyaan guri aan loo soo geli karin si looga kufsiga iyo rabshadaha kale ee guryaha.

67. Isla Wakiilka Xoghayaha Guud wuxuu carrabka ku adkeeyay in barakacayaashu ay yeeshaan dhammaan xuquuqohoodii iyo xorriyadohoodii ay hore u lahaayeen, oo aan wax takoor ah lagu sameyn meeshay doonaan ha ka soo jeedaane, Wuxuuna masuu'liyiinta qaranka

xusuusiyay in waajib gooni ah uu iyaga ka saaran yahay inay barakacayaasha ilaaliyaan oo taageero u fidiyaan . Wuxuu ku taliyay in la furo marin aammin ah, oo mar kasta furan, wax shuruud ahna aan ku xirneyn oo la mariyo gargaarka bani'aadamnimo ee barakacayaasha loo wado.

## III. GUULAHA, WAXQABADKA UGU WANAAGSAN, CAQABADAHA IYO SEETOOYINKA

68. Xoghayaha Guud wuxuu sheegay in, iyadoo dhammaadka xilligii ku meelgaarka ee Soomaaliya uu soo dhowaaday, uu ka welwelsan yahay in arrimihii kala-guurka la dhammeystiri lahaa aan fari ka qodnayn. Mideynta haya'daha federaalka ku meelgaarka ahi waa arrin muhiim u ah dhisidda kalsoonida Soomaalida iyo beesha caalamkaba. Wuxuu ka codsaday Xukuumadda iyo Baarlammaanka inay khilaafkooda siyaasadeed dhammeeyaan oo ay tallaabooyin wax ku ool ah u qaadaan sidii ay u oofin lahaayee ballaammadii ay ku qaadeen inay sameynayaan summado cadcad oo ku yimaada wadatashiyo dhab ah.

69. Xoghayaha Guud wuxuu xusay in hoggaamiyayaasha Afrika ay muujiyeen sida dedgdegga ah ee loogu baahan yahay in DFKMG ay dadaal badan sameyso si ay maamulkeeda u hagaajiso oo xal ugu hesho is qabqabsiga hoggaankeeda ka dhex jira. Baaqii Istanbul ee laga soo saaray Shirkii Istanbul ee Soomaaliya ee la qabtay May 2010 wuxuu ka turjumayay sida ay beesha caalamku isugu raacsan tahay in DFKMG looga baahan yahay waxqabad dheeraad ah; in kooxaha ka maqnaa Heshiiskii Jabuuti lagu dhiirrigelinayo inay ku soo biiraan hawlaha nabadeynta iyo in loo baahan yahay in la bilo kartida AMISOM si ay u sugaan ammaanka goobaha istaraatiijiga ah ee Muqdisho.

70. Xoghayaha Guud wuxuu sheegay in weerarrada burcad-badeednimadu ay raad xun ku yeesheen ammaanka badmaaxista badda ka baxsan xeebaha Soomaaliya, rajadii dhaqaalaha ciriiri geliyeen, kalsoonidii ganacsiga dhaawac u geysteen oo ammaankii aaggaas oo dhan ay sii xumeeyeen.

71. Xoghayaha Guud wuxuu xusay in 2 malyan oo qof oo ay ku jiraan 1.4 malyan oo gudaha waddanka ku barakacayay ilaa 2007dii, ay gargaar degdeg ah u baahan yihiin1 iyo in $151 malyan oo kaliya oo maalgelin cusub laga helay hawlaha qaylo-dhaanta mideysan ee sannadkii 2010, halka isla waqtigaas sannadkii 2009 hawlaha qaylo-dhaanta mideysan laga helay $237 malyan. Wakiilka Xoghayaha Guud ee carruurta iyo colaadaha hubeysan wuxuu sheegay in lacagta gargaarka bani'aadamnimo ee Soomaaliya loo helay ay sii yaraatay. Xeeldheeraha madaxabannaan wuxuu yiri waa in beesha caalamku ay ballanqaaddaa inay waqtigaan xasaasiga ah maalgelinayso hawlaha Qarammada Midoobay ee la xiriira hirgelinta istaraatiijiyada caalamiga ah ee Soomaaliya.

# IV. MUDNAANAHA QARANKA EE WAAWEYN, IS-XILQAAMISTA IYO BALLAMMADA

**K/H**

# V. KARTI BILIDDA IYO TAAGEERADA FARSAMO

72. Sannadkii 2010, ayaa Golaha Xuquuqda Aadanauhu wuxuu weydiistay Dawladaha Xubnaha ka ah, haya'daha Qarammada Midoobay ee arrintaan ku lug leh iyo daneeyayaaashaba inay Dawladda Soomaaliya u fidiyaan taageerada farsamo ee ay aadka ugu baahan tahay si ay kor ugu qaaddo ka qaybgalkeeda wax ku oolka ah ee hawlaha kala duwan ee Qarammada Midoobay. Waxay kaloo guddigu Xafiiska Ergayga Sare ku guubaabiyeen inuu bixiyo taageerada farsamo iyo tababarrada loo baahan yahay.

73. Xoghayaha Guud wuxuu qaylo-dhaan u diray beesha caalamka si ay DFKMG u siiyaan taageero askareed iyo mid dhaqaale iyo agabyo kaleba. Xeeldheeraha madaxabannaan isaguna qaylo-dhaan taas la mid ah ayuu sameeyay.

74. Taageerada Farsamo ee ILO waxay xoogga saartay abuurista fursado shaqo oo macquul ah iyadoo la la adeegsanayo mashruucyo hoos ka dhisid shaqaaleyn degdeg ah oo lagu bixinayo shaqo muddo gaaban ah.

75. UNDP, iyadoo adeegsanaysa mashruucyadeeda booliska rayidka, ayay rabtaa inay sameyso adeeg boolis oo lala xisaabtami karo, wax ku oolna ah si loo xaqiijiyo in adeeggaasi uu waafaqsan yahay oo u hoggaansan yahay halbeegyada xuquuqda aadanaha.

76. UNDP waxay tilmaantay in Mashruuca Albaabka Caddaaladdu uu gacan ka geystay fidista adeegyada taageerada qaanuunka, iyadoo heshiisyo lala galay bixiyayaasha taageerada qaanuunka iyo Ururrada qareennada , waxaana madaxda qaranka lagala sahqeeyay sidii loo hagaajin lahaa waxtarka iyo jawaab-celinta Maxkamadaha.

## Xusid

Erayo-gaabinta soo socota ayaa dukumintigaan dhexdiisa lagu sheegay:

CAT Convention against Torture and Other Cruel, Inhuman or Degrading Treatment or Punishment

CED International Convention for the Protection of All Persons from Enforced Disappearance

CEDAW Convention on the Elimination of All Forms of Discrimination against Women

CRC Convention on the Rights of the Child

CRPD Convention on the Rights of Persons with Disabilities

ICCPR International Covenant on Civil and Political Rights

ICCPR-OP 1 Optional Protocol to ICCPR

ICCPR-OP 2 Second Optional Protocol to ICCPR, aiming at the abolition of the death penalty

ICERD International Convention on the Elimination of All Forms of RacialDiscrimination

ICESCR International Covenant on Economic, Social and Cultural Rights

ICRMW International Convention on the Protection of the Rights of All Migrant Workers and Members of Their Families

OP-CAT Optional Protocol to CAT

OP-CEDAW Optional Protocol to CEDAW

OP-CRC-AC Optional Protocol to CRC on the involvement of children in armed conflict

OP-CRC-SC Optional Protocol to CRC on the sale of children, child prostitution and child pornography

OP-CRPD Optional Protocol to CRPD

OP-ICESCR Optional Protocol to ICESCR

# Koobis uu diyaariyay Xafiiska Ergayga Sare ee Xuquuqda Aadanaha Iyadoo la raacayo tuduca 15 (c) ee lifaaqa go'aanka Golaha Xuquuqda Aadanaha 5/1

**A/HRC/WG.6/11/SOM/3**

**Golaha Xuquuqda Aadanaha**

**Koox Hawleedka Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalamiga ah**

**Kalfadhiga kow iyo tobnaad**

**Geneva, 2–13 May 2011**

**Somalia**

Warbixntaan waxaa lagu soo koobay warbixannadii ay 26 daneeyayaal[1] u soo gudbiyeen Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalamiga ah. Warbixinta kuma jiraan wax aragti, ra'yi ama talooyin ah oo ka yimid Xafiiska Ergayga Sare ee Qarammada Midoobay u qaabilsan Xuquuqda Aadanaha (OHCHR), ama wax xukun ama xaqiijin ah oo la xiriira sheegashooyinka qaarkood. Macluumaadka halkaan ku jira si nidaamsan ayaa tixraac loogu sameeyay dhammaadka bogga, intii suurogal ahna, qoraalkii asalka ahaa waxba lagama beddelin. Macluumaad yarida ama in arrimo gaar ah xoogga la saaro waxaa sabab u noqon kara maqnaanshaha warbixinnada daneeyayaashu ay arrintaas iyada ah ka bixiyeen. Qoraal buuxa oo warbixinnada la helay oo dhan ah, waxaa laga heli karaa bogga internetka ee OHCHR. Warbixintaan waxaa la diyaariyay iyadoo la tixgeliyay in wareegga ugu horreeya ee dib-u-eegistu ay afar sano ku xilliyeysan tahay.

## I. MACLUUMAADKA DAHSOON IYO QAAB-DHISMEEDKA

### A. Heerka waajibaadka caalamiga ah

1. PHRN waxay ku talisay in Soomaaliya ay ansixiso heshiisyada caalamiga ah ee aysan qaybta ka ahayn oo ay ku dhafto hawlaha dib-u-dhiska.[1]

*1 PHRN, p. 5.*

2. GIEACPC waxay sheegtay in Soomaaliya ay saxiixday hase yeeshee aysan ansixin Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha (CRC).[2] KARAMA waxay ku talisay ansixinta CRC.[3] CWS waxay Soomaaliya ku guubaabisay inay muujiso inay ka go'an tahay ansixinta CRC iyadoo u mareysa abuurista xeer dejin haboon oo dalka gudihiisa laga hirgeliyo.[4]

3. CWS waxay Soomaaliya ku guubaabisay inay saxiixdo oo ansixiso Mucaahadada Ciribtirka Dhammaan Qaababka Takoorka Haweenka (CEDAW).5

## B. Qaab-dhismeedka dastuuriga ah iyo kan qaanuuniga ah

4. PHRN waxay ku talisay in Dawladda Federaalka ku Meelgaaraka ah (DFKMG) ay xil iska saarto (1) sidii ay u ilaalin lahayd xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamaiga ah ee bani'aadamnimada sidii ay ballanka ugu gashay Gogoldhigga Federaalka ku Meelgaarka ah (TFC) iyo Dastuurkii 'hore', iyo weliba heshiisyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya ay qaybta ka tahay;[6] iyo (2) sidii ay u dejin lahayd dastuur cusub oo ilaaliya oo xaqdhowra xuquuqda aadanaha ee Soomaalida oo dhan oo dhidibbada u aasa Soomaaliya cusub oo ku saleysan dimuqraadiyad iyo caddaalad bulsho oo loo siman yahay ayna ku jiraan dadka laga tirada badan yahay.[7]

5. SFS waxay sheegtay inay lamahuraan u tahay in Soomaaliya ay leedahay dastuur shaqeynaya oo ilaalinaya xuquuqda dadweynaha iyadoo aan loo ala soocayn da', lab/dheddig, diin ama qabiil. Waxay kaloo sheegtay in mabaadii'da la isugu dheellitirayo awoodaha laamaha xeer dejinta, xeer ilaalinta iyo fulintu ay lamahuraan u tahay xaqiijinta dawlad adag iyo qaran horumarsan.[8]

6. NUSOJ waxay sheegtay DFKMG ay dhammeyso dib-u-eegistii xeerka warbaahinta ee December 2007, si loo soo gaaro halbeegyada caalamiga ah. "Somaliland" waa inay dib u eegtaa sharciga warbaahinta,"Puntland" waa inay joojisaa sameynta xeerarka cabburinta warbaahinta.[9]

7. STP waxay sheegtay in dhaqangelinta meelaha qaarkood laga dhaqangeliyay xeerka adag ee Shareecadu uu keenay walaac la xiriira xaqdhowrka xuquuqda asaasiga ah ee aadanaha.[10]

---

*2 GIEACPC, p. 2, para. 2.1.*

*3 KARAMA, p. 6.*

*4 CSW, p.1, para. 2.*

*5 CSW, p.1, para. 2.*

*6 PHRN, p. 5.*

*7 PHRN, p. 5.*

*8 SFS, p. 3, para. 10.*

*9 NUSOJ, p. 5.*

*10 STP, p. 1.*

## C. Asaaska Haya'deed iyo kan xuquuqda aadanaha

8. JSI waxay sheegtay in "Somaliland", laga dhisay ergada xuquuqda aadanaha hase yeeshee xilkoodu uusan caddeyn, madaxbannaanida ay saameynta siyaasadda ka madaxbannaan yihiinna ay aad u kooban tahay.[11]

# II. TAABBAGELINTA IYO ILAALINTA XUQUUQDA AADANAHA EE DALKA GUDIHIISA

## A. Iskaashiga lala sameynayo barnaamijyada xuquuqda aadanaha

*1. Iskaashiga lala sameynayo warbixiyayaasha gaarka ah*

9. CSW waxay Soomaaliya ku guubaabisay inay martiqaad furan u soo saarto Warbixiyayaasha Gaarka ah ee Golaha Xuquuqda Aadanaha, gaar ahaan Warbixiyaha Gaarka ah ee xornimada diinta ama caqiidada.[12]

*2. Iskaashiga lala sameynayo Xafiiska Ergayga Sare ee Xuquuqda Aaadanaha*

10. HRW waxay ku talisay in DFKMG ay martiqaad u fidiso Ergayga Sare ee Qarammada Midoobay u qaabilsan Xuquuqda Aadanaha si loo badiyo tirada kormeerka shaqaalaha iyo ka warbixinta xadgudubyada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha.[13]

## B. Hirgelinta waajibaadka xuquuqda aadanaha caalamiga ah, iyadoo la tixgelinayo sharciga haboon ee bani'aadamnimada caalamiga ah

*1. Sinnaanta iyo takoor la'aanta*

11. JS1 waxay sheegtay in dadka naafada ahi ay yihiin dadka loogu liidista badan yahay "Somaliland" gudeheeda. Uma furna meel ay ka galaan waxbarasho dhammeystiran, macluumaad, gaadiidka dadweynaha iyo dhismayaasha.[14]

*2. Xaqa nolosha, xorriyadda iyo ammaanka qofka.*

12. AI waxay sheegtay inaysan muuqan in dhinacyada colaadda midkoodna uu qaaday tallaabooyin feejignaan ah oo uu kaga fogaanayo laynta ama dhaawicista dadka rayidka ah,

---

*11 JS1, p. 2.*

*12 CSW, p. 1, para. 2*

*13 HRW, p. 4.*

*14 JS1, p. 5.*

iyagoo sidaas ku jabinaya waajibkoodii ahaa ilaalinta nafta dadka rayidka ah ee uu saaray sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada. Waxay sheegtay in kooxaha hubeysan ee mucaaradka ahi ay weli wadaan inay weerarrada ka soo qaadaan aagagga degaammada ah ama rayidku ay u kala gooshaan iyadoo ciidammada AMISOM iyo ilaa xad kuwa DFKMG marar badan lagu eedeeyay inay ku jawaabaan hoobiyayaal iyo madaafiicda aartalleriga ay ku tuuraan meesha laga soo weeraray. [15]JS2 waxay walaac ka muujisay duqeynta aan loo meel dayin ee lala beegsanayo aagagga aadka loola deggan yahay.[16] AI waxay ku talisay in DFKMG ay (1) si rasmi ah oo furan ciidammadeeda ammaanka, iyo malleeshiyaadka xulafada la ahba, amar ugu siiso inaysan qaadin weerarro sharci darro ah oo ay ku jiraan kuwa lala beegsado dadka rayidka ah, iyo kuwa inkastoo yoolku uu yahay mid askareed oo sharci ah, haddana raad talaxtag ah ku yeelanaya dadka rayidka ah ama hantidooda iyo (2) inay raadiso taageero caalami ah oo dhammaan ciidammada ammaanka ee DFKMG, oo ay ku jiraan taliyayaasha ciidammadu, si hagaagsan loogu tababaro xeerarka hawlgallada si ay xilkooda ugu gutaan hab waafaqsan xuquuqda aadanaha caalamiga ah iyo mabaadii'da sharciga bani'aadamnimada iyo halbeegga hawlgal ee ugu fiican.[17] ARM waxay ku talisay in DFKMG ay dadaal badan sameyso si looga fogaado dhimashada iyo dhaawaca dadka rayidka ah ee Muqdisho ku nool oo aan rayidka dhibkooda loo arkin wax aan la huri karin.[18]

13. Sidoo kale, HRW waxay ku talisay in DFKMG ay (1) soo saarto amarro rasmi ah oo cadcad oo ay qaaddo tallaabooyinka loo baahan yahay oo dhan oo lagu xaqiijinayo in ciidammadeeda ammaanka iyo malleeshiyooyinka xulafada la ahiba ay u hoggaansamaan sharciga bani'aadamnimada iyo xuquuqda aadanaha caalamiga; iyo (2) inay joojiso hoobiyaha ay ku duqeynayso goobaha la deggan yahay ee magaalada Muqdisho iyadoo aan la qaadin tallaabooyin lagu xaqiijinayo in duqeyntaasi ay waafaqsan tahay mabaadii'da kala soocidda iyo ku talaxtagga ee uu dhigayo sharciga bani'aadamnimada caalamiga.[19]

14. SNHRC waxay sheegtay in mudaharaad guud oo ka dhacay"Somaliland" sannadkii 2008 ay boolisku xabbado nool ku rideen dadkii mudaharaadayay, taasoo keentay in labo qof ay dhintaan dhowr kalena ay dhaawacmaan.[20] Labo mar oo kalena waxaa la toogtay dad mudaharaadayay taas oo sababtay saddex dhimasho ah iyo dhaawac faro badan.[21]

15. AI waxay kaloo sheegtay in gacan ka hadalku uu raad aad u xun ku yeeshay fidinta gargaarka caafimaad iyo kan bani'aadamnimo. Ammaan darrada iyo rabashadaha aan loo meel dayin ayaa iyaguna halis ku ah hawlgalka bani'aadamnimo iyo kaabadka asaasiga ahba.[22]

---

*15 16 A1, p.1.*
*16 JS2, p. 1.*
*17 A1, p. 5.*
*18 A1, p. 6.*
*19 HRW, P. 4.*
*20 SNHRC, p. 2.*
*21 SNHRC, p. 2.*
*22 AI, p. 2.*

16. COGWO waxay sheegtay in goobaha ay DFKMG gacanta ku hayso dadka lagu xiro goobo qarsoodi ah, iyadoo dadka qaarkiis loo xirto si madax-furasho looga helo.[23] JS2 waxay sheegtay ciidammada boolisku ay si xoog leh faraha ugula jiraan waxyaabaha ay ka midka yihiin baadda, jir-dilka iyo dhaqammo kale oo xun-xun, iyadoo uu xayndaabka dacwo oogistu uu yahay caqabadda ugu weyn ee xadgudabyadaan loo joojin la' yahay.[24] waxay kaloo sheegtay in boolisku uu hawlgalladiisa goobaha ay DFKMG ka taliso, weli ka wado dilal badan oo aan maxkamad la marin.[25] JS2 waxay sheegtay in "Puntland" ay ciidammadu jir-dil u geystaan dadka rayidka ah iyo kuwa mucaaradka ahba.[26]

17. JS1 waxay sheegtay in "Somaliland" laga soo sheegay inay jiraan carruur xabsiga loo dhigay kiisas yaryar sida; waalid caasinnimo, carruurtaasoo meel lagula xiray danbiilayaal halis ah, taasoo carruurtaas u bandhigeysa xadgudub iyo murugo hoose iyo mid muuqataba. Wax yar mooyee, gebi ahaanba saldhigyada booliska iyo xabsiyada degmooyinka ee "Somaliland" ma laha qolal u gaar ah carruurta sharciga ka tallaabsada.[27]

18. JADO waxay sheegtay in Jubaland looga baahan yahay in dadka si fiican loo baro rabshadaha guryaha waayo dhaqankaani waxay ku saleeyaan caadooyinka soo jireenka ah.[28]

19. KAALO waxay sheegtay in marka la eego rabshadaha lab/dheddigga ku saleysan ee "Puntalnd" ka dhaca, ay saraakiisha maamulku maalgeliyaan oo fuliyaan tababarro khasab ah oo la siiyo saraakiisha ay ka midka yihiin booliska, qareennada, qaalliyada, shaqaalaha caafimaadka iyo kuwa arrimaha bulshada, saraakiisha waaxda socdaalka iyo macallimiinta, tababarradaas oo ku saabsan (1) aqoosashada kiisaska rabshadaha lagula kaco haweenka iyo gabdhaha ee guriga gudihiisa iyo bulshada dhexdeeda (2) sida loola tacaalo dhibbanayaasha noocaas ah oo ammaankooda loo sugo; iyo (3) sida ugu fiican ee caddeeymaha loo ururiyo, loo ilaaliyo, loo tixgeliyo oo maxkamadda loogu soo bandhigo.[29]

20. JS1 waxay sheegtay in rabshadaha lab/dheddigga ku saleysan iyo kuwa galmoodku ay si caadi ah uga dhacaan "Somaliland" gudeheeda oo kufsigu lagula kaco beelaha taagta daran uu noqday wax caadi ah.[30] Sharcigu awood uma laha inuu ilaaliyo dhaibbanayaasha kufsiga, iyadoo kiisaska intooda badan lagu xalliyo xerr dhaqameedka oo marmarka qaarkood keena in dhibbanaha lagu khasbo inay xadgudbaha guursato.[31]

21. KARMA waxay sheegtay in dagaalka Soomaaliya, kufsiga hub ahaan loo siticmaalo. Kufsiga ay boolisku geystaan waa yaraaday, hase yeeshee waxaa weli halkiisii ka sii socda u

*23 COGWO, p. 3.*

*24 JS2, p. 2.*

*25 JS6, p. 2.*

*26 JS2, p. 5.*

*27 JS1, p. 7.*

*28 29 JADO, p. 2.*

*29 Kaalo, p. 4.*

*30 JS1, p. 4.*

*31 JS1, p. 4.*

adeegsiga ay kooxaha hubeysani kufsiga u adeegsanayaan inay ku ciqaabaan oo u cagajugleeyaan ciddii iyaga ka soo horjeesata. Aad bay u ayr tahay in dhacdo noocas ah xukun lagu riday. Dhibbanayaasha kufisguna ma haystaan meel ay ku gabbadaan.[32] Waxay ku talisay in Soomaalidu ay kufsiga u xukumaan sida loo xukumo danbiyada dagaalka iyadoo la raacayo Go'aammadii Golaha Ammaanka ee Qarammada Midoobay 1325 ee (2000) iyo 1820 ee (2008).[33]

22. SSWC waxay sheegtay "kufsiga dagaalka la xiriira" uu aad u badan yahay oo gaar ahaan haweenka ku jira Xeryaha Barakacayaashu (IDPs) ay yihiin kuwa ugu nugul in falkaas lagula kaco, maadaama kufsiga ay dumarka iyo gabdhuha u geysanayaan malleeshiyooyinka iyo tuugada kale ay noqotay wax iska caadi ah.[34]

23. JS4 waxay sheegtay in dumarka iyo gabdhaha "xoolo-jirka" ahi ay halis ugu jiraan weerar ay u geystaan kooxaha malleeshiyooyinka iyo tuugada hubeysan ee sida badan ku sugan koonfurta Soomaaliya.[35]

24. SSWC waxay sheegtay in inkastoo haweenku ay asal ahaan dhexdhexaad ka yihiin ka soo jeedista qabiilka, haddana waxay weli bartilmaameed u yihiin weerarrada iyo aar-goosiga qabiileysiga ku saleysan.[36]

25. JADO waxay sheegtay in gabdho badan oo da'doodu yar tahay oo Jubaland jooga lagu khasbay inay guursadaan "Mujaahidiinta Al-shabaab" iyagoo aysan waalidkoodu arrintaas raalli ka ahayn. Ka hor imaanshaha guurarka noocaas ahi wuxuu keenay dil toogasho ah.[37] JS4 ayaa iyaduna arrintaan sheegtay.[38]

26. JS1 waxay sheegtay in gudniinka fircooniga ee dumarku uu yahay caado aad u qoto dheer.[39] COGWO waxay sheegtay in dhaqankaani uu yahay mid baahsan iyo in rabshadaha lab/dheddigga ku saleysani ay yihiin dhibaato guud oo la qariyo.[40] SWC waxay sheegtay in gabdhaha yaryar ee da'doodu u dhexeyso 4–8 la tolo ama "qodbo" si dhowrsanaantooda loo xaqiijiyo ilaa laga guursanayo.[41]SSWC waxay timaantay in gabdho badan ay u dhinteen naxdin iyo xanuun intii gudniinku socday, iyadoo sida caadiga ah aan la adeegsan wax suuxin ah, qaar kalena ay u dhintaan hurgunka ama dhiig-baxa xad-dhaafka ah.[42]

*32 KARAMA, p. 3.*
*33 KARAMA, p. 3.*
*34 SSWC, p. 1.*
*35 JS4, p. 2.*
*36 SSWC, p. 1.*
*37 ADO, p. 1.*
*38 See JS4, p. 2; See also COGWA, p. 5.*
*39 S1, p. 5.*
*40 COGWO, p. 3.*
*41 SSWC, p. 1.*
*42 43 SSWC, p. 1.*

27. JS1 waxay sheegtay in "Somaliland" ay jiraan warar sheegaya in tahriibka ama xambaarka dadku uu kor u kacay. Caqabadaha arrintaan hor yaallana waa iyadoo uusan jirin sharci mamnuucaya xambaarista ama tahriibinta dadka, dhaqaalaha booliskuna uu aad u kooban yahay.[43]

28. JS4 waxay sheegtay in carruurta askarta loo qoranayo ay aad u badan tahay.[44] STP waxay sheegtay in qorahsda malleeshiyooyinka iyo askarta rasmiga ahba ay u fududeysay inay carruurta askar u qortaan dacdarrada ay Barakacayaashu (IDPs) ku sugan yihiin, dhibaatada bani'aadamnimo iyo saboolnimada sii badatay.[45]

29. SSWC waxay tilmaantay in carruurta la qorto oo la tababaro ka dibna loo adeegsado colaadaha hubeysan. Inkastoo ay aad u yar tahay in gabdhaha la qorto, haddana warar la xaqiijiyay waxay muujinayaan gabdho u shaqeynaya kooxaha mucaaradka ah, gaar ahaan shaqooyinka cunto karinta iyo nadiifinta. Gabdhuhu waxay kaloo qaadaan walxaha qarxa iyo sahayda kale, waxayna ka qayb qaataan hawlaha sir-doonka.[46]

30. ARM waxay sheegtay in caddeyn aan caad yari saarnayn lo hayo in kooxaha dagaallamayaayi ay carruurta si baahsan askar ugu qortaan, oo DFKMG lagu eedeeyay inay carruurta askar ahaan u qorato iyadoo qaar badan oo carruurtaas ka mid ah lagu arkay iyagoo si caadi ah uga hawlgalaya goobaha dagaalka ee Muqdisho.[47] Waxay ku talisay in la joojiyo carruurta askarta loo qoranayo.[48] AI waxay ku talisay in DFKMG ay sameyso baaritaan wax ku ool ah oo madaxbannaan, kaasoo lagu xaqiijinayo in ciidammada iyo booliska DFKMG aysan qoranin qof da'diisu 18 sano ka yar tahay.[49] HRW waxay ku talisay in DFKMG ay baaritaan dhab ah sameyso oo qaaddo tallaabooyin kale oo lagu xaqiijinayo in ciidammadeeda aan wax carrur ahi ka mid ahayn. HRW waxay kaloo ku baaqday in la sii daayo wixii carruur ah ee horay loo qortay.[50]

31. JS1 waxay sheegtay in "Somaliland" ay carruur badani waddooyinka ku nool yihiin, badanaana ay tuugsadaan/dawarsadaan, amrmarka qaarkoodna ay ku kacaan falal danbiyeed iyagoo nolo raadinaya. Carruurtaas qaarkood xiriirka ay qoyskooda la leeyihiin ama waa yar yahay ama maba jiro, waxayna la qabsadeen nolol uusan jirin qof ka weyn oo gacan qabta. JS1 waxay kaloo sheegtay in carruurta agoonta ahi ay ku soo abteen "Somaliland" gudeheeda, iydoo aysan gebi ahaanba jirin haya'do carruurtaan xannaaneeya.[51] Waqtigaan xaadirka ah, waxaa jira hal haya'ad oo Hargeysa ka shaqeysa, xaaladda haya'daas gudeheeduna wuxuu ahaa mid liitay.[52]

*43 JS1, p. 7.*
*44 JS4, p. 3.*
*45 STP, p. 1.*
*46 SSWC, p. 1.*
*47 ARM, p. 4.*
*48 ARM, p. 6.*
*49 AI, p. 5.*
*50 HRW, p. 4.*
*51 JS1, p. 6.*
*52 JS1, pp. 6–7.*

32. GIEACPC waxay sheegtay stated that, pursuant to Article 439 of the Penal Code (1962), corporal punishment was lawful in the home[53] and in schools.[54] In the penal system, there was no provision for corporal punishment as a sentence for crime, but it was lawful under Somali

Islamic Law.[55] In alternative care settings, corporal punishment was lawful.[56] In "Somaliland" corporal punishment was unlawful in the home,[57] in schools,[58] and in alternative care settings.[59]

*3. Maareynta garsoorka, oo ay ku jiraan xayndaabka iyo xeer beegista*

33. KARAMA waxay sheegtay inuusan Soomaaliya nidaam caddaaladeed ka jirin maadaama uusan jirin maamul qaran oo shaqeynaya ama maxkamado ka shaqeynaya in danbiyada la xukumo. Natiijaduna waxay noqotay, in danbiyeynta xadgudubyadu ay u shaqeyso hab la jiifiyaana bannaan ah oo ama meel ka dhac ku ah sharciga caalamiga ah ama iska indhatirta danbiyada rabshadaha wata kuwooda ugu foosha xun. KARAMA waxay ku talisay in la sameeyo nidaam caddaaladeed oo shaqeynaya oo ku dhisan Go'aankii Golaha Ammaanka ee Qarammada Midoobay ee 1325.[60]

34. NUSOJ waxay sheegtay inuusan nidaam caddaaladeed ka jirin Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya. Maxkamaduhu waxay adeegsadaan xeerka "Shareecada" xukummada ay soo saaraanna waa kuwo khilaafsan Qodobka 14 ee ICCPR.[61] JS2 waxay sheegtay in maxkamadahaasi aysan xaqdhowrin habsami u socodka dacwada xataa sida uu xeerka Shareecadu dhigayo.[62] NUSOJ waxay shegtay in nidaamka caddaaladda ee "Puntland" ay madaxbannaanidu ku yar tahay, sida badanna ay madaxdu horay u sii gaarto xukunka maxkamadda.[63] NUSOJ waxyaabaha ay ku talisay waxaa ka mid ah in nidaamka caddaaladda lagu xoojiyo xeer ilaalin madaxbannaan iyo bixinta dammaanadaha lagu tibaaxay Qodobka 14 ee ICCPR.[64] JS1 waxay sheegtay in haweenka "Somaliland" loo diiday xaqa ay u leeyihiin inay nidaamka caddaaladda qayb ka noqdaan, nimanka ayaana colaadaha furdaamiya iyagoo raacaya habka xeer dhaqameedka.[65]

35. IPDO waxay sheegtayin dadweynaha Soomaaliyeed ay soo mareen xadgudubyadii ugu xaasidsanaa uguna liitay ee xuquuqdooda aadaminnimo loo geysto, taasoo ka dhalatay dhaqanka xayndaabka. Qaar badan oo xadgudubyadaas ka mid ah ayaa marka la eego baahsanaantooda

*53 GIEACPC, p. 2, para. 1.1.*
*54 GIEACPC, p. 2, para. 1.2.*
*55 GIEACPC, p. 2, para. 1.4.*
*56 GIEACPC, p. 2, para. 1.6.*
*57 GIEACPC, p. 2, para. 1.1.*
*58 GIEACPC, p. 2, para. 1.2.*
*59 GIEACPC, p. 2, para. 1.6.*
*60 Karama, p. 2.*
*61 NUSOJ, p. 4, para. 26*
*62 JS2, p. 3.*
*63 NUSOJ, p. 4, para. 27.*
*64 NUSOJ, p. 5.*
*65 JS1, p. 4.*

iyo qaabka ay isula socdaan, gaari kara danbiyo dagaal iyo danbiyo bani'aadamnimada ka dhan ah.[66] PHRN waxay ku talisay in si furan oo daacad ah wax looga qabto xadgudubyada waaweyn ee xuquuqda aadanaha laga galay, iyadoo kiisaska gaarka ahna maxkamadaha la hor keenayo.[67]

36. AI waxay sheegtay in xayndaabku uu Soomaaliya u horseeday in xuquuqda bani'aadamka laga galo xadgudubyo halis ah oo qaarkood ay danbiyo dagaal gaarsiisan yihiin. Ma jiro hal qof oo lagula xisaabtamay gaboodfalladii xuquuqda aadanaha loo geystay muddadii labaatanka sano ka badanayd ee colaadaha hubeysani socdeen.[68] AI waxay intaas ku dartay inuu yar yahay horumarka ay DFKMG ka sameysay ballanqaadkeedii ahaa hirgelinta caddaaladda iyo dib-u-heshiisiinta iyadoo la raacayo Heshiiskii Nabadaa ee Djibouti 2008.[69] AI waxay DFKMG kula talisay (1) inay taageerto dhisidda ergo xog-baaris oo madaxbannaan oo aan dhinacna u janjeerin, ama wax u dhigma, oo soo baara soona bandhiga gaboodfallada loo geystay xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada muddadii dagaalladu socdeen;[70] (2) inay shaqada ka joojiso qof kasta oo ciidammadeeda amniga ka tirsan oo lagu tuhunsan yahay inuu gaboodfallo halis ah ka galay xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada, inta uu socdo baaritaan dhab ah oo madaxbannaan;[71] iyo (3) inay hirgeliso baaritaan degdeg ah oo madaxbannaan oo aan dhinacna u janjeerin oo lagu sameeyo xadgudubyada laga galay xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada, oo ciddii mas'uuliyadaas lagu helo caddaaladda la hor keeno iyagoo la saarayo maxkamado hufan oo aan xukunka dilka lagu fulin.[72] HRW waxay iyaduna ku talisay in DFKMG ay xaqiijiso in dhammaan eedeymaha ku xadgudubka sahrciga bani'aadamnimada ee la rumeysan karo ee loo jeediyo ciidmmadeeda loo baaro si degdeg ah oo muuqata oo aan dhinacna u janjeerin, oo ciddii masuu'l ka noqota gaboodfallo halis ahna lala xisaabtamo iyadoo aan loo eegeyn garaaddohooda.[73]

37. JS4 waxay sheegtay in loo baahan yahay in la dhiso ergo xog-baaris oo caalami ah oo soo baarta xadgudubyada xuquuqda aadanaha iyo sharciga bani'aadamnimada, soo hesha eedaysanayaasha xadgudubyada, soo bandhigta danbiyada halistoodu aadka u fogtahay ee laga yaabo inay u baahdaan in mustaqbalka baaritaan dheeraad ah lagu sameeyo oo ay diyaariyaan talo-bixin ku saabsan sida ugu haboon ee loo fulin karo caddaalad iyo la xisaabtan ay danbi-oogisi ku jirto.[74] HRW waxay ku talisay in DFKMG ay Xoghayaha Guud ee QM weydiisato in ergada noocaas ah la dhiso oo marka la dhiso ay si buuxda ula shaqeyso.[75]

*66 IPDO, p. 4.*
*67 PHRN, p. 5.*
*68 AI, p. 4.*
*69 AI, p. 4.*
*70 AI, p. 5.*
*71 AI, p. 5.*
*72 AI, p. 5.*
*73 HRW, p. 4.*
*74 JS4, p. 6.*
*75 HRW, p. 4.*

38. HRW waxay ku talisay in DFKMG ay ka fakarto sidii ay u hirgelin lahayd barnaamij magdhow wax ku ool ah lagu siinayo dadka naftooda ku waaya, ku dhaawacma iyo kuwa hantidoodu dagaalka ku burburto. Barnaamijkaani waa inuusan ku koobnaan magdhowga xadgudubyada xeerarka dagaalka ee waa inay sidoo kale ku jiraan magdhow tacsiyeed iyo hibooyin laga bixinayo khasaaraha ka dhasha hawlgallada ciidammada AMISOM. Barnaamijku waa inuusan beddel ka noqon tababarrada iyo tallaabooyinka kale ee lagu xaqiijinayo in ciidammada AMISOM ay u hoggaansamaan sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada.[76]

### *4. Xaqa qofku u leeyahay inaan noloshiisa gaarka ah la farogelin*

39. JS5 waxay sheegtay in Soomaaliya ay weli ku socoto inay ciqaab mariso galmoodka iyadoo raalli la isaga yahay dhex mara labo qof oo qaangaar ah oo isku jinsi ah.[77] JS5 waxay ku talisay in xeerarka oo dhan loo dejiyo si waafaqsan waajibaadka caalamiga ah ee dawladda ka saaran xuquuqda aadanaha, iyadoo la joojinayo dhammaan qodobbada loo cuskado in danbi lagu oogo labo qof oo qaangaar ah oo iyagoo raalli isaga ah isu galmooday.[78]

### *5. Xorriyadda diinta ama caqiidada, muujinta (ra'yiga), Iskaashiga iyo isu-imaadka nabadda ku saleysan iyo xaqa ka qayb ahaanshaha nolosha guud iyo midda siyaasadeed*

40. OD waxay sheegtay in 10kii May 2009, ay DFKMG ansixisay in dalka oo dhan laga hirgeliyo xeerka Shareecada.[79] OD waxyaabaha ay ku talisay waxaa ka mid ah (1) in dastuurka lagu saleeyo halbeegyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, oo ay ku jiraan xornimada diinta ama caqiidada;[80] (2) in la ilaaliyo dadka Kirishtaanka iyo ah iyo diimaha kale ee laga tirada badan yahay iyo (3) in la helo isu dulqaadasho iyo is xaqdhowr diimeed.[81]

41. JS2 waxay sheegtay in xorriyadda muujinta ra'yigu ay liidato oo ciddii wax ka sheegta kooxaha Islaamiga ah ee hubeysan lagu aammusiyo hanjabaad, rabshado iyo caga-jugleyn.[82] JADO waxay sheegtay in xabsiga la dhigo wadaadda jooga Jubaland ee muujiya in xukummada kooxaha Islaamiyiinta qaarkood ay Shareecad lid ku yihiin.[83]

42. SSC waxay sheegtay in wariyayaashu ay caddaadis dheeraad ah kala kulmaan DFKMG iyadoo dawladdu ay cabburin ku hayso warbaahinta madaxabannaan. Goobaha hoos yimaada xukunka DFKMG, madaxdu waxay xadgudubyo u geystaan xorriyadda muujinta ra'yiga iyadoo mas'uuliyadi ay ka saaran tahay ilaalinta xaqaan.[84] JS3 waxay sheegtay in ciidammada ammaanku ay galeen xarumo raadyayaal iyagoo u hanjabay oo u caga-jugleeyey wariayayaashii halkaas

*76 HRW, p. 5.*
*77 JS5, p. 1.*
*78 JS5, p. 3.*
*79 OD, p. 2.*
*80 OD, p. 4.*
*81 OD, p. 5.*
*82 JS2, p. 6.*
*83 JADO, p. 3.*
*84 SSC, p. 3.*

joogay.[85] SSC waxay sheegtay in saraakiisha "Puntland" ay cadaadis ku hayso warbaahinta iyadoo mar kasta mamnuucid iyo ciqaabo adag ku soo rogta. Wariyayaasha, xirfadlayaasha kale ee warbaahinta, waxgaradka, odayaasha dhaqanka iyo muwaadiniinta caadiga ah oo isku daya inay ra'yigooda muujiyaan waxay badanaa la kulmaan xarig sharci darro ah, iyadoo six un loola dhaqmo iyo xadgudubyo kale oo xuquuqdooda dastuuriga ah loo geysto.[86] SSC waxay sheegtay in saraakiisha "Somaliland" ay iyaguna warbaahinta cadaadis ku hayaan, iyagoo wariyayaasha si joogto loogu hanjabo, loo xiro ama loo aammusiyo.[87]

43. NUSOJ waxay sheegtay in dilka wariyayaaasha iyo weeerarrada kale ee warbaahinta lagu hayo ay siyaasad salka ku hayaan, ujeeddaduna tahay isku day toos ah oo lagu cabburinayo xorriyadda muujinta ra'yiga oo jid-gooyo loogu dhigayo xaqa ay dadweynuhu u leeyihiin inay wax ogaadaan iyadoo bahda warbaahinta lagu khasbayo inay iyagu wararkooda kala hufaan.[88] NUSOJ waxay ku talisay in mudnaanta koowaad la siiyo xayuubinta xayndaabka saaran kuwa ku xadgudba xorriyadda muujinta ra'yiga iyo xuquuqaha kale ee aadanaha, gaar ahaan kuwa ka tirsan xoogagga dhaqangelinta sharciga iyociidammada ammaanka. NUSOJ waxay kaloo sheegtay in laga soo bilaabo markii malleeshiyooyinku ay wariyayaasha ku timaammeen "jaajuusyo", wariyayaasha laga dhigtay bartilmaameed sharciyeyesan.[89]

44. ARM iyo JS3 waxay tilmaameen in warbaahintu ay bartilmaameed u noqotay rabshado iyo caga-jugleyn iyadoo dhawr wariye la dilay sannadkii 2010.[90] JS3 waxay sheegtay in tiro wariyayaal ahi ay u carareen dalalka deriska.[91]

AI waxay sheegtay in kooxaha colaaddu u dhexeyso ay si isku mid ah wariyayaasha ugu hor istaagaan inay hawshooda gutaan oo ay dadweynaha waxa dhacaya u gudbiyaan.[92] AI waxay ku talisay (1) in baaritaan dhab ah, oo oo degdeg ah ay dhinac dhexdhexaad ahi ku sameeyaan dilalkii loo geystay dhammaan dadkii matalayay bulshada rayidka ah iyo wariyayaasha, oo sidoo kale la baaro dhammaan hanjabaadaha hadda lagu hayo; iyo (2) in la ilaaliyo oo la xaqdhowro xorriyadda muujinta ra'yiga oo la soo afjaro dhammaan falalka halista ku ah xorriyadda muujinta ra'yiga, oo ay ku jiraan hanjabaadaha ay saraakiisha DFKMG iyo kooxaha hubeysan ee xulafada la ahi ay u geystaan wariyayaasha iyo qaybaha kale ee warbaahinta.[93]

45. JS1 waxay sheegtay in "Somaliland" ay si gardarro ah wariyayaal u xiratay oo muddo gaaban xabsiga lagu hayay.[94] SNHRC waxay sheegtay in dhawr mar xarig siyaasad salka ku haya

*85 JS3, p. 2.*

*86 SSC, p. 3.*

*87 SSC, p. 4.*

*88 NUSOJ, p. 5, para. 30.*

*89 NUSOJ, p. 5, para. 32.*

*90 ARM, p. 3; JS3, pp. 1–2.*

*91 JS3 p. 2.*

*92 AI, p. 3.*

*93 AI, p. 5.*

*94 JS1, p. 8.*

loo geystay hawlwadeennada warbaahinta, lana xiray wargeysyo iyo xarun telefishin oo sidoo kale la mamnuucay in idaacadaha la iska maqlo la furto.[95]

46. SNHRC waxay tilmaantay inay jireen muddooyin uu xisbiga mucaaradka ee Kulmiye uusan awood u heli jirin inuu kulammadiisa qabsado, waayo saraakiisha dawladda ayaa milkiilayaasha hoteellada oo dhan amar ku siin jiray inaysan Kulmiye qolalka shirarka ka kireyn.[96]

47. JS1 waxay sheegtay in sababo la xiriira dhaqan oo aabbaha ku dhisan awgood haweenka "Somaliland" laga fogeeyo go'aan gaarista bulshada. Lamana aqoonsan lamana taabbagelin kaalinta bulsho ee haweenka. Nidaamka qabaliga ah oo ah meesha ugu sarreysa oo ay dhaqanka iyo caaddoyinkuba ku salaysan yihiin ayaa ah caqabadda haweenka ka hortaagan inay ku dhaqaaqaan xaqa ay u leeyihiin inay hawlaha siyaasadda ka qayb qaataan .[97] JS1 waxay sheegtay in nimanka oo kaliya ay fuulaan sallaanka siyaasadda ayna qaataan go'aammada siyaasadeed iyo nolsha guud ee bulshada ee Somaliland.[98]

48. SNHRC waxay sheegtay in sannadkii 2008, siyaasiyiiin caan ah ay dhowr bilood "Somaliland" ugu xirnaayeen inay xaqooda siyaasadeed ku dhaqaaqeen Siyaasiyiintaasi waxay sameeyeen urur siyaasadeed oo ka soo horjeeda fikradaha uu aamminsanaa xisibiga talada hayay. Sannadihii la soo dhaafay waxaa jiray xabsi u taxaabid kuwaas oo kale ah.[99]

### *6. Xaqa shaqada iyo caddaaladda iyo xaalad shaqo oo wanaagsan*

49. SFS waxay sheegtay in shaqo la'aanta "Puntland" ka jirta ay sarreeyso.[100] Taaasina waxay keentay in dhallinyaradu ay u nuglaadaan hawlaha sharci darrada ah sida burcad-badeednimmada. SFS waxay sheegtay in la adeegsadao siyaasado kor loogu qaadayo awoodda dhallinyarada oo ay ka mid tahay in dhallinyarada la siiyo fursado loo siman yahay, iyadoo aan loo eegayn lab/dheddig iyo qabiilka ay ka soo jeedaaan.[101]

50. SFS waxay sheegtay in helitaanka fursadadaha shaqooyinka ee "Puntland" uu tartankoodu aad u sarreeyo, iyadoo shuruudaha la iska rabo aan dadka degaanku buuxin karin heerka waxbarashadooda oo hooseysa ageed.[102] SFS waxay ku talisay in (1) dhammaan iskuullada iyo xarumaha tababarka farsamooyinku ay shaqo-diris la sameeyaan haya'daha degaanka, kuwa caalamiga ah, waaxaha xukuumadda iyo qaybaha ganacsiga, iyo (2) iyadoo shaqo la'aanta lagu yareyn karo in waaxaha shaqo bixinta oo dhan loo soo jeediyo inay ardayda markaas qalin jabisay fursad shaqo bilaabis siiyaan.[103]

*95 SNHRC, p. 2.*
*96 SNHRC, p. 2.*
*97 JSI, p. 3.*
*98 JSI, p. 3.*
*99 SNHRC, p. 2.*
*100 SFS, p. 2, para. 6.*
*101 SFS, p. 3, para. 14.*
*102 SFS, p. 5, para. 27.*
*103 SFS, p. 5, para. 30.*

51. JS1 waxay sheegtay in sharciga Islaamka, xeerka rasmiga ah iyo xeer dhaqankaba ay mamnuuc tahay in carruurta la shaqaaleysiiyo.[104] iyadoo ay sidaasi jirto, ayaa haddana sababo la xiriira saboolnimada, barakaca iyo dayaca awgood, ay kumanaan carruur ahi ku shaqeeyaan xaalado ka faaii'deysasho ah iyagoo la siiyo wax ay nafta ku celiyaan kaliya. Carruurtaas qaar ka mid ah waxaa loo dhiibaa shaqooyin halistoodu aad u sarreyso.[105]

*7. Xaqa kafaalada bulshada iyo heer nololeed hagaagsan*

52. AI waxay sheegtay in dhaqadhaqaaqa hawlwadeennada gargaarka la xannibay.[106] AI waxay DFKMG kula talisay inay haya'daha gargaarka u oggolaato inay si nabadgelyo ah oo waqtiyeysan oo aan wax shuruud ku xirneyn ugu tagaan dhammaan barakacayaasha ah iyo dadka kale ee rayidka ah ee gargaarka u baahan ee jooga goobaha gacanteeda ku jira.[107] STP waxay sheegtay in xaaladda bani'aadamnimo ay ka sii dareyso, iyadoo ay ugu wacan tahay ammaan darrada iyo colaadaha hubeysan, dagaallada qabiillada dhexdooda ka jira, barakaca dadweynaha, cudurradamaciishad xumada iyo tabcashada oo yaraatay. Colaadaha iyo weerarrada lala beegsanayo haya'daha gargaarku waxay keeneen in gargaarkii cuntada la joojiyo oo ay adkaato in la gaaro dadka colaadaha ku waxyeelloobay.[108]

53. IPDO waxay sheegtay in nafaqo-darro aad u ba'ani ay Soomaaliya ka jirto stated.[109] Qarammada Midoobay iyo haya'daha la shaqeeyaa way isku dayeen inay hagaajiyaan marimmada gargaarka bani'aadamnimo, hase yeeshee ammaan darrida iyo weerarrada lala beegsado hawlwadeennada gargaarka ayaa sabab u ah in gargaarka degdegga ah la gaarsiin waayo dadka dhibaatooyinka la il daran.[110]

54. COGWO waxay sheegtay in qalabka yaal cisbitaallada Muqdisho ku yaal ay aad u liitaan oo aysan haqabtiri karin baahida caafimaad iyo tan nafsaaniga ah ee dhibbanayaasha colaadaha.[111] Haweenku ma heli karaan adeegyada gargaarka degdegga ah ee cisbitaallada dawladda ama xarumaha kale ee caafimaadka, sababo la xiriira karti darro guud iyo aqoon yari haysata hawlwadeennada caafimaadka awgeed[112] SSWC waxay sheegtay in Soomaaliya ay ka mid tahay meelaha adduunka ugu sarreeya marka la eego ummul raaca iyo ubadka lea'shada,[113] iyadoo mid ka mid ah shantii carrurr ahba uu la il daran yahay nafaqo darro ba'an.[114] SNHRC waxay iyaduna sheegtay in nafaqo darrada carruurtu ay "Somaliland" ka tahay wax caadi ah.[115]

*104 JS1, p. 7.*
*105 JS1, p. 7.*
*106 AI, p. 3.*
*107 AI, p. 5.*
*108 STP, p. 3.*
*109 IPDO, p. 1.*
*110 IPDO, p. 2.*
*111 COGWO, p. 2.*
*112 COGWO, p. 3.*
*113 SSWC, p. 1.*
*114 SSWC, p. 2.*
*115 SNHRC, p. 4.*

55. SSWC waxay sheegtay in nafaqo darrada haysata hooyooyinka iyo carruurtu ay noqotay wax caadi ah, iyadoo cudurrada la is qaadsiiyo ee daacuunku ka mid yahay ay soo badanayaan. Hooyooyinka waxaa kaloo dhibaato ku haya carruur lea'shada maadaama aysan heli karin xarummo caafimaad oo carruurtooda laga siiyo daawooyinka iyo tallaallada ay u baahan yihiin. Haweenka uurka lihi sida badan ma helaan daryeel caafimaad oo dhalitaanka ka horreeya, taasoo keenta in ay dhibaato adag la kulmaan marka ay ummulayaan maadaama aqoontooda caafimaad ee asaasiga ahi ay aad u hooseyso ayna ku adag tahay inay tagaan cisbitaallada aadka u yar ee la heli karo.[116]

56. SFS waxay sheegtay in helitaanka adeegga caafimaadka ee "Puntland" uu dad cayiman u gaar yahay.[117] waxay kaloo sheegtay in adeegga caafimaadku uu aad u liito, tayada cisbitaalladuna aad u hooseeyaan oo ay ku yar yihiin qalabka caafimaadka ee casriga ah iyo daawooyinkuba, hawlwadeennada caafimaadkuna aysan tababar iyo waxbarasho fiican haysan, dadkuna aysan helin daawo iyo daryeel ku filan.[118]

57. SFS waxay sheegtay in dadka "Puntland" ku nool ay boqolkiiba 24 kaliya helaan biyo nadiif ah sannadka oo dhan, iyadoo dadka reer miyiga ah ay boqolkiiba 2 kaliya biyaha ka cabbaan ilo asturan.[119]

*8. Xaqa waxbarashada iyo ka qayb qaadashada nolosha dhaqan ee bulshada*

58. JS1 waxay sheegtay inaysan "Somaliland" ka jirin qaanuun ama siyaasad lagu bixiyo waxbarasho hoose/dhexe oo khasab iyo lacag la'aan ah. Sidoo kale ma jiraan manhaj, imtixaanno ama shahaadooyin.[120]

59. SNHRC waxay sheegtay inaysan "Somaliland" ka jirin waxbarasho khasab ah, taasina ay keentay in carruurta qoysaskoodu saboolka yihiin aysan waxbarasho helin. Waxbarashada dugsiyada dawladdu waa lacag la'aan, hase yeeshee maamulayaasha ayaa soo rogay in ardaygiiba uu bishhii bixiyo $1.5 si loo korhdiyo mushahaarka macallimiinta oo ah mid aad u hooseeya. Qoysas badan ayaa lacagtaas u arka mid badan oo sidaa awgeed carruurtooda iskuullada ugu reebay.[121] SNHRC waxay ku talisay in la sameeyo qorshe hawleed qaran oo lagu hirgelinayo waxbarasho hoose/dhexe oo khasab iyo lacag la'aan ah.[122]

60. SFS waxay sheegtay in kharashka waxbarashada oo ay ku jiraan mushahaarka macallimiinta ay bixiyaan oo soo ururiyaan guddiyada waalidiinta ama haya'daha Islaamiga ah ee ka hawlgala "Puntland".[123] Waa hooseeyaa horumarka laga sameeyay Yoolka Horumarka Kunleyda ee lagu ciribtirayo farqiga lab/dheddiga ee waxbarashada ugu dambayn sannadka 2015.[124]

*116 SSWC, p. 2.*

*117 SFS, p. 2.*

*118 SFS, p. 2.*

*119 SFS, p. 3, para. 13.*

*120 JS1, p. 9.*

*121 SNHRC, p. 4.*

*122 SNHRC, p. 5.*

*123 SFS, p. 4, paras. 19–20.*

*124 SFS, p. 4, para. 21.*

61. FAWESOM waxay sheegtay in heerka gabdhaha iyo haweenka waxbarashada ku jira ee "Puntland" uu aad u hooseeyo sababo jira awgood, sababahaasoo ay ka mid yihiin iayadoo aysan iskuullada ka jirin cid ay gabdhuhu ku daydaan maadaama macallimiinta badankood ay rag yihiin, miisaaniyadda waxbarashada oo yar iyo iyadoo aysan jirin miisaaniyad loo qoondeeyay waxbarista gabdhaha, iyadoo saboolnimadu ay gabdhaha ku khasaabto inay ka shaqeeyaan shaqooyin aan ku haboonayn si ay masruufka qoyska uga qayb qaataan, kharashka muuqda iyo midka qarsoon ee ka yimaada marka gabdhaha iskuulka loo diro maadaama aysan qoysas badain awood u lahayn inay bixiyaan lacagta bishii iskuullada laga bixiyo, qalabka yaalla inta badan xarumaha waxbarashada oo aan dabooli karin baahida ardayda dheddiga ah taasoo horseedday nidaam waxbarasho oo aan habooneyn, dhaqan ahaan bulshada Soomaaliyeed oo carruurta labka ah mudnaanta waxbarashada siisa, iyadoo gabdhaha laga sugo inay hawlaha guriga ka soo dhalaalaan.[125]

62. SFS waxay sheegtay in "Puntland", ay 2,500 oo arday dhigato 10 dugsiyada sare ka mid ah, ay gabdhuhu ka noqodeen boqolkiiba 20 marka la isku daro dhammaan ardayda gasahay dugsiyada sare. Boqolkiiba toban ka mid ah labka da'doodu u dhexeyso 15 ilaa 18 ayaa iskuullada dhigta, halka gabdhaha da'doodu 15 ilaa 18 u dhexeyso oo sikuullada dhigta ay yihiin boqolkiiba 5 kaliya. Boqolkiiba sagaal iyo konton, dadku waxay ku nool yihiin miyiga hase yeeshee boqolkiiba 1 ayuunbaa iskuul ku jira. 150 macallin kaliya ayaa ka hawlgala dugsiyada sare, iyadoo wax ka badan boqolkiiba 90 oo macallimiintaas ahi ay lab yihiin.[126]

63. STP waxay sheegtay in meelaha qaarkood xeerka Shareecada si adag loogu dhaqmo, iskuulladana lagu guubaabiyay inay joojiyaan adeegsiga buugaagta qoraalka ee aan islaamiga ahayn ee Qarammada Midoobay ay qaybiso.[127]

### *9. Dadka laga tirada badan ayahay*

64. SNHRC waxay sheegtay in "Somaliland" qaar ka mid ah dadka laga tirade badan yahay loola dhaqmo sidii "dad hooseeya" oo shaqada kaliya oo ay heli karaan ay tahay shaqooyinka aan cidina rabin iyo kuwa lacagtoodu aadka u yar tahay. Dadkaasi waxay ku nool yihiin guryo xaaladoodu aad u liidato. Carruurta dadkaas laga tirade badan yahayna iskuullada ma dhigtaan, waayo waalidiintu ma awoodaan lacgta iskuullada lagu dhigto, carruurtuna waxay ka cabsadaan in iskuullada lagu hagardaameeyo.[128]

65. SOMRAF waxay sheegtay in markii ay dhacday xukuumaddii dhexe ee Soomaaliya uu dalku isu beddelay gobollo ay xukumaan qabiillada waaweyn ee Somaalida. Xayndaabka qabiilka ayaana noqday sida kaliya ee qofka iyo hantidiisu ay ku badbaadi karaan, hase yeeshee dadka laga tirada badan yahay ma heli karin xayndaabkaas, sidaas awgeedna waxay la kulmeen xadgudubyo kala duwan oo xuquuqda aadahanaha ka dhan ah.[129] SOMRAF waxay sheegtay in

*125 FAWESOM, pp. 3–5.*

*126 SFS, p. 3, para. 13.*

*127 STP, p. 2.*

*128 SNHRC, p. 3.*

*129 SOMRAF, p. 2.*

dadka laga tirada badan yahay aysan helin wax caddaalad iyo garsoor ah. Nidaamka garsoor ee ka jira "Somaliland" iyo "Puntland" wuxuu ku dhisan yahay musuqmaasuq, dadka laga tirada badan yahay iyo saboolkuna boos kuma laha.[130]

66. MRG waxay sheegtay in dadka laga tirada badan yahay ay haysato qoqob bulsho, cuno-qabatayn dhaqaale iyo madax-ka-qabsi siyaasadeed. Sida bandanna looma oggola jagooyinka guud ee dawladda, kuwa aadka u yar ee jagooyinkaas haystaayina ma lahan awood dhab oo ay bulshooyinkooda ku matalaan.[131] MRG waxay sheegtay in loo baahan yahay in dib loogu noqdo oo wax laga beddelo nidaamka awood qaybsiga ah ee qabiilka ku saleysan ee loo yaqaan 'habka matalidda ee 4.5', habkaasoo ah xal takooris oo marka la isu geeyo qabiillada laga tirada badan yahay oo dhan laga soo qaadayo kala-barka hal qabiil oo weyn.[132] waxay ku talisay (1) in dastuurka mustaqbalka ee Soomaaliya si cad loogu muujiyo xaqa ay dadka laga tirada badan yahay u leeyihiin sinnaan dhab ah iyo inaan wax takoor ah lagu sameyn, iyadoo la raacayo halbeegyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo

(2) in la kordhiyo ka qaybgelinta dadka laga tirada badan yahay nolosha guud laga qaybgelinayo oo ay dad ugu jiraan shaqaalaha dawladda, dawladaha hoose, xeer-beegista, booliska iyo ciidammada ammaanka.[133]

67. MRG waxay sheegtay inay yar tahay fursadda ay dadka laga tirada badan yahay garsoor caddaalad ah ku helaan haddii ay ka dacwoodaan danbi iyaga lagula kacay ama marka iyaga la soo dacweeyo oo la xiro. Booliska, oo iyagu mar kasta ka soo jeeda qabiillada waaweyn, ayaa sida caadiga ah diida inay baaritaan ku sameeyaan dacwooyinka ay soo gudbiyaan dadka laga tirada badan yahay, iyagoo aan weligood baaritaan ku sameyn eedeymaha kufsiga. Maxkamaduhu waxay meel isaga xooreen xuquuqda uu eedeysanuhu leeyahay ee ay ka mid yihiin cid difaaciisa matasha, racfaan iyo codsi cafis laga dalbado xukunka dilka. Sidoo kale, dadka laga tirada badan yahay garsoo caddaaladeed ma helaan marka xeer dhaqameedka la adeegsanayo.[134] MRG waxay ku talisay in dadka laga tirada badan yahay loo ballan qaado oo loo xaqiijiyo garsoor caddaaladeed oo ay dadka kale ula siman yihiin.[135]

### *10. Barakacayaasha*

68. AI waxay sheegtay in colaadaha hubeysan iyo xadgudubyada la halmaala ee loo geysanayo xuquuqda aadanuhu ay Soomaaliya u keeneen barakac aad u ballaaran.[136] "Somaliland" iyo "Puntland" waxay martigeliyeen tobannaan kun oo barakacayaal ah oo ka yimid Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya. Helitaanka adeegyada caafimaad iyo kuwa waxbarasho ee barakacayaasha ku nool "Somaliland" iyo "Puntland" wuu yar yahay, waxayna u nugul yihiin

*130 SOMRAF, p. 6.*
*131 MRG, p. 1.*
*132 MRG, p. 3.*
*133 MRG, p. 5.*
*134 135 MRG, p. 4.*
*135 MRG, p. 5.*
*136 AI, p. 2.*

in laga eryo meelaha ay deggan yihiin.[137] COGWO waxay tilmaantay in barakacayaashu aysan heli karin baahiyaha asaasiga ah sida cunto, biyo, hoy iyo daryeel caafimaad iyo adeegyada taageerada nafsaaniga ah intaba.[138]

69. ARM waxay ku talisay in "Puntland" iyo "Somaliland" ay joojiyaan celiska ay barakacayaasha ku celinayaan goobaha ay colaaduhu ka jiraan.[139]

70. STP waxay sheegtay in ammaan xumada sii baaheysa ay keentay in haya'do gargaar oo badani ay ka soo baxaan meelihii ay horay u joogeen. Haya'do gargaaar oo tiro yar ayaa marinka Afgoye ee u dhow caasimadda Soomaaliya ee Muqdisho ku taageera in ka badan 400,000 oo barkacayaal ah. Xaaladaha dabaysha, duumada, cudurrada sambabbada iyo xiiq dheertu kor ayay u kaceen. Cisbitaallada ma yaallaan daawo ku filan, shidaalka dab-dhaliyayaasha iyo cunto la siiyo hooyooyinka haysta carruurta nafaqo-darradu haysato.[140]

71. JS1 waxay sheegtay in Hargeysa caasimadda "Somaliland" ay ku yaalliin ugu yaraan lix xero oo barakacayaashu deggan yihiin.[141] Xerryahaasi way buux-dhaafsameen mana jiraan cunto, caafimaad, waxbarasho, hoy iyo shaqooyin ku filan dadka halkaas ku nool.[142]

## III. GUULAHA, WAXQABADKA UGU WANAAGSAN, CAQABADAHA IYO SEETOOYINKA

72. HRW waxay ku talisay in DFKMG ay xaqiijiso in ciidammada Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM) ay helaan tababarro haboon oo la xiriira sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada.[144]

## IV. MUDNAANAHA QARANKA EE WAAWEYN, IS-XILQAAMISTA IYO BALLAMMADA

**K/H**

## V. KARTI BILIDDA IYO TAAGEERADA FARSAMO

**K/H**

*137 AI, p. 2.*

*138 COGWO, p. 2*

*139 ARM, p. 7.*

*140 STP, p. 3.*

*141 JS1, p. 5.*

*142 JS1, p. 6.*

# Xusid

**Bulshada rayidka ah**

COGWO Coalition for Grassroots Women Organisations, Mogadishu, Somalia

NUSOJ National Union of Somali Journalists, Somalia

SSWC Save Somalia Women and Children, Somalia

SSC Somali-Speaking Centre of P.E.N International, London, United Kingdom

STP Society for Threatened Persons, Göttingen, Germany

JADO Jubaland Aid & Development Organization, Dhobley, Somalia

JS1 Somalilamd Civil Society Coalition for the Universal Periodic Review, comprising Nagaad Umbrella, Comprehensive Community Based Rehabilitation in "Somaliland", Hargeisa University Legal Clinic, Somaliland Women Lawyers association, "Somaliland" youth development association, "Somaliland", Somalia.

SFS Somali Family Services, Minnesota, USA

IPDO Iniskoy Peace and Democracy Organisation, Somalia

PHRN PEACE & Human Rights Network, Mogadishu, Somalia

JS2 Centre for Democracy and Dialogue, Mogadishu, Somalia; Puntland Human

Rights Association, "Puntland", Somalia; Wanlawayn HR Organization, Somalia;

Khalif Hudaw HR Organization, Mogadishu, Somalia; Hiran Women Action,

Beletweyne -Hiiran Region, Somalia; Gashan Human Rights Organization,

Mudug Region, Somalia; Hogol Social Development Association, Bay Region,

Somalia; Center For Democracy & Human Rights, Mogadishu, Somalia; Iniskoy

Peace and Democracy Organisation, Bay and Bakol Regions, Somalia; Isha

Human Rights Organisation, Bay Region, Somalia.

JS3 Somali Coalition for Freedom of Expression, Mogadishu, Somalia

Kaalo Kaalo NGO, Garowe, Somalia

GIEACPC Global Initiative to End All Corporal Punishment of Children

AI Amnesty International, London, United Kingdom.*

MRG Minority Rights Group International

FAWESOM Forum for African Women Educationists, Somalia Chapter, Garowe, Somalia

HRW Human Rights Watch, New York, United States of America.*

JS4 International Fountain of Hope Kenya; IIDA Women Development Organization;

Alla Magan; Kalsan; FEPMA (Female Paramedical Association); FATXA;

SWEA(Somali Women Entrepreneur Association); Somali Women Diaspora Network; and IIDA Italia.

JS5 Arc International, Geneva, Switzerland; International Lesbian, Gay, Bisexual, Trans and Intersex Association; International Lesbian, Gay, Bisexual, Trans and Intersex Association –Europe, (Consultative Status); Pan Africa - International Lesbian, Gay, Bisexual, Trans and Intersex Association.

SOMRAF Somali Minority Rights and Aid Forum

CSW Christian Solidarity Worldwide

OD Open Doors, Harderwijk, The Netherlands

ARM African Rights Monitor, Somalia

KARAMA KARAMA

National human rights institution

SNHRC Somaliland National Human Rights Commission, “Somaliland”, Somalia.

# Warbixinta Koox Hawleedka ee Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalmaiga ah Somalia

**A/HRC/18/6**

**Golaha Xuquuqda Aadanaha**

**Kalfadhiga kow iyo tobnaad**

**11 July 2011**

## Arar

1. Koox Hawleedka Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalimga ah DXC (UPR) waxaa lagu asaasay Go'aanka Golaha Xuquuqda Aadanaha ee 5/1 ee soo baxay 18 June 2007, waxayna kooxdu kalfadhigeedii kow iyo tobnaad qabsatay 2 ilaa 13ka May 2011. Dib-u-eegista waxay lagu sameeyay kulankii 4aad ee la qabtay 3dii May 2011. Wafdiga Soomaaliya waxaa hoggaaminayay Marwo Zahra Mohamed Ali Samantar, Wasiiru-dawlaha Xafiiska Ra'iisalwasaaraha Dawladda Federaalka ku Meelgaaraka ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliya ahna barta kulanka qaranka ee ilaalinta carruurta iyo xuquuqda aadanaha. Kulankoodii 8aad ee la qabtay 5 May 2011, ayay Koox Hawleedku ku oggolaadeen warbixinta Soomaaliya.

2. 21kii June 2010, Golaha Xuquuqda Aadanaha ayaa xushay kooxda warbixiyayaasha (troika) ee soo socota si ay u fududeeyaan dib-u-eegista Soomaaliya: Angola, Mexico, Thailand.

3. Iyadoo la raacayo sida uu dhigayo tuduca 15 ee lifaaqa go'aanka 5/1, dukumintiyada soo socda ayaa loo soo saaray dib-u-eegista Soomaaliya:

(a) Soo bandhigid warbixin qaran oo la gudbiyay/qoray iyadoo la raacayo tuduca 15 (a) (A/HRC/WG.6/11/SOM/1);

(b) Diiwaanin uu diyaariyay Xafiiska Ergayga Sare ee Xuquuqda Aadanaha (OHCHR) iyadoo la raacayo sida uu dhigayo tuduca 15 (b) (A/HRC/WG.6/11/SOM/2);

(c) Koobis uu diyaariyay Xafiiska Ergayga Sare ee Xuquuqda Aadanaha (OHCHR) iyadoo la raacayo sida uu dhigayo tuduca 15 (c) (A/HRC/WG.6/11/SOM/2).

4. Liis weydiimo ah oo ay horay u diyaariyeen Belgium, Canada, the Czech Republic, Denmark, Ireland, Latvia, Netherlands, Norway, Slovenia, Sweden, Switzerland iyo Boqortooyada Midowday ee Great Britain iyo Northern Ireland ayaa waxaa Soomaaliya u gudbiyay 'troika'. Weydiimahaan waxaa laga heli karaa mareegta 'extranet' ee UPR.

# I. KOOBISTA QAABKA SOO GUDBINTA DIB-U-EEGISTA

## A. Khudbadii Dawladda Dib-u-eegista lagu sameynayay

5. Madaxa wafdiga ayaa sheegtay in fahmidda xaaladda Soomaaliya iyo dhibaatada siyaasadeed ee ay soo martay muddadii labaatanka sano kor u dhaaftay ay shardi u tahay wadaxaajood kasta oo macno ku fadhiya oo laga yeesho xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya iyo caqabadaha hor yaalla. Labaatankii sano ee la soo dhaafay, Soomaaliya waxaa astaan u noqotay burbur xoog leh oo ku yimid dhammaan adeegyadii asaasiga ahaa iyo dhismihii dawladnimo oo ay ku jiraan haya'dihii xeer beegista.

6. Xasillooni ilaa heer ah ayaa ka jirta Somaliland iyo Puntland, taasoo oggolaatay in horumar cayiman laga sameeyo dhinaca xuquuqda aadanaha. Arrintaan waxaa sababteeda weyn iska leh qabiillada degaanka ee waaweyn oo u adeegsaday awoodda hoggaamiyayaal dhaqameedka la ixtiraamo dardargelinta dib-u-heshiisiinta, halka gobollada bartmaha iyo kuwa koonfureed ay dagaal-oogayaashu u adeegsadeen odayaal dhaqameedyada madashii ay xukunka ku haysan lahaayeen.

7. Colaadaha hubeysan ee aan dhammaadka lahayni waxay keeneen inay gebi ahaanba burburaan hantidii iyo kaaabadihii asaasiga ahaa ee koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya. Halkaasna waxaa ku lumay wixii horumar ahaa ee la sameeyay tan iyo markii xornimada la qaatay ee la dhisay qaran mideysan, waxaa kaloo meesha ka baxay xeer beegistii, dadweynuhuna waxay dib ugu noqdeen xeer dhaqameedkoodii hore iyagoo soo hoos galay qabiilladii ay ka soo jeedeen.

8. Si kastase ha ahaatee, marka dhinaca kale laga eego, qaab-dhismeedkii iyo haya'dihii soo jireenka ahaa oo ku shaqeyn jiray qaraabada, xididka iyo hab maamuuska bulsho (Xeer) ee ilaalin jiray wadajirka beelaha ayaa waxaa wiiqay soo bixitaankii nidaamka casriga ah ee dawladda dhexe. Sidaa awgeed, ayaa markii haya'dihii casriga ahaa ay burbureen oo meesha ka bexeen, ay kuwii dhaqankuna kaalintoodii hore u qaadan kari waayeen.

9. Nidaamkii Dawladeed oo dhan waa in dib loo dhisaa. Caqabadda ugu weyn ee Dawladda Soomaaliyeed hor taalla waa sidii la isula fal-gelin lahaa xeer dhaqameedka iyo dawladnimada casriga ah, mid ka mid ah udub dhexaadyada arrintaanina waa isku dhafka sharciga saxda ah ee Islaamka, xeer dhaqameedka Soomaalida iyo sharciga casriga ah.

10. 2004tii ayay Soomaalidu isla oggolaatay Gogoldhigga Federaalka ku Meelgaarka (Transitional Federal Charter - TFC) oo ka dhashay wadahadal nabadeed oo uu soo qabanqaabiyay

urur goboleedka (IGAD) oo lagu qabtay Kenya 2002 – 2004. Sidii ay Soomaaliya ugu soo guurtay sannadkii 2005, ilaa hadda DKMG waxaa haysta diidmo kaga imaaneysa kooxaha hubeysan.

11. Wafdigu waxay sheegeen in xaaladda Soomaaliya aysan haboonayn nidaamka guud ee Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalimga ah -DXC- (UPR) maadaama ay DXC (UPR) sida caadiga ah dib u eegto xogaha xuquuqda aadanaha ee dawlada ku jirta xaalad caadi ah. Xaalka Soomaaliya sidaas waa ka duwan yahay, DKMG ahi waa inay wax ka qabataa xadgudubyo maalin kasta xuquuqda aadanaha laga galo oo aysan iyadu masuu'l ka aheyn. Awoodda ay DKMG u leedahay inay muwaadiniinteeda ilaaliso way kooban tahay, gaar ahaan kuwa jooga goobaha xukunkeeda tooska ah ka baxsan. Tusaale ahaan dadka ku nool goobaha ay Al-shabaab ka taliso waxay la kulmaan xadgudubyo waaweyn oo xuquuqda aadanaha ka dhan ah oo ay ka mid yihiin dil oo aan maxkamad la marin, jir-dil iyo ciqaabo kale oo liita, baniaa'damnimadana ka baxsan sida gacan/lug gooynta iyo karbaashka.

12. Cutubka 5aad ee Gogoldhigga Federaalka ku Meelgaarka GFKMG (TFC) ayaa qeexaya ilaalinta xuquuqaha iyo xorriyadaha asaasiga ah ee ummadda Soomaaliyeed. Qodobka 14aad wuxuu leeyahay Jamhuuriyadda Soomaaliya waxay aqoonsan doontaa oo hirgelin doontaa dhammaan heshiisyada iyo mucaahadooyinka caalamiga ah ee ay Jamhuuriyaddu qaybta ka tahay.

13. GFKMG (TFC) wuxuu dammaanad qaadayaa xuquuqaha in qofku: si xornimo ah u deggenaado, uga sahqeysto oo ugu safro meel kasta oo dalka ka mid ah; dhiso, qayb ka noqdo urur siyaasadeed, shaqaale, xirfadeed ama bulsho oo sharciga waafaqsan; uu codkiisa dhiibto markuu gaaro 18 sano; oo u tartamo kursi kasta oo bannaan. Gogoldhiggu wuxuu mamnuucayaa in qofka xiriirradiisa la farogeliyo. wuxuuna dammaanad qaadayaa arrimaha ay ka midka yihiin u sinnaanta sharciga loo siman yahay. xaqa nolosha, xorriyadda qofka iyo ammaankiisa, xuquuqda la xiriirta dacwooyinka, shaqada, xaqa isu imaadka iyo xorriyadda shaqo joojinta, xorriyadda macluumaadka iyo warbaahinta, xaqa asaasidda xisbiyada siyaasadda, iyo xaqa asaasidda ururrada bulshada, magangelyada siyaasadda, waxbarashada, ilaalinta qoyska, isbahaysiga bulshada.

14. Cutubka 9aad ee GFKMG (TFC) wuxuu qeexayaa heerka iyo awoodaha xeer ilaalinta federaalka. GFKMG (TFC) wuxuu aqoonsan yahay madaxbannaanida xeer ilaalinta marka ay waajibkeeda gudaneyso iyo kala saaridda awoodaha laamaha Dawladda ee xeer ilaalinta, xeer dejinta iyo fulinta.

15. Baarlamaanka Federaalka ku Meelgaarka ah BFKMG (TFP) wuxuu sameeyay ergooyinka ay ka midka yihiin: ergada dastuurka federaaliga; ergada dib-u-heshiisiinta qaran; ergada qaran ee raadinta iyo diiwaangelinta hantida guud iyo midda gaar; ergada hub ka dhigista iyo hawlgelinta; ergada dib u soo nooleynta dhaqaalaha; ergada isku qabsiga dhulalka iyo hantida; ergada dib-u-dejinta qaran iyo ergada Olimbikada Soomaaliya.

16. Qodobka 71aad ee GFKMG (TFC) wuxuu dhigayaa in Gogoldhiggu uu yeelan doono raad qaanuun oo ku xiran dhaqangelinta Dastuurka Qaran ee Federaalka ee kama dambeysta

ah iyo in Dastuurka Soomaaliya ee 1960 iyo sharciyada kale ee qaranka la raacayo wax kasta oo aan Gogoldhiggaan lagu sheegin ama aan la socon karin.

17. Soomaliya waxay saxiixday tiro heshiishyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha ka mid ah. Waxay saxiixday Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha bishii May 2002 iyo Borotokoolkeeda aan Khasabka ahayn ee ka qaybgelinta carruurta colaadaha hubeysan oo ay saxiixday September 2005.

18. Qodobka 16aad ee ee GFKMG (TFC) wuxuu aqoonsan yahay xaqa nolosha wuxuuna sheegayaa in aan qofna nolshiisa loo qoonsan karin. Si kastase ha ahaatee, xadgudubka xaqa nolosha lagu hayo wuxuu badanaa ka yimaadaa weerarrada ula kaca ah oo aan loo meel dayin ee dadka rayidka ah lagu laayo iyo is qarxinta iyo weerarrada ay Al-Shabaab geystaan.

19. Xeerka ciqaabta ee Soomaaliya wuxuu caadadaan ku sheegay “dhaawac”, “dhaawac halis ah” iyo “dhaawac aad halis u ah” Islaamkuna waa mamnuucay dhaqankaan xanuunka badan. Si kastase ha ahaatee, dhaqanka xun ee Gudniinka Dumarka ee Fircooniga ahi (FGM) aad ayuu ugu baahsan yahay geyiga Soomaaliya. In yar mooyee haweenay ama gabar kasta oo Soomaali ahi way soo martay dhaqankaan xanuunka badan.

20. Qodobka 20aad ee GFKMG (TFC) ayaa dammaanad qaadaya xorriyadda saxaafadda iyo in warbaahintu madaxbannaanaato iyo in qof kasta uu si xor ah ra’yigiisa u muujiyo iyadoo la xaqdhowrayo xudduudda uu sharcigu arrintaas u dhigay si loo ilaaliyo akhlaaqda iyo ammaanka guud.

21. Inkastoo cuntadu weligeed Soomaaliya ku yarayd, haddana abaarta hadda jirtaayi xaaladda waa uga sii dartay. Biyo yaraanta ka jirta meelo badan oo Soomaaliya ahi waxay halis ku tahay nolosha dad malaayiin ah. Baahida ay dadku cuntada u qabaani waxay ku khasbeysaa inay quud u raadsadaan xero barakacayaal oo dadkeedii hore ka bateen. Xaaladdu way ka sii daran tahay meelaha ay Al-Shabaab ka taliso,

22. Sida uu dhigayo GFKMG (TFC), waa in waxbarashada loo aqoonsadaa xaq asaasi ah oo muwaadin kasta oo Soomaali ahi leeyahay, waana in muwaadin kasta uu xaq u helaa waxbarasho hoose iyo mid sare oo lacag la’aan ah.

23. Maadaama ay qayb ka tahay Mucaahadooyinka Geneva ee 12ka August 1949, waxaa Dawladda Soomaaliya xil ka saaran yahay xeerarka sharciga caalamiga ee bani’aadamnimada ee ku lug leh dagaallada hubeysan ee aan caalamiga ahayn.

24. Colaadda Soomaaliya waxaa astaan u noqotay in si baahsan oo is dabajoog ah carruurta loo askareeyo. Dawladdu, siyaasad ahaan, carruur askar uma qorato umana oggola in ciidammadeeda ammaanku qortaan askar carruur ah, waxaana ka go’an inay Soomaaliya ka ciribtirto caadada carruurta askarta loo qoranayo.

25. Dagaalka sokeeye ee Soomaaliya wuxuu dhibaato ku hayaa dadweynaha iyo hantidooda. Ma aha oo kaliya waajib siyaasi ee sidoo kale waa baahi bulsho in si caddaalad iyo dib-u-heshiissiin ku dhisan looga xaaltamo boogihii ka dhashay musiibooyinkii dhacay.

26. Soomaaliya waxaa hor yaalla caqabado adadag oo ay ka mid yihiin saboolnimada, abaarta iyo ammaan darrada oo ay sii hurinayaan maqnaanta haya'do xeer beegis oo si buuxda u shaqeeya. Haddaba si caqabadahaas iyo seetooyinkaas looga gudbo, Dawladdu waxay iska xil saartay inay wax ka qabato dhinacyada soo socda: caafimaadka; waxbarashada; biyaha; haya'daha xeer beegista; booliska; adeegyada xeer ilaalinta; ka dhigista xuquuqda aadanaha asaaska u guurista Soomaaliya cusub; iyo qorshe hawleed loo diyaariyay xuquuqda aadanaha.

27. Dawladuu si buuxda ayay u garowsan tahay dhammaan talooyinka uu soo jeediyay Xeeldheeraha Madaxabannaan ee xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya. Waxaa loo baahan yahay guddi qiimeyn oo caalami ah oo isku dhafan, ayna ku jirto Dawladda Soomaaliya oo heer qaran iyo heer gobolba leh, oo soo qiimeeya baahida Soomaaliya uga baahn tahay dhinaca taageerada farsamo iyo dhinaca karti bilidda.

28. Inkastoo afar go'aan oo oo muhiim ah ay soo saareen Golaha Xuquuqda Aadanaha oo sidoo kale natiijo ay ka soo baxday wadahadalkii Soomaaaliya loogu talogalay ee ugubka ahaa, sida fiicanna la isugu wareystay ee ka dhacay Geneva 29 September 2010, ayaa haddana gaabiska ku jira nidaamka go'aan gaarista ee Qarammada Midoobay uu keenay in horumarkii la sameyn lahaa uu daaho. Xafiiska Ergayga Sare ee Qarammada Midoobay u qaabilsan Xuquuqda Aadanaha (OHCHR) ayay tahay inuu hubiyo in la qaado jid-gooyada u taalla hirgelinta codsiyo kala duwan oo la soo gudbiyay oo la xiriiray sidii Soomaaliya dhinaca xuquuqda aadanaha looga gacan qaban lahaa. DFKMG ah ee Soomaaliya waxay ugu yeeraysaa dalalka walaalaha ah iyo kuwa saaxiibka ah iyo dalkii kale oo doonaba inay u fidiyaan taageero lammaane oo waqtiyeysan oo wax ku ool ah, iyadoo laga shidaal qaadanayo qaab-hawleedka qaanuun ee go'aammadii lagu dhaqangeliyay is afgarashadii aan horay loo arag ee Golaha Xuquuqda Aadanaha ee Qarammada Midoobay.

29. Madaxa wafdigu waxay sheegtay inay si gaar ah ugu faraxsan tahay in wakiilka sharafta leh ee Puntland ay wafdiga qayb ka tahay iyadoo wakiilka madasha ku soo dhoweysay.

30. Wakiilku waxay carrabka ku adkeysay sida ay Puntland uga go'an tahay inay u hawlgasho sidii ay u dhaqangelin lahayd talooyinka Koox Hawleedka. Muddo 12 sano ka badan ayay Puntland hormuud u ahayd ilaalinta midnimada, xudduudaha iyo madaxbannaanida Soomaaliya, iyadoo islamarkaas ka shaqeynaysay nabadda iyo xasilloonida Puntland. Muddadaas 12ka sano ah, waxay Puntland ku guuleysatay inay dhisto haykal siyaasadeed oo maareeyay saddex xil-wareejineed oo si nabadgelyo ah ku dhacay, bixinta adeegyada asaasiga ah iyo martigelinta boqollaal kun oo barakacayaal ah oo ka kala yimid dalka intiisa kale iyo weliba shaqaale muhaajiriin ah oo dalalka deriska ah ka yimid.

31. Laga soo bilaabo wejigii labaad ee dagaalka sokeeye ee Soomaaliya, burcad badeednimmadu waxay halis ku ahayd badmaaxidda caalamiga ah. Saboolnimada iyo shaqo la'aantu waa ku baahsan yihiin Soomaaliya. Bankiga Adduunku wuxuu ku qiyaasay in boqolkiiba 40 ay ka badan yihiin Soomaalida ku nool saboolnimada daran (maalintii hal dollar ka yar), in ku dhow boqolkiiba 75 qoysna ay maalintii quutaan wax ka yar US$ 2. Ku dhowaad saddex meeloodoow labo dhallinyarada Soomaaliyeedna aysan wax shaqo ah haysan.

32. Ka dib markii uu dhacay nidaamkii Siyad Barre 1991kii, maraakiib shisheeye oo jarriif ah ayaa si sharci darro ah, oo aan la ogayn lalana heshiin uga kalluumeysanayay biyaha Soomaaliya, xataa gudaha 12 mayl badeed. Maraakiibtaan shisheeye ee burcad-badeedda ahi waxay ku soo xadgudbeen shabaagihii kalluumeysiga ee xeebaha woqooyi bari Soomaaliya. Kalluumeysigaan sharci darrada ah, oo aan la ogayn lalana heshiin ee burcad-badeednimada ah waa la iska dhegatiray, taasoo caddeynaysa in sida beesha caalamku ay, qayb ahaan, u fahmi la'dahay uuna u shaqeyn waayay tallaabooyinka ay soo jeediyeen six al dhab ah loogu helo halista burcad-badeednimada.

33. Puntland waxay hormuud u tahay dagaalka lagula jiro burcad-badeednimada. In ka badan 280 burcad-badeed ayaa hadda Puntland lagu xiray. Maamulku wuxuu soo saaray sharci gaar ah oo ciqaab adag la saarayo burcad-badeedka la qabto. Xal fudud oo kharash yar ayaa loo hayaa dhibaatada burcad-badeednimada: maalgelinta iyo taageeridda dadaallada maamul dhisidda Puntland gudeheeda iyo dib-u-dhiska bulsho-dhaqaalaha iyo dhaqan-celinta dhallinyarada; mamnuucidda bixinta madax-furashada; wadajir u badbaadinta la haystayaasha iyo furashada maraakiibta ay burcad-badeeddu hadda haystaan; dhisidda ilaalo xeebeed adag oo gaaf-wareega Aagga Ganacsiga u Gaarka ah ee Soomaaliya; isku xirka ciidanka badda iyo danaha ganacsi ee Soomaaliya si ay u isula gaaf wareegaan iyo dib-u-dhiska warshado kalluun iyo dekado oo waqtiyadii hore aaggaan dhaqaale uga imaan jiray.

34. Waqtiyada colaadaha, haweenka waxaa soo gaara nooc kasta oo xadgudub iyo hanjabaad ah, oo ay u dheer tahay iyagoo laga sugayo inay gutaan waajibaadkoodii bulsho ee caadiga ahaa. Maadaama ay yihiin dhibbanayaasha koowaad ee dagaalka, kaalinta ay haweenku ka qaadan karaan dhisidda nabaddu waa lamahuraan. Wasaaradda Horumarinta Haweenka iyo Daryeelka Qoysku waxay wadahadal nabadeed oo lagu guuleystay u qabatay dhammaan haweenka Soomaaliyeed oo ay ku jiraan kuwa Somaliland, Qurba-joogta iyo dalalka kale ee af soomaaliga ku hadla. Abuurista "Haweenka Soomaaliyeed ee aan Xuduudda Lahayn" ee kor loogu qaadayo nabadda oo lagu taabbagelinayo xuquuqda aadanaha ayaa ka mid ah waxyaabaha la iskula soo qaaday kulankaan muhiimka ahaa. Haweenka Soomaaliyeed way joogeen dhammaan dadaalladii nabadeynta, inkastoo ka qaybgalkooda marmarka qaarkood aan la aqoonsan ama la abaalmarin. Dadaalladooda waa in la aqoonsadaa waana in sharfaa.

## B. Wadahalkii fool-ka-foolka ahaa iyo jawaabtii Dawladda Dib-u-eegista lagu sameynayay

35. Muddadii uu socday wadahadalkii fool-ka-foolka ahaa, ayay 55 wafdi bayaanno soo saareen. Bayaanno kale oo dheeraad ah oo waqti yaraan awgeed loo soo saari kari waayay muddadii wadahadalku socday ayaa markii ay diyaar noqdaan loo diri doonaa mareegta 'extranet' ee dib-u-eegis xilliyeedka caalimga ah DXC (UPR). Talooyinkii la bixiyay intii wadahadalku socday waxaa laga heli karaa Qaybta II ee warbixintaan.

36. Saudi Arabia waxay xustay in inkastoo Axdi Qarameedka Federaalka ah lagu adkeeyay xaqdhowrka xuquuqda aaddanaha, haddana si loo taabbageliyo xuquuqda aadanaha waxaa loo baahan yahay in xaaladda ammaanka iyo haya'daha Dawladda la xoojiyo. Saudi Arabia waxay

iftiimisey adkaanta caqabadaha Soomaaliya hor yaalla oo ay ka mid yihiin ammaan darrada, saboolnimada, shaqo la'aanta iyo waxbarasho la'aanta iyo awood darrada haya'daha Dawladda, talooyinna way bixisay.

37. India waxay garowsatay seetooyinka Dawladda ka haysta inay si buuxda u xaqiijiso xuquuqda aadanaha ee muwaadiniiteeda iyadoo dhinaca kalena aqoonsatay dadaalka ay dawladdu ugu jirto sidii ay u baahin lahayd nidaamka lagu gubinayo adeegyada dadweynaha. Waxay xustay sida ay Dawladda uga go'an tahay inay ciribtirto Gudniinka Dumarka ee Fircooniga ah (FGM) iyo inay wax ka beddesho xeerka ciqaabta si caadadaas loo mamnuuco. Waxay madasha xusuusisay mas'uuliyadda beesha caalamka ka saaran u gargaaridda Soomaaliya.

38. Algeria waxay madasha xusuusisay dhibaatooyinka colaaduhu Soomaaliya badeen oo ay ka mid yihiin burcad-badeednimada, kalluumeysiga sharci darrada ah, ku aasidda qashinka suntan ah lagu aasayo xeebaha Soomaaliya iyo abaarta. Waxay rajeysay in Dawladdu ay xaqiijin karto dib-u-heshiisiinta qaran iyadoo intaa ku dartay in dadaallada lagu hagaajinayo xuquuqda aadanaha aan loo arkin kuwo ka madaxbannaan xalka dhammeystiran ee dhibatada. Waxay ku celisay baaqeedii ahaa in hawlaha haya'daha Qarammada Midoobay loo raro meelaha nabaddu ka jirto ee Soomaaliya. Algeria talooyin ayay bixisay.

39. Oman waxay xustay raadka ay colaaddu ku reebtay geyiga Soomaaliya, gaar ahaan raadka ay ku yeelatay xaaladda dhaqaale iyo tan bulsho. Sidaa awgeed, dib-u-eegista Soomaaliya xilligeedii lama sameyn. Oman waxay sheegtay in inkastoo ay Dawladda Soomaaliya caqabado soo wajeheen, haddana ay sameynayso dadaallo ay haya'dihii dawladda dib ugu dhiseyso. Oman talooyin ayay bixisay.

40. Hungary waxay Dawladda ugu bogaadisay sida ay u dooneyso inay hagaajiso xuquuqda carruurta, gaar ahaan dhinaca askareynta carruurta. Waxay welwel ka muujisay wararka sheegaya in ciidammada Dawladda ay carruuri ku jirto iyo in barakacayaashu aysan helin cid ka taageerta baahiyaha asaasiga ah. Waxaa niyad jab ku riday in warbixinta qaranku aysan abbaarin heerka dumarka ee aadka u liita, Hungary talooyin ayay bixisay.

41. Canada waxay aqoonsatay xaaladda adag ee xuquuqda aadanaha Soomaaliya, waxayna meel ku qoratay ballanqaadka ay Dawladdu ballanqaadday in Dawladda ay dhiseyso ay asaas iyo saldhig uga dhigeyso xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamaiga ah ee bani'aadamnimada. Waxay sheegtay in marka Dastuurka Federaalka la dhammeyo, Soomaaliya looga fadhiyo ballanaqaadkeedii ahaa in xuquuqda aadanuhu ay dastuurka ku dhan tahay. Canada talooyin ayay bixisay.

42. Bahrain waxay soo dhoweysay dadaallada laga sameeyay caafimaadka, waxbarashada, xeer beegista iyo wacyigelinta xuquuqda aadanaha. Bahrain waxay xustay in sida kaliya ee caqabadaha jira looga gudbi karo ay tahay iyadoo dhinacyada is haya oo dhammi ay wadashaqayn iyo wadahadal fool-ka-fool ah yeeshaan. Bahrain waxay dhinacyada is haya oo dhan ugu baaqday inay ka wada shaqeeyaan sidii nabad lagu gaari lahaa oo gutaan waajibka ka saaran ilaalinta sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha. Waxay codsatay inay wax ka ogaato tallaabooyinka la adeegsado si wacyiga xuquuda aadanaha Soomaaliya kor loogu soo qaado.

43. Austria waxay Dawladda ugu baaqday inay u hoggansanto waajibaadkeeda xuquuqda aadanaha ee goobaha ay gacanta ku hayso. Waxay welwel ka muujisay dhaqanka jira ee xayndaabka (dadka la tuhunsan yahay) iyo cabburinta warbaahinta madaxabannaan. Waxay dhinacyada oo dhan ugu baaqday inay joojiyaan duqeynta ay ku hayaan goobaha aadka loo deggan yahay. Waxay xustay magacaabidda ay Dawladdu magacowday bar kulan oo Qarammada Midoobay kala shaqeysa arrimaha la xiriira carruurta askarta loo qoranayo. Austria talooyin ayay bixisay.

44. France waxay xustay in Dawladdu ay ku talo jirto joojinta xukunka dilka, faahfahin dheeraad ah oo arrintaas ku saabsan  ayay codsatay. Waxay su'aal ka dhiibatay tallaabooyinka lagu xoojinayo madaxbannaanida  caddaaladda oo lagu xaqiijinayo in dadku ay caddaalad helaan laguna hagaajinayo xaaladda xabsiyada si loo gaarsiiyo heerka caalamiga ah, gaar ahaan xabsiyada dumarka iyo carruurta. France waxay soo dhoweysay in Dawladdu damacsan tahayinay saxiixdo Ciribtirka Dhammaan Qaababka Takoorka Haweenka (CEDAW) oo wax ka beddesho xeerka ciqaabta si loo mamnuuco Gudniinka Dumarka ee Fircooniga ahi (FGM). France talooyin ayay bixisay.

45. United Arab Emirates waxay xustay dadaalka ay Dawladdu ugu jirto xaqdhowrka xuquuqda adanaha iyadoo xaalad adag ku jirta iyadoo muujisay in loo baahan yahay qaab-hawleed haya'deed si hawshaa loo sii xoojiyo. UAE waxay aad ula dhacday dadaalka ay Dawladdu ku dooneyso inay ku taabageliso xeer beegista oo dalka nabad ugu soo dabbaasho.  Waxay carrabka ku adkeysay baahida loo qabo dhisidda hay'adaha iyo in haya'dahaas dhinaca farsamada laga taageero sida lagu sheegay go'aammada Golaha Xuquuqda Aadanaha ee arrintaan la xiriira.

46. Thailand waxay hoosta ka xarriiqday sida ay ula dhacsan tahay dadaalka ay Dawladdu ugu jirto ilaalinta xuquuqda aadanaha iyadoo la wada ogyahay caqabadaha ka hor yimid muddadii ay ku guda jirtay dhismaha haya'adaha Dawladda. Waxay su'aal ka dhiibatay heerka uu marayo fulinta go'aankii Golaha Xuquuqda Aadanaha ee 15/28  oo la xiriiray in Soomaaliya laga taageero dhinaca xuquuqda aadanaha. Thailand waxay welwel ka muujisay taagdarrada nidaamka caddaaladda iyo weerarrada burcad-badeedda ay ka wadaan xeebaha Soomaaliya. Thailand talooyin ayay bixisay.

47. Djibouti waxay xustay caqabadaha xeer beegista hor yaalla ka dib labaatan sano oo colaadi socotay. Waxay wax laga xumaado ku tilmaantay carruurta jajuubka lagu qoranayo ee ka jira goobaha ay Al-Shabaab ka taliyaan, iyadoo, dhinaca kalena, ku bogaadisay Dawladda tallaabooyinka ay arrintaan wax uga qabaneyso.  Si nabadgelyada iyo ammaanka loo sugo, Djibouti waxay carrabka ku adkeysay in Soomaaliya ay u baahan tahay xal isku dhaf ah iyo taageero dhaqaale, mid farsamo iyo mid siyaasadeed oo beesha caalamka ka timaadda.

48. Kuwait waxay xustay dadaallada ay Dawladdu dib ugu dhiseyso haya'daheeda oo ay ku bixineyso adeegyada asaasiga ah ee ay waxbarashada iyo caafimaadku ka mid yihiin.  Si kastase ha ahaatee, lama xaqiijin karo xuquuq aadane oo dunida laga aqoonsan yahay inta aysan jirin cid dadweynaha Soomaaliyeed u dammaanad qaadi karta xaqa nolosha ee Dawladdu ay dooneyso inay u ilaaliso.  Xaqa nolosha waxaa halis geliyay weerarrada hubeysan ee kooxaha hubeysan oo rayidku ay inta badan ku le'daan. Kuwait talooyin ayay bixisay.

49. Switzerland waxay walaac ka muujisay gaboodfallada murugada leh ee loo geysanayo sharciga caalamiga ah oo maalin kasta Soomaaliya laga soo sheegayo, gaboodfalladaas oo ay ka mid yihiin toogashada degdegga ah oo aan maxkamadda la marin; macaamilka xaasidnimada ah oo bani'aadamnimada ka baxsan sida karbaashidda iyo gacan/lug gooynta; guurka jajuubka ah, rayidka oo loo adeegsado gaashaan lagu gabbado iyo hanjabaadaha lagu hayo wariyayaasha iyo difaacayaasha xuquuqda aadanaha. Switzerland talooyin ayay bixisay.

50. Japan waxay soo dhoweysay horumarka laga sameeyay ammaanka guud ee gudaha magaalada Muqdisho iyo qoraalka qabyada ah ee dastuurka. Waxay sheegtay in DKMG looga baahan yahay in iyadoo kaashaneysa beesha caalamka ay hirgeliso xeer beegista oo ay ka shaqeyso hagaajinta xeer dejinta dalka. Japan waxay welwel ka muujisay xadgudubka xuquuqda aadanaha ka dhanka ah ee duamrka iyo carruurta loo geysto. Japan talooyin ayay bixisay.

51. Israel waxay welwel ka muujisay wurarka sheegaya inay adag tahay in la helo, biyo nadiif ah, adeegyada asaasiga ah ee caafimaadka, nidaam maxkamadeed oo madaxbannaan, magdhow iyo in lala xisaabtamo kuwa xadgudubka galmoodka (kufsiga iwm) Soomaaliya ka sameeyay.waxay welwel ka muujisaygoobaha ay fallaagadu ka taliyaan. Waxay beesha caalamka ku guubaabisay inay taageero u fidiyaan DKMG, talooyinna way bixisay.

52. Ireland waxay Soomaaliya ku guubaabisay inay dadaal xoog leh ku bixiso sidii ay u dhisi lahayd nidaam caddaaladeed oo shaqeynaya. Waxay xustay sida ay Soomaaliya uga go'an tahay inay Dastuurka ku saleyso mabaadii'da xuquuqda aadanaha. Waxay muujisay welwelka ay ka qabto warbixinno badan oo sheegaya in dhinacyada is haya oo dhammi ay carruurta askareeyaan. Ireland waxay dhiibatay su'aal ku saabsan tallaabooyinka la qaaday si loo xaqiijiyo in dadka u taagan gargaara bani'aadamnimo iyo haya'adaha gargaarkuba ay Soomaaliya geli karaan iyo in la xaqiijiyo in ilmo ka yar 18 aan loo qoran ciidammada qalabka sida am a booliska. Ireland talooyin ayay bixisay.

53. Slovenia waxay welwel ka muujisay wararka sheegaya carruurta shaqeysa oo qaarkood askar yihiin qaarna waddooyinka ka tuugsadaan. Waxay Soomaaliya ku ammaantay in, tan iyo sannadkii 1991, ay markii ugu horreysay waxbarasho lacag la'aan ah hirgelisay magaalada Muqdisho, hase yeeshee waxay walaac ka muujisay yaraanta carruurta waxbarashada ka qoran. Slovenia waxay welwel ka muujisay takoorka iyo rabshadaha lagu hayo haweenka oo Gudniinka Fircoonigu (FGM) uu ka nid yahay. Slovenia talooyin ayay bixisay.

54. Egypt waxay ka hadashay raadka ay colaadda dabada dheeraatay ku reebtay Soomaaliya iyadoo rajo ka muujisay in dhinacyada oo dhammi ay ka wada shaqayn doonaan sidii xasilloonida dib loogu soo celin lahaa sida ku cad heshiiskii lagu gaaray Shirkii Istanbul ee May 2010 iyo Heshiiskii Nabadda ee Djibouti. Egypt waxay Dawladda ugu bogaadisay dhawaaqa ay ku dhawaaqday inay ansixineyso heshiisyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha. Waxay carrabka ku adkeysay lagamamaarmaannimada taageerada caalamiga ah, talooyinna way bixisay.

55. Azerbaijan waxay xustay dadaalka ay Soomaaliya ugu jirto karti bilidda iyo xaqiijinta adeegyada asaasiga ah. Waxay meel ku qoratay in Soomaaliya ay ku talo jirto inay ansixiso tiro heshiisyada caalamiga ka mid ah oo uu ku jiro CRC.

Azerbaijan waxay sheegtay in taageerada beesha caalamku ay lagamamaarmaan u tahay ka gudbidda caqabadaha haya'adeed iyo kuwa hawlgalladaba. Waxay soo dhoweysay ballanqaadka Soomaaliya ay ballanqaadday ciribtirka askareynta carruurta. Azerbaijan talooyin ayay bixisay.

56. Indonesia waxay ammaantay wadashaqeynta joogtada ah ee Soomaaliya ay la sameynayso barnaamijyada Qarammada Midoobay u qaabilsan xuquuqda aadamaha oo uu ku jiro booqashooyinkii uu xeeldheerihii madaxabannaanaa ee arrimaha xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya uu dalka ku tegay. Waxay xustay caqabadaha Soomaaliya hor yaalla eek a dhashay dagaalka sokeeye ee dabada dheeraaday, talooyinna way bixisay.

57. Germany waxay bogaadisay horumarka Soomaaliya ka sameysay dhanka xuquuqda aadamaha oo ay ka mid tahay qoraalka qabyada ah ee Dastuurka oo la soo bandhigay sannadkii 2010. Germany waxay DKMG weydiisay mawqifka ay ka taagan tahay gudniinka dumarka ee fircooniga ah. Waxay walaac ka muujisay rabshadaha lab/dheddigga ku saleysan iyadoo xustay in xeer beegistu aysan lugo adag ku taagneyn. Germany talooyin ayay bixisay.

58. Yemen waxay xustay in maadaama ay qof dumar ahi wafdiga hoggaamineyso, ay arrintaasi ka turjumeyso kaalinta haweenka ee Soomaaliya. Waxay muujisay sida ay lagamamaarmaan u tahay in la fuliyo go'aammadii ay soo saareen Golaha Xuquuqda Aadanaha ee Soomaaliya. Yemen waxay Dawladda weydiisay dadaallada, ay iyadoo beesha caalamaka la kaashaneysa, u gashay sidii ay ku yareyn lahayd tirada qaxootiga ee u yaaceysa dalalka deriska ah ee Yemen ay ka midka tahay. Yemen talooyin ayay bixisay.

59. Palestine waxay ka hadashay dadaallada ay Dawladdu ugu jirto xaqdhowrka xuquuqda aadanaha iyo sidii arrintaas looga dhigi lahaa udub-dhexaadka xilliga kala-guurka Soomaaliya, dadaalladaas oo ay ka mid yihiin tababarrada iyo wacyigelinta. Isla arrinta iyadoo ka hadleysa, ayay Palestine OHCHR weydiisay sababta loo hirgelin waayay afar go'aan oo ay soo saareen Golaha Xuquuqda Aadanaha ee Soomaaliya waxayna ku baaqday in dadaalka la sii labanlaabo. Waxay beesha caalamka ku guubaabisay inay taageero dhaqaale ku bixiyaan hawlaha go'aammada lagu sheegay si loo hagaajiyo xaaladda Soomaaliya.

60. Portugal waxay soo dhoweysay dadaalka ay DKMG ku hirgelinayso nidaamka dib-u-dhiska Dawladda hase yeeshee, waxay walaac xooggan ka muujisay xadgudubka ballaaran ee lagu hayo xuquuqda aadanaha Soomaaliya oo ay ka mid tahay xadgudubka xaqa nolosha ee ka dhaca goobaha ay Al-Shabaab ka taliso. Waxay DKMG weydiisay qorshayaasha ay arrintaan u diyaarisay. Portugal talooyin ayay bixisay.

61. Uruguay waxay xustay qallafsanaanta xaaladda Soomaaliya, waxayna xoojisay sida ay lagamamaarmaan u tahay in beesha caalamku ay gacan ka geysato dadaallada qaran ee loogu jiro in nabadeynta, kala-guurka siyaasadeed iyo dib-u-heshiissinta qaran asaas looga dhigo horumarinta bulsho-dhaqaale. Waxay welwel ka muujisay xaaladda carryyrta iyo haweenka, talooyinna way bixisay.

62. Denmark waxay walaac ka muujisay xadgudubyada lagu hayo sharciga bani'aadamnimada caalamiga ah iyo xuquuqda aadanaha ee koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya, inkastoo

ay garowsatay dhibka Soomaaliya ka haysta xallinta dhibaatadaan. Waxay kaloo welwel ka muujisay sida dhinacyada colaaddu ay si joogto ah wariyayaasha uga hor istaagaan gudashada hawshooda taasoo keentay in warbaahiyayaal badan ay khasab ku noqotay inay dibadaha u cararaan hanjabaado xuquuqda aadanaha ka dhan ah awgood. Denmark talooyin ayay bixisay.

63. Mexico waxay garowsatay caqabadaha Soomaaliya hor yaalla waxayna soo dhoweysay dadaalka ay Soomaaliya muujisay oo ay ka mid yihiin rabitaanka xoojinta haya'daha Dawladda soo afjaridda wadatashiyada si Dastuurka loo dhaqangeliyo. Talooyin ayay bixisay iyadoo ugu yeertay beesha caalamka ee deeqaha bixiya ugu yeertay inay u soo jeestaan sidii ay dalka gudihiisa uga hawlgeli lahaayeen gaar ahaan dhinaca ammaanka.

64. Pakistan waxay sheegtay inay lamahuraan tahay in beesha caalamku ay taageeraan dadaallada ay DKMG ahi ku soo afjarayso colaadda taagan. Waxay DKMG ku bogaadisay sida ay ugu dadaaleyso inay kor u qaaddo heer nololeedka dadkeeda iyadoo u fidineysa adeegyo caafimaad iyo kuwo waxbarasho. Pakistan waxay muujisay inay quud darreynayso in hawsha Dastuur dejinta, oo bilaabatay iyadoo xaalad adag lagu jiro, si dhakhso ah loo soo afjari doono. Pakistan talooyin ayay bixisay.

65. Dawladda Maraykanku waxay walaac ka muujisay waxyeellada loo geysanayo dadka rayidka ah iyo carruurta ay dhinacyada oo dhammi colaadda hubeysan u adeegsanyaan; wararka sheegaya toogashada degdegta ah; guurka jajuubka ah ee carruurta yaryar; takoorka ku saleysan rumeynta iyo ku dhaqanka diinta iyo caadada carruurta shaqaalaha ah. Dawladda Maraykanku waxay ammaantay dadaallada ay DKMG ugu jirto sidii ay u dhisi lahayd guddi hawshiisu tahay in la soo afjaro carruurta askarta loo qoranayo, waxayna weydiisatay in lala socdsiiyo hadba meesha ay hawshaani mareyso. Dawladda Maraykanku talooyin ayay bixisay.

66. Jamhuuriyadda Islaamiga ee Iran waxay sheegtay in xaaladda Soomaaliya aysan ku haboonayn nidaamka guud ee DXC (UPR) maadaama uu nidaamku sida caadiga ah dib u eego xogaha xuquuqda aadanaha ee dawlad ku jirta xaalad caadi ah, iyadoo ku guubaabisay DKMG inay wax ka qabato xadgudubyada xuquuqda aadanaha ee aysan iyadu mas'uulka ka ahayn. Iran waxay kaloo sheegtay in marxaladaan kala-guurka ah loo baahan yahay in beesha caalamku ay sii wadaan dhaqaalaha ay ku bixiyaan hawlaha lamahuraanka ah ee Qarammada Midoobay ay dalka ka waddo. Iran talooyin ayay bixisay.

67. Wafdiga Soomaalidu waxay ka jawaabeen tiro su'aalo ah oo la weydiiyay. Soomaalidu waxay sheegeen inaysan ku talojirin ansixinta Tubta Roma (Rome Statute) ee Maxkamadda Danbiyada Caalamiga ah, halka ay ku talojirto inay ansixiso Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha, Mucaahadada Ciribtirka Dhammaan Qaababka Takoorka ee Haweenka lagula kaco, Mucaahadada Naafada iyo Borotokoolkeeda aan Khasabka ahayn. Nidaamka dacwada kali-kalida ah ee Mucaahadada Caalamiga ah ee Xuqquaha Rayidka iyo kuwa Siyaasadeed wuxuu u baahan yahay daraasad dheeraad ah. Soomaaliya uma fidin doonto martiqaad furan nidaamyada warbixinnada gaarka ah ee waxay ku talojirtaa inay oggolaato in martiqaad loo fidiyo Warbixiyaha Gaarka ah ee rabshadaha haweenka lagula kaco. Maadaama ay saxiixday Mucaahadooyinka Geneva ee 1949, Soomaaliya waxaa waajib ka saaran yahay inay xaqdhowrto sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada.

68. Soomaaliya waxay taageero caalami ah uga baahan tahay xeeldheerayaal qaanuunka caalamiga ah oo ciidammada ammaanka ku tababara xaqdhowrka xuquuqda aadanaha iyo in dawladdu ay wax ka beddesho xeerkeeda ciqaabta. Marka hawlgal askareed la sameynayo waa in la ilaaliyaa mabaadii'da ku talaxtagga, kala saarista iyo feejignaanta.

69. Soomaaliya waxay sheegtay inay ku talojirto inay Xeerka ku darto danbi gaar ah oo la xiriira gudniinka dumarka ee fircooniga ah. Guud ahaan, Dawladda waxaa ka go'an inay xal u hesho rabshadaha haweenka lagula kaco.

70. Arrinta la xirrirta carruurta askarta ku jirta, Guddiga Heerka Sare wuxuu soo saaray wareegtooyin adag oo dhaqankaan lagula dagaallamayo. Inkastoo Guddigu uusan wax caddeyn ah u helin carruur ciidammada ka tirsan, haddana waxay go'aansadeen in ilmihii lagu dhex arko ciidammada ammaanka si dgedeg ah loo sii daayo.

71. Dawladdu waxay ciidammadeeda ammaanka siisay tilmaamo adag oo ay ugu sheegeyso inay xaqiijiyaan in ammaanka wariyayaasha la ilaaliyo, waxayna rabtaa inay dib ugu noqoto sharciga warbaahinta si ay u soo gaarsiiso heerka caalamiga ah.

72. Islaamka ayaa noqonaya diinta Dawladda, shareecada ayaana saldhig u noqonaysa nidaamka qaanuun ee Dawladda.

73. Dawladdu waxay kaloo ku talo jirtaa inay ku dhawaaqdo joojinta xukunka dilka, sameynta guddi madaxbannaan oo xuquuqda aadanaha ah iyo cafis ballaaran oo la fidiyo si dib-u-heshiissiinta loo hirgeliyo. Hase yeeshee, danbiyada dagaalka iyo danbiyada bani'aadamnimmada ka dhanka ahi iyagu wax cafis ah ma helayaan. Sida kaliya oo dhaqanka xayndaabka loo soo afjari karaana waa in la isla xisaabtamo. Dawladdu waxay codsatay taageero ka timaadda Xafiiska Ergayga Sare ee Qarammada Midoobay u qaabilsan Xuquuqda Aadanaha (OHCHR) iyo dawlad kasta oo taageero diyaar la ah.

74. Belgium waxay welwel ka muujisay ku dhaqanka xukunka dilka iyo takoorka haweenka lagu hayo. Waxay DKMG weydiisay tallaabooyinka ay qaadday si ay u kordhiso tirade haweenka ee Baarlamaanka ku jira iyo inay qayb ka noqdaan wadahadallada nabadda ee socda. Belgium waxay kaloo walaac ka muujisay caadada gudniinka dumarka ee fircooniga ah (FGM). Belgium Waxay DKMG weydiisay sida ay u xaqiijin karto badbaadada wariyayaasha iyo in Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM) ay arrintaan gacan ka geysan karaan. Belgium talooyin ayay bixisay.

75. Australia waxay dhaleeceysay weerarrada aan loo meel dayin ee dadka rayidka ah lagu hayo, gaar ahaan falalka kooxha fallagad ah, si gaar ah Al-Shabaab, oo bay tiri , mas'uul ka ah xadgudubyada xuquuqda aadanaha ee ay ka midka yihiin askareynta carruurta, jir-dilka ku xadgudubka xorriyadda saxaafadda. Iyadoo garowsan seetooyinka jira, ayay haddana Dawladda ku Meelgaarka ah ku guubaabisay inay xaqiijiso in ciidammadeeda ay ka dheregsan yihiin sharciga caalamaiga ah ee bani'aadamnimada iyo xuquqquda aadanaha. Australia talooyin ayay bixisay.

76. Argentina waxay qoratay caqabadaha Soomaaliya hor yaalla, talooyinna way bixisay.

77. Netherlands waxay xustay taariikhda soo jireenka ah ee dhibaatada Soomaaliya, waxayna DKMG ku ammaantay la shaqeynta DXC (UPR). Waxay walaac ka muujisay rabshadaha guryaha iyadoo xustay sida ay DKMG u rabto inay wax ka beddesho Xeerka Ciqaabta si loo mamnuuco gudniinka dumarka ee fircooniga ah (FGM). Waxay ka welwelsanayd xorriyadda saxaafadda iyo tan ra'yiga. Netherlands talooyin ayay bixisay.

78. Italy waxay walaac ka muujisay dhibaatooyinka lagu hayo dadka rayidka ah. Waxay, iyadoo bogaadin raacisay, xustay sida ay DKMG uga go'an tahay xaqdhowrka xuquuqda aadanaha. Italy waxay DKMG u sheegtay inay ballaariso wadashaqeynta ay la leedahay maamul goboleedyada oo dhaqangeliso xeer beegista, la dagaallanto musuqmaasuqa iyo xayndaabka oo ay dardargeliso dib-u-heshiisiin qarameedka. Waxay sidoo kale deeq bixiyayaasha iyo Qarammada Midoobay ugu baaqday inay Soomaaliya taageero u fidiyaan. Italy talooyin ayay bixisay.

79. Philippines waxay xustay caqabahdaha Dawladda ku Meelgaarka hor yaalla iyadoo ku nuuxnuuxsatay sida loogu baahan yahay taageero dheeraad ah oo beesha caalamka ka timaadda. Waxay dawladda ugu bogaadisay sida ay u rabto inay ansixiso heshiisyada waaweyn ee xuquuqda aadanaha oo ay ku jiraan Mucaahadada Ciribtirka Dhammaan Qaababka Takoorka Haweenka (CEDAW) iyo Mucaahadada Xuquuqda Dadka Naafada ah (CRPD) iyo sida ay ugu talojirto inay joojiso xukunka dilka ah. Philippines waxay walaac ka muujisay falalka burcad-badeednimada ah ee mar kasta ka dhacaya xeebaha Soomaaliya, talooyinna way bixisay.

80. Norway waxay dhaleecayn dusha uga tuurtay nooc kasta oo shaqaaleynta carruurta dugsileyda ah. Waxay DKMG ugu bogaadisay saxiixidda ay saxiixday Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha. Norway waxay ku baaqday in sannadka 2011 la kordhiyo joogitaanka caalamiga ah ee soomaaliya gudeheeda. Norway talooyin ayay bixisay.

81. Spain waxay walaac xooggan ka muujisay in Soomaaliya ay ilaa 1991kii dagaal sokeeye ku soo jirtay. Waxay sheegtay in sida kaliya ee xaaladdaan la yaabka leh lagu dhammeyn karaa ay tahay nabadeyn, is beddel siyaasadeed iyo in dhinacyada is haya la dhex dhigo dib-u-heshiisin dhab ah oo horsedda horumar bulsho-dhaqaaleed. Spain talooyin ayay bixisay.

82. Boqortooyada Midowday ee Great Britain iyo Northern Ireland waxay walaac ka muujisay raadka ay dagaallada iska socdaayi rayidka ku reebayaan iyadoo DKMG ku guubaabisay inay raadiso hab ay ku yarayn karto xabbadaha aan loo meel dayin. Waxay kaloo dhinacyada is haya oo dhan ku guubaabisay inay ilaaliyaaan xuquuqda barkacayaasha. Waxay soo dhoweysay rabitaanka ay DKMG rabto inay ku ansixiso Mucaahadada Ciribtirka Dhammaan Qaababka Takoorka Haweenka (CEDAW) Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha (CRC) iyadoo sheegtay inay quudarreynayso in Soomaaliya ay fulin doonto ballammadeedii ku aaddanaa soo afjarka askareynta carruurta iyo in dumarka loo furo albaabada garsoorka. Boqortooyada Midowday talooyin ayay bixisay.

83. Brazil waxay xustay in si xal waara looga gaaro dhibaatada dabada dheeraatay ee Soomaaliya loo baahan yahay  nabad iyo xasillooni ku timaadda dib-u-heshiisiin, dib-u-dhis, soo nooleynta dhaqaalaha iyo karti bilid. Waxay kaloo xustay in si xoog leh looga hor yimid muddo kororsigii uu Baarlammaanka Federaalka ku Meelgaarka ahi iskiis u sameystay. Waxay soo dhoweysay furista iskuullada, waxayna welwel ka muujisay gudniinka dumarka ee fircooniga ah (FGM). Brazil talooyin ayay bixisay.

84. Sweden waxay xustay dhibaatooyinka ay haya'daha gargaarku ku qabaan gaaritaanka dadka aadka u dhibaateysan oo ay uga cabanayaan halista joogtada ah iyadoo ku baaqday in tallaabooyin dheeraad ah la qaado si loo suurogeliyo in gargaarka bani'aadamnimadu uu gaaro meeshii loogu talogalay. Sweden waxay Soomaaliya weydiisay inay qaadday wax tallaabooyin ah oo ay ku dhiseyso Guddiga Xuquuqda Aadanaha oo madaxbannaan iyo halka uu xaalku hadda marayo. Sweden talooyin ayay bixisay.

85. Morocco waxay sheegtay in xasillooni darrada dabada dheeraatay ee Soomaaliya ay hor istaagtay in si buuxda xuquuqda aadanaha loo xaqdhowro.  Waxay carrabka ku adkeysay mas'uuliyadda beesha caalamka ka saaran inay taagerro bixiyaan. Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalamiga ah DXC (UPR) ayaa ahaa fursad uu Goluhu dadaalladaas uga qaybqaadanayo. Morocco waxay iftiimisay caqabadaha ka jira dhinacyada ammaanka, barakacayaasha, carruurta askarta ah iyo helista caafimaadka, waxbarashada iyo biyaha la cabbo. Morocco talo ayay bixisay.

86. Chile waxay soo dhoweysay dadaallada ay Soomaaliya wax uga qabaneyso burcad-badeednimada iyo is-xilqaankeeda la xiriira xoojinta xeer beegista. Waxay iftiimisay in beesha caalamka looga baahan yahay inay ka jawaabaan codsiga taageero ee Soomaaliya. Chile talooyin ayay bixisay.

87. Sudan waxay soo hadal qaadday talooyinkii uu xeeldheeraha madaxabannaan ka bixiyay xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya iyadoo sheegtay in loo baahan yahay hawlgal qiimeyn oo caalamku si wadajir ah ugu qiimeeyo gargaarka farsamo ee loo baahan yahay. Sudan waxay Golaha ugu baaqday inay go'aan qaadashadooda dardar geliyaan si, bay tiri, loo fuliyo afartii go'aan ee Goluhu Soomaaliya ka soo saaray, iyadoo dhinaca kalena ku guubaabisay dhammaan Dawladaha Xubnahah ah inay Soomaaliya ka taageeraan dadaallaada ay ugu jirto dib-u-heshiissinta, nabadeynta, xasilloonid iyo horumarka.

88. Nigeria waxay xustay dadaallada joogtada ah ee ay DKMG ugu jirto soo saarida qabyo qoraalka Dastuurka. Iyadoo garowsan baahida loo qabo in dadaal xoog leh la geliyo dib-u-heshiissinta qaran, ayay soo dhoweynaysaa is-xilqaanka ay Dawladdu ku dhistay Ergada Dib-u-heshiissinta Qaranka.  Nigeria talo ayay bixisay.

89. Nicaragua waxay soo dhoweysay warbixin qarameedka Soomaaliyeed ee ka hadleysay qaab-dhismeedka kala-guur. Waxay madasha xusuusisay in colaadda sokeeye ee hubeysani ay wiiqday horumarka dalka ayna tahay in caqabadaha jira la garowsado. Nicragua waxay Soomaaliya ku dhiirrigelisay inay ka faaii'deysato iskaashiga uga imaan kara dhinaca Golaha si ay dhidibbada ugu aasto qaab-dhismeedka xeer ilaalinta iyo haya'daha dawladda oo ay si haboon uga gudubto xaaladaha halista ah.

90. Slovakia waxay garowsatay dhibaatooyinka ba'an ee Soomaaliya soo gaaray muddadii 20ka sano ka badnayd ee colaaddu socotay. Waxay welwel ka muujisay carruurta askarta loo qoranayo iyo musiibada ku habsatay barakacayaasha iyo qaxootiga iyo barakaca ballaaran ee colaaduhu keeneen. Slovakia talooyin ayay bixisay.

91. Turkey waxay xustay qaab-dhismeedka qaanuun ee xaqdhowrka xuquuqda aadanaha ee Gogoldhigga Federaalka ku Meelgaarka ah (TFC) iyo ballanqaadyada la halmaala ee lagu soo gabagabeynayo qoraalka Dastuur Federaal oo cusub. Turkey waxay bogaadisay dhismaha Guddiga Dib-u-heshiisiinta. Waxay DKMG ku dhiirrigelisay inay xoogga saarto dib u fursita iskuullada iyo xoojinta adeegayada caafimaadka, wax ka qabashada xukunka dilka, gudniinka Dumarka ee Ficooniga (FGM) iyo askareynta carruurta. Turkey talooyin ayay bixisay.

92. South Africa waxay garowsatay in warbixinta Soomaaliya la diyaariyay iyadoo lagu jiro xaalad adag, waxayna bogaadisay in dawladdu ay soo bandhigtay caqabaadka hor yaalla. Waxay beesha caalamka ku boorrisay inay Soomaaliya u fidiyaan taageero farsamo oo ay caqabaadkaas uga gudubto. Waxay walaac ka muujisay raadka ay xaaladda Soomaaliya ku yeelatay guud ahaan Bariga Afrika iyadoo hoosta ka xarriiqday in soo afjaridda colaaddu ay noqoto mudnaanta koowaad ee DKMG. South Africa talo ayay bixisay.

93. Malaysia waxay sheegtay in waddada dimuqraaddiyadda ee Soomaaliya ay yaalliin caqabado adadag oo ay ka mid yihiin ammaan xumo, taag darrada xeer beegista, saboolnimo iyo walaac dhanka bani'aadamnimada ka jira.

Waxay sheegtay in lamahuraan ay tahay in Dawladdu ay soo afjarto is afgarshowaaga gudeheeda ka jira oo ay si fiican ugu soo jeensato mabaadii'da xuquuqda aadanaha. Malaysia talooyin ayay bixisay.

94. Bangladesh waxay muujisay in karti bilidda iyo taageeradu ay noqdaan lafdhabarta Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalamiga ah DXC (UPR) ee Soomaaliya. Waxay sheegtay in weli ay jirto fursad lagu xoojin karo dadaallada wax looga qabanayo rabshadaha haweenka iyo carruurta lagula kaco oo ay ku jirto gudniinka Dumarka ee Ficooniga (FGM). Waxay sheegtay in haya'daha Qarammada Midoobay iyo daneeyayaasha kaleba looga fadhiyo inay Soomaaliya ka taageeraan dhinaca farsamada iyo dhinaca tababarrada. Bangladesh talooyin ayay bixisay.

95. Cuba waxay sheegtay inay adag tahay in si guud Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalamiga ah DXC (UPR) Soomaaliya looga hirgeliyo. Waxay xustay in DKMG ay qayb dalka ka mid ah uun gacanta ku hayso, oo aysan ka hawlgeli karin Somaliland iyo Puntland. Waxay kaloo xustay in iska horimaadka hubeysani uu raad ku yeeshay aagagga ay DKMG xukunto, iyadoo iftiimisey in colaaddu ay salka ku heyso taariikhdii hore ee gumeysiga Soomaaliya. Waxay walaac ka muujisay gaajada, cunto yaraanta, abbaarta iyo xaaladda caafimaad iyo midda waxbarasho. Cuba talo ayay bixisay.

96. China waxay DKMG ugu bogaadisay sida ay mudnaanta u siisay xaqdhowrka xuquuqda aadanaha, taasoo ka muuqatay, bay tiri, dadaalka ay ku abuureyso xaalad ku haboon xuquuqda aadanaha, rabitaanka ay rabto inay qaaddo talaabooyin taabbagala ah oo lagu ilaalinayo

xuquuqda carruurta, dadka laga tirada badan yahay iyo kuwa naafada ah. China way garowsatay caqabadaha DKMG hor yaalla, waxayna sheegtay inay rajeynayso in beesha caalamku ay Soomaaliya u fidin doonaan taageero haboon oo dhinaca xuquuqda aadanaha ah.

97. Costa Rica waxay walaac ka muujisay xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya, gaar ahaan haweenka iyo gabdhaha yaryar, iyo dhammaan gaboodfallada ku dhaca maqnaanshaha haya'daha, maqnaanshaha xeer beegista iyo xayndaabka (lagu dhuumanayo). Beesha caalamku waa inay labanlaabtaa dadaalkeeda ku aaddan karti bilidda haya'do dabooli kara dalka oo dhan, waxayna deeq bixiyayaasha ugu baaqday inay dadaalladaan gacan ka geystaan. Costa Rica talooyin ayay bixisay.

## II. GUNAANAD IYO/AMA TALOOYIN

98. Jawaabta Soomaaliya ay ka bixiso talooyinka loo soo jeediyay intii uu socday wadahadalkii fool-ka-foolka ahaa waxaa lagu dari doonaa natiijo warbixin ah oo Golaha Xuquuqda Aadanuhu uu ku oggolaaday kalfadhigiisii siddeed iyo tobnaad ee la qabtay September 2011. Ka qaybgalayaasha wadahadalka fool-ka-foolka ahi waxay Soomaaliya kula taliyeen sidaan socota:

98.1. Saxiix oo ansixi Borotokoolka aan Khasabka ahayn ee Mucaahadada lagu mamnuucayo Jir-dilka

(OP-CAT), ku biir Mucaahadada Caalamiga ah ee ka Ilaalinta Dadka oo Dhan Qarsoonka Jajuubka ah

(CED) oo ansixi Tubta Roma (Rome Statue) ee Maxkamadda Danbiyayada Caalamiga ah (France);

98.2. Saxiix oo ansixi Mucaahadada Ciribtirka Dhammaan Qaababka Takoorka Haweenka (CEDAW), dhaqangeli qorshayaasha qaran ee lagaga hortagayo rabshadaha haweenka lagula kaco, gaar ahaan gudniinka dumarka ee fircooniga ah oo taabbageli in raga iyo haweenku ay fursadaha u sinnaadaan (France);

98.3. Ansixi Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha (CRC) iyo Borotokoolkeeda aan Khasabka ahayn ee ka Qaybgalinta Carruurta Colaadaha Hubeysan oo meelmari Ballanqaadyadii Paris si Carruurta looga ilaaliyo Shaqaaleynta Sharci darrada ah ama inay qortaan Ciidanka Qalabka Sida ama Kooxaha Hubeysani (France);

98.4. Saxiix oo ansixi Mucaahadada Ciribtirka Dhammaan Qaababka Takoorka Haweenka (CEDAW) iyo Borotokoolkeeda aan Khasabka ahayn, Mucaahadada ka Ilaalinta Dadka oo Dhan Qarsoonka Jajuubka ah (CED), Mucaahadada Dadka Naafada ah (CRPD) iyo Borotokoolkeeda aan Khasabka ahayn (OP-CAT), Borotokoolka aan Khasabka ahayn ee Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha (CRC) ee iibka carruurta, oo ansixi Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha (CRC) iyo Borotokoolkeeda aan Khasabka ahayn ee ka Qaybgalinta Carruurta Colaadaha Hubeysan (OP-ICESCR) (Spain);

98.5. Qaad tallaabooyin muuqda oo ay ku jiraan ku biirista iyo dhaqangelinta Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha (CRC) iyo Mucaahadada Ciribtirka Dhammaan Qaababka Takoorka Haweenka (CEDAW) (Japan);

98.6. Qorshaha ku darso inaad saxiixdid oo ansixisid Mucaahadada Ciribtirka Dhammaan Qaababka Takoorka Haweenka (CEDAW), Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha (CRC) iyo Mucaahadada Caalamiga ah ee Ilaalinta Xuquuqda Dhammaan Shaqaalaha Muhaajiriinta iyo Qoysaskooda (Indonesia);

98.7. Sida ugu dhakhsaha badan u ansixi Mucaahadada Ciribtirka Dhammaan Qaababka Takoorka Haweenka (CEDAW) iyo Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha (CRC) (Germany);

98.8. Ku biir heshiisyada waaweyn ee xuquuqda aadanaha ee aadan weli qaybta ka ahayn, gaar ahaan Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha (CRC) iyo Mucaahadada Ciribtirka Dhammaan Qaababka Takoorka Haweenka (CEDAW) (Australia);

98.9. Ansixi Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha (CRC) iyo Mucaahadada Ciribtirka Dhammaan Qaababka Takoorka Haweenka (CEDAW) (Costa Rica);

98.10. Qaad tallaabooyin aad ugu biireyso Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha (CRC), oo ansixi Mucaahadada Qarammada Midoobay ee Danbiyada Habaysan ee Xuduudaha ka Tallaaba iyo Borotokoolladeeda (Philippines);

98.11. Ansixi Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha (CRC) iyo Borotokoolladeeda aan Khasabka ahayn (Portugal);

98.12. Ansixi Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha (CRC) iyo labadeeda Borotokool ee aan Khasabka ahayn (Norway);

98.13. Qorshaha ku darso ansixinta Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha (CRC) iyo Borotokoolladeeda aan Khasabka ahayn (Chile);

98.14. Ansixi Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha (CRC) oo marka horeba xaqiiji in la hirgeliyay dhamman tallaabooyinka ay tahay in la qaado si carruurta loogu dhaqo qodobbada mucaahadada (Uruguay);

98.15. Ansixi Mucaahadada Ciribtirka Dhammaan Qaababka Takoorka Haweenka (CEDAW) iyo Borotokoolkeeda aan Khasabka ahayn (Netherlands);

98.16. Sxaiix, ansixi oo dhaqangeli heshiisyada waaweyn ee xuquuqda aadanaha caalamiga ah ee aadan weli qaybta ka ahayn oo jooji xukunka dilka (Slovenia);

98.17. Qorshaha ku darso ku biirista mucaahadooyinka xuquuqda aadanaha caalamiga ah ee aadan weli qaybta ka ahayn oo badi dadaallada aad ku raadineysid taageero farsamo oo aad

ka heshid Xafiiska Ergayga Sare ee Xuquuqda Aadanaha (OHCHR) iyo deeq bixiyayaasha caalamiga ah (Egypt);

98.18. Xaqiiji in mabaadii'da asaasiga ah ee xuquuqda aadanuhu ay ku idishahay Dastuurka gudihiisa (Islamic Republic of Iran);

98.19. Dhammeystir Dastuurka Federaaliga ah dhammaadka sannadka 2011 (Canada);

98.20. Si firfircoon u wad hawlaha dastuurka federaaliga si mustaqbalka dheer loo xoojiyo ilaalinta iyo xaqdhowrka xuquuqda aadanaha oo loo bud-dhigo asaaskii doorashooyin diimuqraadi ah oo mustaqbalka dhaca (Switzerland);

98.21. Mamnuuc Gudniinka Dumarka ee Fircooniga (FGM) adigoo beddelaya xeerka ciqaabta oo si guud u ciribtir dhaqanka noocaas ah (Italy);

98.22. Dabagal ha lagu sameeyo is beddelka la soo jeediyay in xeerka ciqaabta lagu sameynayo si loogu daro qodobbo mamnuucaya caadadaan xanuunka badan ee gudniinka dumarka ee fircooniga (Norway);

98.23. Wax ka beddel Xeerka Ciqaabta si loo mamnuuco caadada gudniinka dumarka ee fircooniga ah (Canada);

98.24. Sida ugu dhakhsaha badan wax uga beddel Xeerka Ciqaabta oo ku soo dar qodobbo mamnuucaya Gudniinka Dumarka Fircooniga (FGM) (Netherlands);

98.25. Is beddello la xiriira dhaqanka baahsan ee Gudniinka Dumarka ee Fircooniga (FGM) ku samee Xeerka Ciqaabta ee Soomaaliya (Portugal);

98.26. Danbi ka dhig dhaqanka Gudniinka Dumarka ee Fircooniga (FGM) (Australia);

98.27. Qaad dhammaan tallaabooyinka qaanuun iyo kuwa hawlgal ee lagu ciribtirayo Gudniinka Dumarka ee Fircooniga (FGM) oo ay ku jiraan in wax laga beddelo Xeerka Ciqaabta si loogu soo daro qodobbo si cad dhaqankaan u mamnuucaya (Islamic Republic of Iran);

98.28. Qaad dhammaan tallaabooyinka qaanuun ee lagu mamnuucayo Gudniinka Dumarka ee Fircooniga (FGM) oo xaqiiji in si dhab ah xeerarkaas loo dhaqangeliyay, gaar ahaan dhinacyada ka hortagga, wacyigelinta, kormeerka iyo ganaaxa (Belgium);

98.29. Wax ka beddel Xeerka Ciqaabta si danbi looga dhigo Gudniinka Dumarka ee Fircooniga (FGM) oo si dhammeystiran arrintaan u fuli (Costa Rica);

98.30. Xaqiiji in xuquuqda aadanuhu ay ka mid tahay qaab-dhismeedka qaanuun ee Soomaaliya oo xaqiiji in inta aysan shaqadooda bilaabin, xubnaha xeer ilaalintu ay qaataan tababar la xiriira xuquuqda aadanaha (United Kingdom);

98.31. Deji xeer haweenka si buuxda oo qaanuunka ku saleysan uga ilaalinaya takoorka oo xaqiiji in haweenku ay ragga ula sinnaadaan fursadaha ka qaybgalka hawlaha dawladda (Indonesia);

8.32. U deji oo isugu dhaf qanuunka qaranka, oo uu ku jiro xeer dhaqameedku, si waafaqsan waajibaadka caalamiga ah ee Soomaaliya saaran iyo halbeegyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha (Mexico);

98.33. Oofi ballantii ahayd inaad dhowaan sameynaysid guddi qaran oo madaxbannaan oo xuquuqda aadanaha ah (Hungary);

8.34. Samee Guddi Qaran oo Madaxbannaan oo Xuquuqda Aadanaha ah oo dhaleecee xadgudubyada xuquuqda aadanaha (Sweden);

98.35. Samee haya'd qaran oo xuquuqda aadanaha ah oo u hoggaansan Mabaadii'da Paris (Australia);

98.36. Dedeji sameynta haya'd qaran oo xuquuqda aadanaha ah oo madaxbannaan la iskuna hallayn karo iyadoo la raacayo Mabaadii'da Paris (Indonesia);

98.37. Ka codso Xafiiska Ergayga Sare ee Xuquuqda Aadanaha (OHCHR) talo iyo tusaale ku saabsan sameynta guddi madaxbannaan oo baaritaan ku sameeya gaboodfallada xuquuqda aadanaha laga galay iyadoo la xaiijinayo in dadka gaboodfallada sameeyay falalkooda lagula xisaabtamo (United Kingdom);

98.38. Si loo xaqiijiyo xaqdhowrka xuquuqda aadanaha, degdeg uga dhis hay'ado shibil ah meelihii dhowaan soo galay gacanta Dawladda Federaalka ku Meelgaarka ah (Austria);

98.39. Ka noqo mawqifkii lagu rabay in saddex sano lagu kordhiyo Baarlammaanka Federaalka ku Meelgaarka ah oo ku beddel kordhin hal sano ah oo ay la socdaan is beddello iyo astaamo dawladda lagu sameeyo oo ay ku jiraan dhammeystirka Dastuurka qaranka muddo hal sano gudeheed ah iyo doorasho madaxweyne iyo Afhayeen Baaralammaan xagaaga 2011 (United States of America);

98.40. Sida ugu dhakhsaha badan u hirgeli geedi-socodka muujinaya kaltanka siyaasadeed ee dhammaadka Haya'daha Federaalka ku Meelgaarka, waana in geeddi-socodka lagu daraa mabaadii'da maamul wanaagga, abuurista haya'do awood leh iyo bixinta adeegyada bulsho ee asaasiga ah (Mexico);

98.41. Adkee qaab-dhismeedka haya'daha xuquuqda aadanaha (Oman);

98.42. Kor u sii qaad bixinta casharrada iyo tababarrada xuquuqda aadanaha ee muwaadiniinta la siinayo (Philippines);

98.43. Labanlaab dadaallada lagu xoojinayo haya'daha qaranka oo qaab-dhismeed haboon u samee dhaqangelinta xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada (Argentina);

98.44. Iyadoo iskaashi dhow lala sameynayo Puntland iyo Somaliland, samee nidaam iyo haya'do loo tababaray xaqdhowrista xuquuqda aadanaha oo fahamsan caqabadaha ay arrintaasi wadato (Switzerland);

98.45. La gal wadahadal haya'do kala duwan oo Qarammada Midoobay ka tirsan, iyadoo ujeeddadu tahay sidii loo dhisi lahaa haya'do joogto ah oo loo ilaalin lahaa dadka rayidka ah iyo kuwa halista ku sugan (Costa Rica);

98.46. iyadoo la kaashanayo Xafiiska Ergayga Sare ee Xuquuqda Aadanaha (OHCHR), samee oo hirgeli qorshe hawleed kor loogu qaadayo xuquuqda aadanaha ee dalka (Algeria);

98.47. Sii wad tallaabooyinka lagu dhammeynayo colaadda jiitameysa oo dalka oo dhan awooddaada ku ballaari (Azerbaijan);

98.48. Sii wad dadaallada dib-u-dhiska Soomaaliya iyadoo dhinaca kalena mar kasta la xaqdhowrayo xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada (Turkey);

98.49. Sii ballaari dadaallada gacan haadinta iyo dib-u-heshiisiinta siyasadeed, taasoo qayb ka ah dadaallada guud ee xasilloonida Soomaaliya dib loogu soo celinayo (United States of America);

98.50. Xooji dadaallada dib-u-heshiisiinta qaran ee Soomaaliya (Egypt);

98.51. Dardargeli dadaallada lagu xaqiijinayo xuquuqaha dhaqaalaha iyo bulshada (Oman);

98.52. Sii wad dadaallada ku saabsan wacyigelinta iyadoo la adeegsanayo waddo kasta oo furan (Kuwait);

98.53. Kordhi dadaallada nabadeynta iyo dhisidda Dawlad qarameed xoog leh, oo si dhab ah ugu diyaargarow meelmarinta ballammada qaran iyo kuwa caalami ee xuquuqda aadanaha (Yemen);

98.54. Hirgeli siyaasad qarameed guud oo looga hortagayo in la isticmaalo ama la qorto carruur askar ah oo samee dadaal kasta oo carruurta fursado lagu siinayo, gaar ahaan fursadaha waxbarashada (Uruguay);

98.55. Samee qorshe qaran oo mideysan oo sinnaanta labka/dheddigga ah, oo danbi ka dhigaya Gudniinka Dumarka ee Fircooniga (FGM) oo qaad tallaabooyin wax ku ool ah oo caadadaas lagu dabargooynayo, iyadoo taageerada loo baahdo la codsanayo (Uruguay);

98.56. Diyaari Qorshe Guud oo sinnaanta labka/dheddigga ah, danbina ka dhigaya Gudniinka Dumarka ee Fircooniga (FGM) (Spain);

98.57. U soo saar martiqaad furan dhammaan warbixiyayaasha gaarka ah oo jawaab mudan ka bixi dhammaan codsiyadii booqashooyinka ee jawaabtooda la sugayay (Spain);

98.58. Qaad tallaabooyin aad ku horumarineysid sinnaan labka/dheddigga ah oo dhammeystiran si cadna u diiddan takoorkii soo jireenka ah (Hungary);

98.59. Dadaallada lagu taabbagelinayo xuquuqda aadanaha, waa in il gaar ah lagu eegaa dadka dhibaatada u nugul ee ay ka midka yihiin carruurta, haweenka, naafada iyo waayeelka (Thailand);

98.60. Qaad tallaabooyin gaar ah oo looga hortagayo xadgudubyada halista ah ee loo geysto xuquuqda aadanaha ee haweenka sida rabshadaha dumarka lagula kaco, daryeel la'aanta dhibbanayaasha xadgudubyada noocaas ah loo geystay, guurka jajuubka ah iyo gudniinka dumarka ee fircooniga (Japan);

98.61. Dadaallo xoog leh waa in la sameeyaa si loo xalliyo dhibaatooyinka carruurta heysta, oo ay ka mid yihiin saboolnimada, askareynta carruurta iyo waxbarasho la'aanta (Japan);

98.62. Qaad tallaabooyin wax ku ool ah oo lagu xaqiijinayo in mas'uuliyiinta xukunka hayaa ay matalaan Soomaalida oo dhan oo ay ku jiraan haweenka iyo kooxaha laga tirada badan yahay (United Kingdom);

98.63. Sida ugu dhakhsaha badan u soo saar xeer lagu joojinayo dilalka (Belgium);

98.64. Sida ugu dhakhsaha badan u soo saar xeer lagu joojinayo xukunka dilka, iyadoo ujeeddadu tahay in gebi ahaanba xukunkaas la mamnuuco (France);

98.65. Sida ugu dhakhsaha badan u soo saar xeer lagu joojinayo dilalka, iyadoo ujeeddadu tahay in gebi ahaanba xukunkaas la mamnuuco (Germany);

98.66. Mamnuuc xukunka dilka ama ugu yaraan soo saar xeer lagu joojinayo xukunkaas (Italy);

98.67. Raac tallaabooyinka in lagu joojinayo xukunka dilka (Norway);

98.68. Soo saar xeer lagu joojinayo xukunka dilka, iyadoo ujeeddadu tahay in gebi ahaanba xukunkaas la mamnuuco awqtiga ugu dhow ee ay suurogal noqoto, oo saxiix oo ansixi Borotokoolka labaad ee aan Khasabka ahayn ee loo dirayo ICCPR (Spain);

98.69. Soo saar xeer lagu joojinayo xukunka dilka oo ciribtir ku samee dhaqanka dhagax ku dilka (Brazil);

98.70. Samee baaritaanno markiiba ah oo dhexdhexaad ah oo lagu baarayo dilalka loo geysto hawlwadeennada bulshada rayidka Soomaaliyeed iyo weriyayaasha oo xaqiiji in hanjabaadaha dadkaan loo geysto baaritaan lagu sameeyo, oo haddii la helo caddeymo hanjabaad dhab ah in la qaado tallaabo ammaanka qofkaas lagu sugayo (Canada);

98.71. Samee dadaal kasta oo lagu joojinayo dhammaan rabshadaha colaadaha ka dhashay oo ay ku jiraan toogashada degdegga ah, gardarrada, dilalka aan maxkamadda la marin; gacan/lug gooynta, karbaashidda iyo rayidka oo loo adeegsado gaashaan lagu gabbado (Slovakia);

98.72. Ku dhaqaaq baaritaano dhab ah oo dhexdhexaad ah oo lagu baarayo dhammaan weriyayaasha lagu dilay goobaha ay Dawladda Federaalka ku Meelgaarka, sidoo kale baaritaan ku samee rabshadaha weriyayaasha lagula kaco (Austria);

98.73. Soo saar amarro guud oo cadcad oo qaad tallaabooyin muuqda lagu xaqiijinayo in ciidammada ammanka (iyo xoogagga ka mar qaata) ay u hoggaansamaan sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada oo ay ku jiraan mabaadii'da kala soocidda iyo talaxtagga (Canada);

98.74. Soo saar amarro guud oo cadcad oo qaad tallaabooyinka loo baahan yahay oo dhan si loo xaqiijiyo in ciidammada Dawladda Federaalka ku Meelgaarka iyo xoogagga xulafada la ahi ay u hoggaansamaan sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada iyo kan xuquuqda aadanaha (Austria);

98.75. Amarro guud oo ciidammada ammanka iyo xoogagga ka farcamaba lagu amray inaysan qaadin weerar sharci darro ah, oo uu ka mid yahay bartilmaameedsiga dadka rayidka ah (Denmark);

98.76. Qaad tallaabo kasta oo lagamamaarmaan ah oo lagu ilaalinayo nolosha muwaaddiniinta, iyadoo la kaashanayo AMISOM iyo ciidammada amniga ee DKMG (Islamic republic of Iran);

98.77. Qaad tallaabooyin aad ku xaqiijineysid in dhammaan hawlgallada ciidammadu ay noqdaan kuwo waafaqsan sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada si loo yareeyo rafaadka dadka rayidka (Turkey);

98.78. Dhaqangeli tallaabooyin ay ku jiraan kuwo qaanuuni ah oo lagu ciribtirayo dhammaan qaababka rabshadaha ee dumarka lagula kaco (Slovenia);

98.79. U fidi taageero caafimaad iyo mid nafsaani ah iyo weliba taageero qaanuun, haweenka lagula kacay rabshadaha lab/dheddigga ku saleysan (Brazil);

98.80. Dhaqangeli tallaabooyin looga hortagayo, lagu ganaaxayo oo lagu ciribtirayo dhammaan qaababka rabshadaha ee dumarka lagula kaco oo ay ku jiraan dhagxinta, kufsiga, kufsiga guurka dhexdiisa, rabshadaha galmoodka iyo dhammaan kuwa colaadaha ka dhasha, rabshadaha guryaha, guurka jajuubka ah iyo Gudniinka Dumarka ee Fircooniga (FGM) (Argentina);

98.81. Hirgeli olole wacyigelin iyo waxbarasho, iyadoo lala kaashanayo hoggaamiyayaasha diinta iyo kuwa bulshada, oo ujeeddaduna tahay sidii loo dhammeyn lahaa caadada gudniinka dumarka ee fircoonigaiyo qaababka kale ee rabshadaha dumarka lagula kaco (Canada);

98.82. Labanlaab dadaallada lagu soo afjarayo caadooyinka ka soo horjeeda xuquuqda aadanaha ee haweenka sida Gudniinka Dumarka ee Fircooniga (FGM) (Mexico);

98.83. Samee baaritaan dhab ah oo madaxbannaan oo lagu xaqiijinayo in qof 18 ka yari uusan ciidammada ku jirin (Hungary);

98.84. Qaad tallaabooyin ay ka mid yihiin baaritaan madaxbannaan oo lagu xaqiijinayo in qof 18 ka yar aan loo qoran ciidammada ammaanka ee Dawladda Federaalka ku Meelgaarka (Canada);

98.85. Si degdeg ah uga saar carruurta yaryar dhammaan ciidammaad ammaanka ee Dawladda Federaalka ku Meelgaarka, oo samee baaritaan dhab ah oo lagu xaqiijinayo in qof 18 ka yari uusan ku jirin ciidammaada qalabka sida iyo kuwa booliskaba (Austria);

98.86. Sii wad dadaallada lagu joojinayo qorashada iyo adeegsiga carruurta ee dalka oo dhan oo si fiican ula shaqee Qarammada Midoobay iyo dhinacyada kale ee arrintaan ku shaqada leh si loo xaqiijiyo in guryohoodii dib loogu celiyo (Malaysia);

98.87. Qaad tallaabooyin adadag haddii loo baahdo oo soo saar wareegtooyin xaqiijinaya in qof 18 ka yar aan shaqo loo qoran (Ireland);

98.88. Jooji carruurta dagaalyahannada laga dhigayo (United States of America);

98.89. Qaad tallaabo kasta oo lagamamaarmaan ah si loo xaqiijiyo in qof 18 ka yar aan loo qoran ciidammada ammaanka, oo si shuruud la'aan ah uga saar ciidammada dhammaan carruurtii horay la qortay (Slovakia);

98.90. Si shuruud la'aan ah carruurta yaryar uga saar ciidammada dawladda iyo kuwa xulafada la ahba (Portugal);

98.91. Hawlgeli nidaam shaqeynaya oo madaxbannaan si loo xaqiijiyo inaan ciidammada qalabka sida iyo kuwa booliskuba aysan qoran qof 18 sano ka yar (Portugal);

98.92. Qaad tallaabo kasta oo haboon oo lagu xaqiijinayo dhammaan qaababkaan carruurta looga faaii'deysto (shaqaaleynta carruurta, askareynta carruurta iyo tuugsiga waddooyinka) (Slovenia);

98.93. Wax uga qabo caadada carruurta shaqada looga faaii'deysanayo in la dhaqangeliyo xeerarka shaqada ee dawladdu degsatay (United States of America);

98.94. Oggolow oo taageer in goobaha Dawladdu ay ka taliso laga helo marimmo ammaan ah oo dadka baahan gargaarka waqti haboon loo mariyo (Ireland);

98.95. U samee mashruucyo dhaqancelin ah carruurta iyo haweenka ka soo cararaya goobaha ay Al Shabaab gacanta ku hayso (Italy);

98.96. Qaad tallaabooyin dheeraad ah oo lagu xaqiijinayo marimmo furan oo gargaarka la mariyo oo ka qaybgeli arrintaan maamul goboleedyayada iyo kooxaha hubeysan (Sweden);

98.97. Samee wax kasta oo ay qaadato si loo helo marin aammin ah oo waqti kasta furan oo gargaarka bani'aadamnimo la mariyo (Australia);

98.98. Qaad tallaabooyin dheeraad ah oo lagu dammaanad qaadayo ammaanka haya'daha gargaarka bani'aadamnimo si ay hawlohooda si nabadgelyo ah ugu gutaan (Chile);

98.99. Qaad tallaabooyin wax ku ool ah oo lagu xallinayo weerarrada iyo dhaca burcad-badeednimada ah ee ku baahay xeebaha Soomaaliya, oo ay ku jiraan la kaashiga beesha caalamka sidii loo hirgelin lahaa fikradihii macquulka ahaa ee uu soo jeediyay Xoghayaha Guud ee la xiriiray maxkamadeynta dadka mas'uulka ka ah burcad-badeednimada iyo dhaca hubeysan ee badda laga geysto (Malaysia);

98.100. Si firfrcoon uga muuqo dadaallada looga dan leeyahay mamnuucid dhab ah oo lagu soo rogo madaxfurashada ay bixiyaan maraakiibta ganacsiga ee shisheeye, arrintaasoo meel ka dhac ku ah xuquuqda aadanaha ee dhammaan la haystayaasha iyo Soomaalidaba (Algeria);

98.101. Xooji xeer ilaalinta si loo soo afjaro ku dhaqanka xeer dhaqameedka oo loo helo istaraatiijiyad looga hortago xayndaabka marka lala xisaabtamayo malleeshiyaadka iyo kooxaha hubeysan (Spain);

98.102. Samee, meel kasta iyo mar kasta oo loo baahdo, ergooyin lagu kalsoonaan karo oo madaxbannaan oo soo baara danbiyada dagaalka iyo danbiyada bani'aadamnimada ka dhanka ah (France);

98.103. Samee, iyadoo beesha caalamka la kaashanayo, ergo caalami ah oo madaxbannaan ama nidaam kasta oo kale oo midkaas u eg oo awood u haysta inuu wax ka qabto xadgudubayda ay dhinacyada oo dhammi u geysteen xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada (Switzerland);

98.104. Xaqiiji, iyadoo lala kaashanayo "Puntland" iyo "Somaliland", in dadkii mas'uulka ka ahaa gaboodfalyadii dhacay caddaaladda la hor keeno iyadoo qaab hufan la marayo (Switzerland);

98.105. Baaritaan hufan oo madaxbannaan ku samee dhammaan eedaymaha la xiriira xadgudubyada laga galay xuquuqda aadanaha iyo sharciga bani'aadamnimada (Thailand);

98.106. Dhaqangeli tallaabooyinka loo baahan yahay ee lagu xaqiijinayo baaritaan iyo maxkamadeyn xadgudubyada loo geystay xaqa nolosha iyo sharafta qofka, iyadoo la raacayo halbeegyada xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada (Argentina);

98.107. Xooji oo marka loo baahdo samee nidaam wax looga qabto xayndaabka iyo dhacdooyinka foosha xun, gaar ahaan xambaarista (tahriibinta) dadka iyo rabshadaha lab/ dheddigga ku salysan oo ay ka mid yihiin rabshadaha galmoodka ee lagula kaco dumarka iyo carruurta, iyadoo la adeegsanayo karti bilid iyo taageero farsamo oo ay DKMG weydiisatay hawlwadaagyada lammaanayaasha ah iyo kuwa wadajirka ahba (Malaysia);

98.108. Mudnaanta koowaad sii ilaalinta rayidka, iyadoo la dhaqngelinayo tallaabooyin lagu dammaanadqaadayo xaqdhowrka sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada (Switzerland);

98.109. Qaad tallaabooyin lagu xaqiijinayo in baaritaan dhab ah oo degdeg ah oo madaxbannaan lagu sameeyo dilalkii loo geystay wakiilladii bushada rayidka iyo warfidyeennada (Denmark);

98.110. Soo afjar xayndaabka ay weli haystaan eedeysanayaasha danbiyada ka dhanka ah xorriyadda muujinta ra'yiga (Netherlands);

98.111. Inaan la cafiyi karin rabshadaha haweenka lagula kacay ee gaarsiisan danbiyo bani'aadamnimada laga gala, iyadoo la raacayo go'aammada Golaha Ammaanka ee 1325 (2000) iyo 1820 (2008) (Portugal);

98.112. Iyadoo la soo sheegayo dhacdooyin nidaamsan oo kufsi iyo rabshado galmood oo lagula kacayo dumarka iyo carruurta, sii kufsiga xukunka danbiga dagaalka sida ay dhigayaan go'aammada Golaha Ammaanka ee 1325 (2000) iyo 1820 (2008) (Israel);

98.113. Sii kufsiga xukunka danbiga dagaalka sida ay dhigayaan go'aammada Golaha Ammaanka ee 1325 (2000) iyo 1820 (2008) (Netherlands);

98.114. Dadaal badan ku bixi barista iyo ku wacyi-gelinta sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada iyo guud ahaan mabaadii'da xuquuqda aadanaha, ciidammada ammaanka ee Dawladda iyo kuwa nabad ilaalinta ee AMISOM (Yemen);

98.115. Xaqiiji xaqdhowrka sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada (IHL) oo dhexgeli IHL barnaamijyada tababarrada ee heer kasta ah ee ciidammada ammaanka loogu talogalay (Islamic Republic of Iran);

98.116. U fidi tababarro ku saabsan xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada ciidammada ammaanka iyo kuwa xeer fulinta ee DKMG iyo kuwa AMISOM (Australia);

98.117. Sii wad la shaqeynta dhabta ah ee Golaha Xuquuqda aadanah si loo bilo kartida lagu taabbagelinayo xaaladda xuquuqda aadanaha ee dalka, gaar ahaan xoojinta maareynta haya'daha caddaaladda (Thailand);

98.118. Hirgeli xeerarkii dhowaan la dhaqangeliyay ee la xiriiray sida loola dhaqmayo haweenka xabsiyada ku jira iyo tallaabooyinka aan xabsiga gaarsiisneyn ee dumarka sharciga jabiya, oo loo yaqaan Xeerarka Bangkok, oo weydiiso taageerada loo baahdo haya'daha hawlahaas ku lugta leh sida Xafiiska Qarammada Midoobay ee Maandooriyayaasha iyo Danbiyada (UNODC ) iyo OHCHR (Thailand);

98.119. Xaqdhowr oo ilaali xorriyadda muujinta ra'yiga oo soo afjar dhammaan falalka halista ku haya xorriyadda muujinta ra'yiga, oo ay ku jiraan hanjabaadaha loo geysto wariyayaasha iyo xarumaha warbaahinta (Austria);

98.120. Soo afjar dhammaan falalka halista ku haya xaqa xorriyadda muujinta ra'yiga, oo ay ku jiraan hanjabaadaha loo geysto wariyayaasha iyo xarumaha warbaahinta (Denmark);

98.121. Xaqdhowr, iyadoo iskaashi hoose lala sameynayo "Somaliland" iyo "Puntland", xorriyadda muujinta ra'yiga oo ka ilaali wariyayaasha iyo difaacayaasha xuquuqda aadanaha xadgudubyada looga golleeyahay in looga hor istaago gudashada hawshooda qaanuunka ku saleysan (Switzerland);

98.122. Labanlaab dadaallada lagu dammaanadqaadayo xorriyadda muujinta ra'yiga iyo ammaanka wariayayaasha dalka gudihiisa ka hawlgala (Indonesia);

98.123. Baaritaan madaxbannaan ku samee eedaymaha sheegaya in wariyayaasha ka hawlgala dhammaan qaybaha kala duwan ee Soomaaliya ay kala kulmaan maamullada iyo kooxaha hubeysan hanjabaado iyo caga-juglayn joogto ah (Netherlands);

98.124. Mar kasta garab istaag xorriyadda muujinta ra'yiga (United States of America);

98.125. Dammaand qaad xorriyadda muujinta ra'yiga iyo ammaanka wariayayaasha iyo difaacayaasha xuquuqda aadanaha (Netherlands);

98.126. Dammaand qaad xorriyadda muujinta ra'yiga iyo saxaafadda (Spain);

98.127. Hagar la'aan u muuji oo u taageer xorriyadda muujinta ra'yiga ee wariyayaasha sida uu qorayo axdi qarameedka federaalka (Norway);

98.128. Soo afjar dhammaan qaababka dabagalka warbaahinta (Belgium);

98.129. U hawlgal sidii haweenka Soomaaliyeed looga qaybgelin lahaa nabadeynta iyo guud ahaan hawlaha dawladda iyo kuwa suyaasaddaba (Portugal);

98.130. Ku dadaal sidii taageero dheeraad ah looga heli lahaa hay'adaha caalamiga ah si wax looga qabto dhibaatada saboolnimada iyo shaqo la'aanta ee dalka ka jirta (Saudi Arabia);

98.131. Qaad tallaabooyin dheeraad ah oo dadweynaha loogu fidinayo baahiyaha asaasiga ah si loo xaqiijiyo xuquuqaha dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka, iyadoo la kaashanayo deeq bixiyayaasha caalamiga ah iyo hay'adaha kale ee arrimahaas ku shaqada leh (Egypt);

98.132. Ku dadaal sidii dadweynaha loo gaarsiin lahaa adeegyada asaasiga ah, oo loo ilaalin lahaa xorriyadda muujinta ra'yiga loona sameyn lahaa wacyigelin la xiriirta rabshadaha lab/dheddiga ku saleysan (Australia);

98.133. Raadi taageerada beesha caalamka si dhakhso loogu hirgeliyo go'aankii Golaha Ammaanka ee 1964 (2010) oo ujeeddadiisu ahayd in dadweynaha la gaarsiiyo adeegyada asaasiga ah (Kuwait);

98.134. Sii wad hirgelinta barnaamijyada iyo tallaabooyinka lagu hagaajinayo gaarista xuquuqha cuntada, waxbarashada iyo caafimaadka, oo ay ku jirto in xuquuqahaas laga taabageliyo goobaha aan gacanta DKMG ku jirin (Cuba);

98.135. Hirgeli waxbarasho hoose/dhexe oo khasab iyo lacag la'aan ah oo ansixi Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha iyo Borotokoolladeeda aan Khasabka ahayn (Hungary);

98.136. Sii wad dadaallada lagu helayo fursadaha waxbarashada, tababarrada xirfadaha iyo dakhli abuurista (Azerbaijan);

98.137. Xooji kartida iyo xirfadaha hay'adaha waxbarashada si dib loogu soo nooleeyo (Oman);

98.138. Samee qorshe hawleed qaran oo lagu xaqiijinayo waxbarasho khasab ah oo lacag la'aan ah (Uruguay);

98.139. Xooji dadaallada lagu baahinayo waxbarashada siiba haweenka iyo carruurta (Saudi Arabia);

98.140. Qaad tallaabooyinka lagamamaarmaanka u ah kor u qaadista xaaladda barakacayaasha si loo dhowro xuquuqdooda asaasiga ah ee bani'aadamnimo (Hungary);

98.141. Hagaaji xaaladda nololeed iyo tan nabadgelyo ee barakacayaasha ku jira xeryaha, si ilaalintooda loo xoojiyo oo si gaar ah haweenka iyo gabdhaha yaryar looga ilaaliyo rabshadaha galmoodka, waa in gargaarka bani'aadamnimadu uu si aan kala joogsi lahayn barakacayaasha u gaaraa (Slovakia);

98.142. La shaqee hawlwadeennada bani'aadamnimada iyo horumarinta si loo hagaajiyo xaaladda nololeed iyo tan nabadgelyo ee barakacayaasha oo haweenka iyo gabdhaha yaryar looga ilaaliyo kufsiga iyo rabshadaha guryaha (Turkey);

98.143. Sii wad iskaashiga iyo wadashaqeynta ammaanta mudan ee hay'adaha Qarammada Midoobay (Bangladesh);

98.144. Sii wad iskaashiga haya'daha Midowga Afrika iyo Qarammada Midoobay ee loogu talogalay xallinta dhibaatooyinka Soomaaliya (South Africa);

98.145. Sii wad dadaallada dhisidda haya'daha ee asaaska u ah taabbagelinta iyo xaqdhowrka xuquuqda aadanaha ee dalka, iyadoo taageero farsamo iyo mid dhaqaale laga raadinayo bulshada dhexdeeda iyo hay'adaha Qarammmada Midoobay ee arrimahaan ku shaqada leh (Bangladesh);

98.146. Raadi taageero caalami ah oo lagu xoojiyo awoodda haykalka dawladeed iyo haya'daha ammaanka, iyadoo tallaabooyinkii horena sidoodii loo sii wado. (Azerbaijan);

98.147. Ka raadi beesha caalamka taageero farsamo iyo mid dhaqaale oo lagu hagaajiyo asaaska xuquuqda aadanaha ee dalka (Pakistan);

98.148. Sii wad dadaallada aad ku helaysid taageerada caalamiga ah iyo farsamada xeeldheerayaasha ee lagu taabbagelinayo xuquuqda aadanaha (Oman);

98.149. Ka raadi taageero farsamo haya'daha qarammada Midoobay iyo beesha caalamka si looga gudbo caqabadaha xuquuqda aadanaha ee dalka soo food saaray, iyadoo la raacayo mudnaanaha qaran ee dalka u degsan. (Nigeria);

98.150. Iskaashi farsamo la samee haya'daha caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, si loo soo nooleeyo hay'adaha Dawladda (Saudi Arabia);

98.151. Si firfircoon uga qaybqaado dejinta geeddi-socodka iyo summadaha lagu muujiyay go'aankii Golaha Xuquuqda Aadanaha ee 15/28 iyadoo la kaashanayo OHCHR oo mudnaanta la siinayo karti bilidda waaxda xeer ilaalinta (Italy);

98.152. Raadi taageerada farsamo iyo midda dhaqaale ee lagu muujiyay qaab-dhismeedka DXC (UPR) si taageero loogu helo hirgelinta talooyinkii ay Soomaaliya oggolaatay iyo weliba ballanqaadyada lagu sameeyay meelo ka baxsan dib-u-eegistaan (Morocco);

98.153. Raadi taageerada beesha caalamka si loo fidiyo taageero farsamo iyo tababarrada loo baahan yahay ee lagu bilayo kartida dhinacyada xeer dejinta, xeer ilaalinta, ammaanka, waxbarashada, iyo daryeelka barakacayaasha iyo dadka naafada ah (Kuwait);

98.154. Sii wad codsiga taageerada farsamo iyo karti bilidda ee OHCHR iyo beesha caalamka (Israel);

98.155. Sii wad raadinta taageerada caalamka si kartida kor loogu qaado oo loo ilaaliyo xuquuqda aadanaha ee dalka gudihiisa (Indonesia).

99. Dhammaan gunaanadka iyo/ama talooyinka ku jira warbixintaani waxay ka turjumayaan mawqifka dawladda(aha) soo gudbiyay iyo/ama Dawladda dib-u-eegista lagu sameynayay. Waa inaan warbixnta loo fasiran mid Koox Hawleedku ay gebi ahaanteedaba oggol yihiin.

**Lifaaq**

**Xubnaha wafdiga**

Gudoomiyaha wafdiga Soomaaliya wuxuu ahaa Marwo Zahra Mohamed Ali Samantar, Wasiiru-dawlaha Xafiiska Ra'iisalwasaaraha Dawladda Federaalka ku Meelgaaraka ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliya ahna barta kulanka qaranka ee ilaalinta carruurta iyo xuquuqda aadanaha, wuxuuna ka koobnaa xubnaha soo socda:

- Marwo Dr. Maryan Qasim Ahmed, Wasiiradda Horumarinta Haweenka iyo Daryeelka Qoyska ee Dawladda Federaalka ku Meelgaaraka ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliya;
- Marwo. Asha Gelle Diriye, Wasiiradda Horumarinta Haweenka iyo Daryeelka Qoyska ee Dawlad Goboleedka Puntland ee Soomaaliya;
- Danjire Yusuf Mohamed Ismail Bari-Bari, Ergayga aan Caadiga ahayn ee Soomaaliya sida Joogtada ah ugu Matala Xafiiska Qarammada Midoobay ee Geneva;
- Dr. Omar Abdulle Alasow, La Taliyaha Madaxabannaan ee Dawladda Federaalka ku Meelgaaraka ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliya ee kala taliya Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalimga ah DXC (UPR)

# Tixgelinta ay Dawladda Soomaaliya siisay 155kii Talo ee loo soo jeediyay

1. Dawladda Soomaaliya (DKMG) waxay Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalamiga ah iyo warbixnta la socotaba u hibeynaysaa dadweynaha Soomaaliyeed, gaar ahaan kuwooda dhibaatooyinka u nugul. Dagaalka sokeeye ee dabada dheeraaday ee muddada labaatanka sano kor u dhaftay socda ayaa wiiqay asaaskii qanuun, kii siyaasadeed iyo kii bulsho intaba.

2. Si kastase ha ahaatee, muddooyinkaan dambe Soomaaliya waxay horumar ka sameysay dhinacyo badan oo ay ka mid tahay dhaqangelinta Geeddi-socodka lagu soo afjarayo nidaamka ku Meelgaarka ah inta aan la gaarin 20ka August 2012.

3. In kasta oo ay caqabado iyo seetooyin badani jiraan, haddana Soomaaliya waxay saddexdii sano iyo barkii la soo dhaafay wada-shaqayn fiican la lahayd Qarammada Midoobay, taasoo keentay in la dhaqangeliyo shan go'aan oo muhiim ah iyo weliba natiijadii ka soo baxday wadahadalkii gooni-goonida ahaa ee Golaha Xuquuqda Aadanuhu ay Soomaaliya uga taageerayeen arrimaha farsamo ee la xiriira xuquuqda aadanaha. Arrimahaan waa in loo aqoonsadaa inay yihiin tallaabooyin wax ku ool ah oo Dawladda Soomaaliya ay horay u qaadday.

4. Marka la eego wada-shaqaynta ay Soomaaliya la sameysay nidaamyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, mid ka mid ah tallaabooyinkii wax ku oolka ah ee Soomaaliya ay sannadkaan 2011ka qaadday waxay ahayd dhaqangelintii warbixintii Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalamiga ah ee Soomaaliya ee ay 3dii May 2011 magaalada Geneva ku soo diyaariyeen Golaha Xuquuqda Aadanuhu. Waa markii ugu horreysay ee ilaa sannadkii 1984, ay Soomaaliya awood u yeelatay inay iskeed u sameysato Warbixin Qaran, wada shaqayn dhab ah oo miro dhashayna la sameyso nidaamka xuquuqda aadanaha.

5. Iyadoo ay taasi jirto, ayay haddana tahay inaan loo qaadan in wada shaqayn la'aantii 25kii sano ee la soo dhaafay aan xuquuqda aadanaha wax dan ah ama ixtiraam ah horay loogu haynin. Dhaqanka Soomaalida ayaa ku dhisan isu gargaarka bani'aadamnimo iyo ixtiraamka xuquuqda aadanaha. Xilliyada collaadaha, waxaa jiray wax loo yaqaan Biri-Ma-Geydo (Spared from the Spear) oo lagu xakamayn jiray falalka colaadaha qabiillada dhex mara, lagulana dhaqmi jiray dadka maatada ah – taasoo ka dhigan "Mucaahadooyinka Geneva" ee Soomaalida, jiritaankeeduna wax badan ka horreeyay Mucaahadooyinka Geneva iyo Hague. Soomaaliya waxaa ka go'an inay xuquuqda aadanaha saldhig uga dhigto u guurista Soomaaliya cusub oo ku salaysan mabaadii'da dimuqraadiyadda iyo fur-furnaanta. Hase yeeshee, Soomaaliya keligeed ma taabbagelin karto xuquuqda aadanaha, si horay looga socdana waxaa loo baahan yahay wadashaqayn iyo taageero dhinaca farsamada ah oo Soomaaliya looga fidiyo dhinaca xuquuqda aadanaha.

6. Dawladda Soomaaliya waxay kaloo mahadnaq ballaaran u celinaysaa dalaka, Turkey, Iran, the United Arab Emirates, Kuwait, Algeria, Qatar, Oman, Djibouti, Sudan, Saudi Arabia, Malaysia, Egypt, Jordan,Bahrain, Tanzania, the United Kingdom, Sweden, Norway, the Netherlands, Australia, American Aid Group, Irish Aid Group, iyo Israeli Aid Group ee ka shaqeynaya xeryaha qaxootiga ee Kenya. Dawladdu waxay dalalkaan uga mahadcelinaysaa taageerada tooska ah ee ay ka geysteen wax ka qabashada dhibaatada abaarta dalka ka dhacday.

7. Dawladda Soomaaliya waxay ku ammaaneysaa Safiirkeeda Qarammada Midoobay ee Geneva, Mudane Yuusuf Maxamed Ismaaciil "Bari-Bari" sida uu u rumeysan yahay in Soomaaliya ay qayb ka noqon karto nidaamka 'DXC' (UPR) iyo sida uu arrintaas uga dhabeeyay. Argtidiisa fog iyo hoggaan wanaaggiisa oo si fiican uga muuqday muddadii uu Soomaaliya hawsha u joogay, halkaasoo uu Golaha Wasiirrada uga xog warramay lagamamaarmaannimada nidaamka DXC' (UPR), ayaa sabab u ah in la soo gaaro meesha hadda la joogo.

8. Dawladda Soomaaliya waxay uga mahadcelineysaa Midowga Afrika iyo Qarammada Midoobay gacanta aan hagrashada lahayn ee ay geysteen ee ka muuqatay khibradda Dr. Omar Abdulle Alasow, oo ah la taliyaha UNOSA ee Sharciyada Caalamiga ah ee Bani'aadamnimada islamarkaana kala taliya AMISOM dhanka Xuquuqda Aadanaha.

9. Dawladda Soomaaliya waxay mahad ballaaran u soo jeedineysaa Koox Hawleedka 'DXC' (UPR) oo ay ku jiraan dawladaha Soomaaliya talooyinka u soo jeediyay iyo kuwa waqtigu u diiday inay talooyinkooda soo gudbiyaanba. Waxaan kaloo uga mahadcelinaynaa dawladaha troika – Angola, Mexico, Thailand – sidii hufnayd ee ay noola shaqeeyeen. Waxaan uga mahadcelinaynaa tilmaamihii, talooyinkii iyo tusaalayaashii ay na siiyeen.

10. Ka qaybgalka Soomaaliya ay ka qaybgaleyso 'DXC' (UPR) wuxuu noo yahay fursad aan ku baarayno oo aan kalsooni buuxda kaga qaadanayno xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya annagoo afarta sano ee soo socda filayna inaan horumar la taaban karo gaari doono. Soomaaliya way soo dhoweynaysaa talooyinkii la soo jeediyay muddadii uu socday Dib-u-eegis Xilliyeedkii Caalamiga ahaa ee Soomaaliya ee la sameeyay 3dii May 2011. Wadatashiyo iyo qiimeyn taxaddar ku dheehan yahay oo talooyinka lagu sameeyay ka dib, waxaa Soomaaliya farxad u ah inay bixiso jawaabaha soo socda:

    98.1. Soomaaliya **qayb ahaan** ayay taladaan **oggolaatay.**

    Mabda' ahaan, Soomaaliya way oggolaatay taladaan wayna saxiixeysaa Borotokoolka aan Khasabka ahayn ee Mucaahadada lagu mamnuucayo Macaamilka ama Ciqaabta Jir-dilka ama Xaasidnimada ah oo Bani'aadamnimada ka baxsan ama Liidata (OP-CAT). Hase yeeshee, ansixinta OP-CAT Soomaaliya ayaa lagu lafogurayaa iyadoo loola dhaqmayo sidii mashruuc muddo dheer ah oo u baahan baaritaan iyo faham durugsan oo mucaahadada loo yeesho. Soomaaliya waxay ku taagan tahay waddadii ay ku xoojin lahayd fahamka ay u yeelanayso qodobbada Mucaahadada ka Ilaalinta Dadka oo Dhan Qarsoonka Jajuubka ah iyo waxyaabaha ka dhalanaya hirgelinta mucaahadadaas.

Dawladdu waxay si buuxda u taageersan tahay mabaadii'da ay ku salaysan tahay Tubta Roma (Rome Statue) waxaana ka go'an inay soo afjarto dhaqanka soo jireenka ah ee xayndaabka oo dadka ku xadgudbay xuquuqda aadanaha lagula xisaabtamo falalka ay geysteen iyadoo sharciga la marinayo. Hase yeeshee, waqtiga hadda la joogo duruuftu Soomaaliya u oggolaan meyso inay qayb ka noqoto Tubta Roma (Rome Statue) ee Maxkamadda Danbiyayada Caalamiga ah. Dawladdu waxay ku hawlan tahay qaadista tallaabooyin ay ku xaqiijineyso xasilloonida dalka oo ay dib ugu soo celinayso xukunka sharciga oo ay ku jiraan haya'daha qaanuunka iyo kuwa nabadgelyada. Waxay kaloo dawladdu ku hawlan tahay dejinta istaraatiijiyad dib-u-heshiisiin qarameed oo la isugu keenayo dhammaan dhinacyada is haya, sidaa awgeed ma doonayso in dadaalladaasi ay wiiqmaan oo dagaalku sii dabo dheeraado. Horumar laga sameeyo istaraatiijiyada dib-u-heshiissinta qaran ayaa shardi u ah wadahadal kasta oo nuxur leh oo mucaahadada lagu hirgelinayo.

Dawladda waxaa ka go'an inay mustaqbalka abuurto xaalad Soomaaliya u oggolaata inay dhaqangeliso Tubta Roma (Rome Statue) ee Maxkamadda Danbiyayada Caalamiga ah.

Xaaladdaas oo abuuri doonta in si fiican loogu fahmo Tubta, wacyiga dadkana kor loogu qaado oo looga dhaadhiciyo in dhaqangelinta xukunka Tubtu uusan dib-u-raac lahayn.

98.2. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Ansixinta Mucaahadada Ciribtirka Dhammaan Qaababka Takoorka Haweenka (CEDAW) waxay ka mid tahay go'aammada ay Soomaaliya iskeed u qaadatay (eeg tuduca 46, UPR National Report). Dawladda waxaa ka go'an ansixinta CEDAW, muddo gaaban gudeheedna waxay bilaabaysaa tallaabooyinka mucaahadada lagu ansixin lahaa.

98.3. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Soomaaliya waxay saxiixday Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha bishii May 2001, Borotokoolka aan Khasabka ahayn ee ka Qaybgalka Carruurrta Colaadaha Hubeysan waxay saxiixday bishii September 2005. (eeg tuduca 41, National Report). Dawladdu waxay ku taagan tahay waddadii ay ku ansixin lahayd Mucaahadada iyo Borotokoolka aan Khasabka ahayn oo ay ku hirgelin lahayd Ballanqaadyadii Paris si Carruurta looga ilaaliyo Shaqaaleynta Sharci darrada ah ama inay qortaan Ciidanka Qalabka Sida ama Kooxaha Hubeysani.

98.4. Soomaaliya **qayb ahaan** ayay taladaan **oggolaatay.**

Eeg 98.1, 98.2, 98.3,

Ansixinta Mucaahadada Dadka Naafada ah (CRPD) iyo Borotokoolkeeda aan Khasabka ahayn waxay ka mid yihiin go'aammada ay Soomaaliya iskeed u qaadatay (eeg tuduca 46, National Report). Dawladdu muddo gaaban gudeheed ayay ku bilaabeysaa ansixinta Mucaahadada iyo Borotokoolkeeda aan Khasabka ahayn. Marka la eego Borotokoolka aan Khasabka ahayn ee CEDAW, Mucaahadada ka Ilaalinta Dadka oo Dhan Qarsoonka Jajuubka ah (CED), Borotokoolka aan Khasabka ahayn ee Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha ee iibka Carruurta iyo Borotokoolka aan Khasabka ahayn ee Mucaahadada Caalmiga ah ee Xuquuqaha Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka (OP-ICESCR), Soomaaliya waxay

doonaysaa inay daraasad dheeraad ah ku sameyso mucaahadooyinkaan iyo waxyaabaha ka dhalanaya hirgelintooda.

98.5. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.2, 98.3,

98.6. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.2, 98.3,

Ansixinta Mucaahadada Caalamiga ah ee Ilaalinta Xuquuqda Dhammaan Shaqaalaha Muhaajiriinta iyo Qoysaskooda waxay ka mid tahay go'aammada ay Soomaaliya iskeed u qaadatay (Eeg tuduca 46, National Report). Muddo gaaban gudeheed ayay Dawladdu ku bilaabeysaa ansixinta Mucaahadada.

98.7. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.2, 98.3,

98.8. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.2, 98.3,

Soomaaliya waxay muujisay sida ay uga go'an tahay inay ansixiso mucaahadooyinka ay ka midka yihiin CEDAW, CRC iyo Mucaahadada Dadka Naafada ah iyo Borotokoolkeeda aan Khasabka ahayn (Eeg tuduca 46, UPR National Report). Mucaahadadaani waxay ka dhigeysaa Mucaahadooyinka waaweyn ee ay Soomaaliya qaybta ka tahay toddobo mucaahado iyo dhowr borortokool oo aan khasab ahayn.

98.9. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.2, 98.3,

98.10. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.3,

Ansixinta Mucaahadada Qarammada Midoobay ee Danbiyada Habaysan ee Xuduudaha ka Tallaaba iyo Borotokoolkeeda aan Khasabka ahayn waxay ka mid tahay go'aammada ay Soomaaliya iskeed u qaadatay (Eeg tuduca 46, National Report).

98.11. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.3,

98.12. Soomaaliya way o**ggolaatay** taladaan.

Eeg 98.3,

98.13. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.3,

98.14. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.3,

98.15. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.2,

98.16. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.8,

Sida lagu sheegay Warbixinta Qaranka ee UPR (UPR National Report), Dawladdu ma doonayso in ku dhaqanka xukunka dilku uu sii kordhiyo nafaha badan ee go'aya. Soo saarista go'aanka lagu joojinayo xukunka dilku wuxuu ka mid yahay go'aammada ay Soomaaliya iskeed u qaadatay (Eeg tuduca 51, National Report). Iyadoo xukunka dilka hadda loo adeegsado danbiyada halsitoodu sarreyso, ayaa haddana Dawladdu waxay ka shaqeynaysaa sidii ay u joojin lahayd xukunka dilka iyadoo qorshuhu yahay in kama dambaysta gebi ahaanba la baabi'iyo.

98.17. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.8,

Laga soo bilaabo March 2008, Soomaaliya waxay si firfircoon ula shaqayneysay ulana shaqayn doontaa Golaha Xuquuqda Aadanaha iyo Xafiiska Ergayga Sare ee Xuquuqda Aadanaha. Dawladdu way sii wadi doontaa inay raadiso taageero dhaqaale iyo mid farsamaba iyadoo ka duuleysa dallada qaanuuneed ee go'aanka ka soo baxay Golaha Xuquuqda Aadanaha ee la xiriira ka taageerista Soomaaliya dhinaca xuquuqda aadanaha, tageeradaasoo ka imaanaysa OHCHR iyo dalalka daneynaya iskaashiga lammaan waayo karti biliddu waa lamahuraan. Sida lagu sheegay warbixinta UPR, dadaalka Dawladda iyo siday uga go'an tahay hagaajinta xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya iyo inay ka gudubto caqabadaha waaweyn ee hor yaallayi waxay u baahan yihiin wadashaqayn lammaane iyo mid wadajir ah iyo iskaashi waqtiyesysan oo wax-ku-ool ah.

Soomaaliya waxay quud darreynaysaa in beeshacaalamka iyo OHCHR ay sii wadi doonaan oo kordhin doonaan taageeradooda wax-ku-oolka ah ee Soomaaliya ay ku abuurayso xaalad si fiican loogu ilaalinayo oo lagu taabbagelinayo xuquuqda aadanaha ummadda Soomaaliyeed. Taageeradaani waa inay noqotaa mid waafaqsan mudnaanta qaran ee lagu sheegay Warbixinta Qaran ee UPR iyo jawaabtii ay Dawladdu ka bixisay talooyinkii UPR iyo weliba dadaalka ay Dawladdu ugu jirto hirgelinta iyo ka warbixinta talooyinkii UPR. Dawladda Soomaaliyeed waxay u yabooheysaa oo soo dhoweynaysaa iskaashiga lammaanaha ah ee sida aadka ah ay ugu baahan yahay in laga taageero dhinacyada farsamada iyo karti bilidda la xiriirta xuquuqda aadanaha.

Soomaaliya waxay uga mahadcelinaysaa dalalka Egypt, Bangladesh, Azerbaijan, Pakistan, Oman, Nigeria, Saudi Arabia, Italy, Morocco, Kuwait, Israel iyo Indonesia talooyinka ay u soo jeediyeen.

98.18. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Wadatashiga Qabyo Qoraalka Dastuurka Soomaaliya (oo halkaan ku magacaaban: "Qabyo Qoraal Dastuur") ee ay diyaariyeen IFCC wuxuu tixgeliyaa arrimaha ay ka midka yihiin dhawrista xuquuqda aadanaha, gaarista caddaaladda bulshada, ku dhaqanka sharciga. Qabyo Qoraalka Dastuurka waxaa ku jira Cutub ka hadlaya Xuquuqaha iyo Xorriyaadka Asaasiga ah, iyadoo dhammaan xuquuqaha iyo xorriyaadka asaasiga ah ee lagu tibaaxay Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanuhu ay ku dhan yihiin Qabyo Qoraalka Dastuurka (Eeg Tuduca 39, National Report).

98.19. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Is-afrgradkii Kampala ee la saxiixay 9kii June 2011 wuxuu dhigayaa in dib loo dhigo doorashada Madaxweynaha iyo Af-hayeenka Baarlamaanka iyo ku xigeennadiisa muddo 12 bilood ah oo ka bilaabanta August 2011. Dib u dhigistaas waxaa la isula oggolaaday si diyaargarow fiican loo sameeyo oo loo dhammeystiro hawlaha kalaguurka ee mudnaanta koowaad leh ee ay ka midka yihiin ammaanka, dib-u-habaynta baarlamaanka, dejinta dastuurka, u diyaargarowga doorashooyinka iyo dhaqdhaqaaqyo siyaasadeed oo kale.

6dii bisha September 2011, Dawladdu waxay dhaqangelisay Geeddi-socod tifaftiran oo lagu soo afjarayo xaaladda ku Meelgaarka ka hor inta aan la gaarin 20ka August 2012, kaasoo sannadka haray lagu qeexayo astaamaha Hay'adaha Federaalka ku Meelgaarka ah iyo Maamul Goboleedyada Soomaaliyeed, shirkaas oo ka dhacay Muqdisho oo ahaa Shir Wadadtashi oo Heer Sare ah wuxuu isu keenay hawlwadaagyo kala duwan oo gudaha iyo dibadda ka kala yimid.

Waxayaabaha Geeddi-socodku yaboohayo waxaa ka mid ah dib-u-habayn iyo wax ka beddelid lagu sameeyo Guddiga Dastuurka Federaalka Madaxabannaan (IFCC) ee hadda jira, magacaabista guddi sagaal xubnood ka kooban oo dastuurka dib-u-eegis ku sameeya, wadatashiyo dhab ah oo dadweynaha lala yeesho oo ra'yigooda la dhegeysto si dadweynuhu ay si buuxda ugu hantiyaan dejinta dastuurka, isku dhafka qaar ka mid ah arrimaha muranku ka taagan yahay iyadoo la sameynayo guddiga isku dhafidda iyo in la dhaqangeliyo qormada kama dambeysta ah ee dastuurka ugu dambeyn July 1, 2012. Dawladda waxaa ka go'an inay hirgeliso Geeddi-socodka iyadoo la raacayo astaamaha iyo waqtiyada lagu heshiiyay.

98.20. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.18,

Qabyo Qoraalka Dastuurka ayaa qeexaya in Soomaaliya ay noqoto nidaam federaali ah oo dadweynuhu ay si dimuqraadiyad ah xornimadooda u adeegsadaan marka ay joogaan heerarka kala duwan ee dawladda.

98.21. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Dhaqanka xun ee Gudniinka Dumarka ee Fircooniga ahi (FGM) aad ayuu ugu baahsan yahay geyiga Soomaaliya. In yar mooyee, haweenay ama gabar kasta oo Soomaali ahi way soo martay dhaqankaan xanuunka badan (Eeg tuducas 52-53, UPR National Report). Soomaaliya waxay qaadi doontaa tallaabo kasta oo lagu cirib tirayo dhaqanka Gudniinka Dumarka ee Fircooniga ah (FGM) iyo qaababka kale ee dhibaatooyinka dumarka loogu geysto. Tallaabooyinkaas waxaa ka mid noqon doona kuwo qaanuun, olole waxbarasho oo wacyigelin ah iyo wadahadal lala yeesho hoggaamiayayaasha dhaqanka iyo kuwa dinta, ururrada haweenka iyo dadka ku shaqeysta Gudniinka Dumarka ee Fircooniga ah (FGM). Soomaaliya waxaa ka g'an inay wax ka beddesho qaanuukeeda ciqaabta oo ku kordhiso qodobbo si cad u mamnuucaya Gudniinka Fircooniga (FGM). Soomaaliya waxay taageero dhaqaale iyo mid farsamo uga baahan tahay dawladaha kale ee xubnaha ah, waxayna beeshacaalamka ugu yeeraysaa inay ka qayb qaataan sidii Soomaaliya ay u dhaqangelin lahayd ciribtirka Gudniinka Dumarka ee Fircooniga (FGM).

98.22. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.21,

98.23. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.21,

98.24. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.21,

98.25. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.21,

98.26. Soomaaliya way o**ggolaatay** taladaan.

Eeg 98.21,

98.27. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.21,

98.28. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.21,

98.29. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.21,

98.30. Soomaaliya way o**ggolaatay** taladaan.

98.31. Soomaaliya way o**ggolaatay** taladaan.

98.32. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Sharciga casriga ah, kan Islaamka (shareecada) iyo xeer dhaqameedka, oo aad Soomaaliya looga isticmaalo, ayaa Soomaliya ka wada shaqeeya. Dawladda Soomaaliyeed waxay mudnaanta koowaad siinaysaa dejinta iyo isku-dhafka qaanuunka qaranka oo uu ku jiro xeer dhaqameedku iyo waafijinta waajibaadka caalamiga ah iyo halbeegyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha ee hadda jira.

98.33 Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Qabyo Qoraalka Dastuurka waxaa ku jira qodob lagu asaasayo Guddiga Xuquuqda Aadanaha oo Dawladda ka madax bannaan. Dawladdu si buuxda ayay ugu kalsoon tahay faaii'dada Guddigaasi uu u leeyahay ilaalinta iyo taabbagelinta xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya. Dawladdu waxay u baahan tahay taageero iyo talooyin farsamo oo ay guddiga ku dhisto oo uga dhigto mid u hoggaansama Mabaadii'da Paris.

98.34. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.33,

98.35. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.33,

98.36. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.33,

98.37. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.17, 98.33, 98, 102,

Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee la hiigsanayo wuxuu yeelan doonaa xilal garsoorka u dhigma oo ay ku jiraan baaritaanka xadgudubyada xuquuqda aadanaha iyo kala xeerinta kiisaska.

98.38. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Dawladdu, iyadoo kaalmeysanaysa ciidammada nabad ilaalinta ee AMISOM ayay horraantii August la wareegtay boqolkiiba 95 caasimadda Muqdisho, waxayna xukunkeeda ku sii fidineysaa aagag ku yaal koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya. Dawladda waxaa ka go'an in aagagga hadda gacanteeda soo galay ay ka dhisto kaabayaasha asaasiga ah ee dadweynaha iyadoo la raacayo Qorshaha Xasilinta Ammaanka Qaranka (NSSP) oo la adeeegsanayo guddiyada ammaanka iyo nabadgelyada ee degmooyinka in bulshada ammaankeeda la

ilaaliyo oo loo fidiyo adeegyada asaasiga ah sida caafimaadka, waxbarashada iyo biyaha nadiifka ah ee la cabbo. Dawladdu waxay furtay dhawr saldhig oo boolis, waxay sameysay baro kontorool oo lagu baaro baabuurta iyo dadkaba waxayna Muqdisho iyo gobollada kaleba ka hawlgelisay ilaa 5,000 oo saraakiil boolis ah. Dawladdu waxay furtay inta badan saldhigyadii booliska ee xaafadaha Muqdisho ee la xoreeyay iyadoo weliba labo saldhig oo cusub ka furtay Suuq-Bacaad iyo suuqa Bakaaraha si ammaanka, sharciga iyo kala dambeynta loo sugo oo rayidka loo ilaaliyo iyadoo la raacayo xeerarka xuquuqda aadanaha. Dawladdu waxay si fiican ula shaqeysaa beeshacaalamka gaar ahaan UNDP iyo UNPOS iyo Waaxda Horumarinta Amniga (SSD) oo Dawladda ka caawiya sidii booliskeeda iyo ciidankeeda amnigu ay u waari lahaayeen oo karti bilid loogu sameyn lahaa.

Guulihii ugu dambeeyay ee ay gaareen ciidammada Dawladda iyo nabad ilaaliyayaasha AMISOM ayaa wxay gogoldhig u noqonayaan horumar laga sameeyo dhinaca bani'aadamnimada iyo kan ammaankaba. Dawladdu way garowsan tahay wayna ka mahadcelineysaa taageerada ay Midowga Yurub, Japan, Uganda, Kenya, Djibouti, Ethiopia iyo Sudan u fidiyeen Ciidanka Booliska Soomaaliyeed. Dawladdu waxay yaboohaysaa iskaashi lammaane ah iyo mid wadajir ah oo si ay u hesho dhaqaalaha lamahuraanka u ah kor u qaadista awoodda ciidammada booliska iyadoo la siinayo tababarro, dhaqan-celin iyo in dib loogu dhiso saldhigyadii booliska lana qalabeeyo oo mushahaar loo qoro si loo xaqiijiyo ilaalinta xuquuqda aadanaha.

98.39, Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.19,

98.40. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.19,

98.41. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Dawladda waxaa ka go'an inay sameyso dadaal kasta oo ay ku xoojineyso qaab-dhismeedka qaanuun iyo kan haya'deed ee lagu ilaalinayo xuquuqda aadanaha oo ay ka mid yihiin ansixinta heshiisyada waaweyn ee xuquuqda aadanaha (Eeg tuduca 46, UPR National Report).

98.42. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Dawladda waxaa ka go'an inay muwaadiniinteeda ku wacyigeliso xuquuqda aadanaha oo ay qaaddo tallaabooyin haboon oo ay ku taabbagelinayso waxbarashada iyo tababarrada la xiriira xuquuqda aadanaha iyo sharciyada caalamiga ah ee bani'aadamnimada (Eeg tuduca 72, UPR National Report).

98.43. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.1, 98.42,

98.44. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Somaliland way leedahay Guddiga Xuquuqda Aadanaha, Puntland waxay sameynaysaa Xafiiska Difaaca Xuquuqda Aadanaha. Maadaama la qorsheeyay in la dhiso Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee heer qaran, dawladdu waxay rabtaa inay kobciso wadashaqaynta ay la leedahay maamullada Somaliland iyo Puntland.

98.45. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.38,

Ilaalinta muwaadiniintu waa mid ka mid ah astaamaha Geeddi-socodka. Dawladdu waxay si fiican ula shaqeysaa Qarammada Midoobay iyo AMISOM si ay horumar la taaban karo uga sameyso dhinaca ilaalinta muwaadiniinta. Iyadoo taageero ka helaysa beeshacaalamka ayay Dawladdu ku hawlan tahay dib u dhisidda saldhigyadii booliska iyo hawlgeinta boolis rayid ah.

98.46. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.17,

Dawladdu waxay wadatashi kula jirtaa dhammaan daneeyayaasha arrimaha Soomaaliya si loo sameeyo Qorshaha Hawlgalka Qaran (National Action Plan) ee lgu hormarinayo laguna ilaalinayo xuquuqda aadanaha.

98.47. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.38,

98.48. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.38, 98.114,

98.49. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.19,

Dawladdu waxay mar kale ku celinaysaa sida ay uga go'an tahay xasilinta dalka, ballaarinta dib-u-heshiisiinta iyo dhisidda Soomaaliya adag. Dawladdu waxay marar badan kooxaha ku kacsan ka codsatay inay hubka dhigaan, gacan ka hadalkana joojiyaan oo miiska wadahadlka soo fariistaan. Geeddi-socodka waxaa ka mid ah qayb dhan oo ka hadlaysa xalka siyaasadda iyo dib-u-heshiisiinta, Dawladduna arrimahaan waxay siisay mudnaanteeda koowaad.

98.50. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.49,

98.51. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Dawladda waxaa ka go'an sidii ay u dejin lahayd qawaaniin iyo nidaam lagu hirgelinayo xuquuqaha dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka. Caafimaadka iyo waxbarashadu waa

meelaha mudnaanta koowaad la siiyay. Dawladdu waxay taageero dhaqaale iyo mid farsamoba uga baahan tahay beeshacaalamka si dadweynaha Soomaaliyeed heer macquul ah looga gaarsiiyo dhanka xuquuqda dhaqaalaha iyo tan bulshada.

98.52. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Dawladda waxaa ka go'an, iyadoo aan awooddeda waxba kala harayn, inay sii waddo dadaalkeeda la xirrira wacyigelinta xuquuqda aadanaha ee ay ka midka yihiin tababarrada, waxbarashada la xiriirta xuquuqda aadanaha iyo ololayaasha wacyiga dadweynaha kor loogu qaadayo. (Eeg tuduca 72, UPR National Report).

98.53. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg, 98.49, 98.8,

98.54. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Dawladda Soomaaliya waxay go'aansatay inay ansixiso Borotokoolka aan Khasabka ahayan ee Mucaahadada Xuquuqda Ilmaha. Waxaan kaloo gacanta ku haynaa sidii aan u dhaqangelin lahayn Qorshe Hawleedka uu codsanayo go'aanka Golaha Ammaanka ee Qarammada Midoobay ee 1612 oo soo baxay 26ka July 2005, kaasoo ay Dawladdu horay u go'aansatay. (Eeg tuduca 81-85, UPR

National Report)

Dawladdu waxay dhammaan ciidamdeeda ammaanka u qaybisay wareegto adag oo u diidaysa inay qortaan carruur da'doodu siddeed iyo toban sano ka yar tahay, qofkii ciidanka ka tirsan oo la ogaado in da'diisu ay siddeed iyo toban sano ka yar tahayna in si dhkhso ah ciidanka looga saaro. Dawladdu waxay dejinaysaa nidaam si adag loogu meelmarinayo siyaasaddeeda ku aaddan inaan sinnaba loogu dulqaadan doonin in carruurtu ay ciidammada dawladda ka mid noqdaan.

98.55. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.21,

98.56. Soomaaliya way o**ggolaatay** taladaan.

Eeg 98.21,

98.57. Soomaaliya q**ayb ahaan** ayay taladaan **oggolaatay.**

Xeeldheeraha madaxabannaan ee QM u qaabilsan arrimaha xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya, Dr. ShamsulBari wuxuu Soomaaliya ku yimid toddobo booqasho oo middii ugu dambeysay ay ahayd bishii July 2011, markaasoo ay isaga iyo wafdigii la socday oo ka koobnaa Mudane Idrissa Oumar Kane, Sarkaalka Xuquuqda Aadanaha Waaxda Afrika ee OHCHR iyo Marwo Silvia Lavagnoli, Madaxa Xafiiska UNPOS Qaybta Xuquuqda Aadanaha, ay la kulmeen Ra'iisal Wasaaraha Prof. Abdiweli Mohamed Ali iyo wasiirradiisa.

Annagoo ku saleynayna waayoaragnimada aan ka kororsannay wada shaqeynta Dr. Shamsul Bari, ayaan waxaan aqoonsannay qiimaha ay leeyihiin Warbixinnada Gaarka ah ee ay bixiyaan Golaha Xuquuqda Aadanuhu.

Dawladdu waxay martiqaad u fidin doontaa Warbixiyayaasha Gaarka ah iyadoo kiisaska u kala hormarin doonta sida ay u kala mudan yihiin. Iyadoo fursaddaan ka faa'iideysanaysa oo tixgelinaysa xaaladda uu dalku marayo, ayay Dawladdu ku wargelineysaa xubnaha sharafta leh ee Golaha Xuquuqda Aadanaha in Soomaaliya ay martiqaad furan u fidineyso Warbixiyayaasha Gaarka ah ee soo socda:

- Warbixiyaha Gaarka ah ee xaqa cuntada.
- Warbixiyaha Gaarka ah ee xaqa heerka ugu sarreeya ee laga gaari karo caafimaadka jirka iyo kan maskaxda.
- Warbixiyaha Gaarka ah ee xuquuqda aadanuhu u leeyahay biyo uu cabbo oo bed qaba iyo nadaafadda guud.
- Warbixiyaha Gaarka ah ee xuquuqda waxbarashada
- Warbixiyaha Gaarka ah ee rabshadaha dumarka lagula kaco, sababaha dhaliya iyo waxyaabaha ka dhasha.
- Warbixiyaha Gaarka ah ee xuquuqda aadanaha ee barakacayaasha
- Warbixiyaha Gaarka ah ee raadka xun ee ay qaadista iyo xoorista walxaha sumeysan oo halista ahi ku reebaan ka faaiideysiga xuquuqda aadanaha.

Dawladdu si dhakhso ah ayay uga jawaabi doontaa dhammaan codsiyada booqashooyinka ee harsan, waxayna sannadku inta uusan dhammaan sugeysaa Warbixiyaha Gaarka ah ee rabshadaha dumarka lagula kaco, sababaha dhaliya iyo waxyaabaha ka dhasha.

98.58. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

98.59. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Dadaallada ay Soomaaliya xuquuqda aadanaha kor ugu qaadeyso oo ku taabbogelinayso waxaa ka mid ah, sida ay ugu dadaaleyso tixgelinta baahiyaha gaarka ah ee dadka dhibaatooyinka u nugul ee ay ka midka yihiin carruurta, haweenka, dadka naafada ah iyo waayeelka.

98.60. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Dawladda waxaa ka go'an inay sii waddo dadaalkeeda la xiriira qaadista tallaabooyin ka dhanka ah xadgudubka xuquuqda aadanaha ee haweenka sida rabshadaha lab-dheddiga ku saleysan, adeeg yarida dhibbanayaasha rabshadaha lab-dheddiga ku saleysan, gaar ahaan kuwa rabshadaha galmoodka ka dhasha, guurka jajuubka ah iyo gudniinka fircooniga ah (FGM). Wasaaradda Haweenka iyo Arrimaha Qoyska ayaa loo xilsaaray inay hoggaamiso

dadaallada Dawladdu ay ku hormarineyso xuquuqda haweenka iyo sinnanta ragga iyo haweenka. Dawladdu waxay qorsheynaysaa inay soo saarto barnaamijyo iyo qorshayaal gaar ah oo ku saabsan dhinacyada waxbarashada, shaqogelinta iyo weliba isu-dheellitirka matalaadda ragga iyo haweenka ee dhammaan heerarka maamullada hadda jira.

98.61. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.54,

Saboolnimadu si aad ah ayay ugu baahsan tahay Soomaliya. Sida laga soo xigtay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, ku dhowaad boqolkiiba 43 dadka Soomaaliya ku nool, oo boqolkiibq 54 ka mid ahi ay miyiga ku nool yihiin, waxaa maalintii soo gala wax ka yar 1 doollarka maraykanka ah. Sida ay sheegtay Waaxda Badbaadada Cuntada iyo Nafaqada ee Soomaaliya (FSNAU), abaarta hadda jirtaayi waxay macaluul gaarsiisay 6 gobol, 4 malyan oo qof oo Soomaaliya ku noolina (oo 3 malyan oo ka mid ahi ay koonfurta ku nool yihiin) waxay ku jiraan xaalad aad u adag.

Tobanaan kun oo barkood ay carruur yihiin ayaa horay u dhintay sida ay sheegtay isla haya'adda kor ku xusani. Saboolnimada iyo yaraanta fursadaha maciishadda ayaa ah sababta ugu weyn ee ay kooxaha hubeysani carruurta askar ugu qoranayaan. Sida ay caddeysay OCHA, tiro lagu qiyaasay 1.8 malyan oo carruur ah oo da'doodu ay u dhexeyso 5 ilaa 17 sano oo ku nool gobollada koonfureed iyo kuwa brtamaha Soomaaliya ayaan wax iskuul ah dhigan. Dawladda waxaa ka go'an inay dhammaan carruurta Soomaaliyeed siiso waxbarasho hoose/dhexe oo lacag la'aan iyo khasab ah, waxayna ku talo jirtaa inay bil kasta ugu yaraan hal iskuul iyo hal cisbitaal furto si ay u xaqiijiso in carruurtu ay iskuullada galaan oo fursado waxbarasho u helaan.

Dawladdu waxay taageero caalami ah uga baahan tahay sameynta Qorshaha Horumarinta Qaranka si loo yareeyo heerka saboolnimada ee Soomaaliya oo loo kordhiyo helitaanka xuquuqaha asaasiga ah ee ay ka midka yihiin cuntada, adeegyada caafimaadka iyo biyaha, waxbarashada iyo hoyga.

98.62. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

98.63. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.16,

98.64. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.16,

98.65. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.16,12

98.66. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.16,

98.67. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.16,

98.68. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.16,

Dawladdu waxay eegeysaa arrinta la xiriirta Borotokoolka labaad ee aan Khasabka ahayn ee loo dirayo ICCPR ee ujeeddadiisu tahay baabi'inta xukunka dilka.

98.69. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.16,

Arrinta la xiriirta "ciribtirka dhaqanka dhagax ku dilka", habkaan lagama isticmaalo meelaha ay Dawladdu ka taliso. Hase yeeshee waxaa jira warar sheegaya in jir-dil iyo ciqaab xaasidnimo ah oo liita oo bani'aadamnimada ka baxsan oo ay ka mid yihiin dhagxin , gacmo/lugo gooyn iyo karbaashid ay ka dhacaan meelaha ay Al-shabaab gacanta ku hayso. Marka ay Dawladdu isku fidiso aagaggaas, waxaa ka go'an inay ciribtirto dhaqanka dhagax ku dilka iyadoo dhinaca kalena ay u hawlgaleyso sidii ay ugu dhawaaqi lahayd joojinta xukunka dilka. Dadka danibiyada noocaas ah ku dhaqaaqana falakooda waa lagula xisaabtamayaa.

98.70. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.102,

Dawladdu waxay ku tallabsan doontaa wax kasta oo awooddeeda ah oo ay si hufan oo waqtiyeysan ugu baareyso dilalka iyo hanjabaadaha gacan ka hadalka wata ee lagula kaco wariyayaasha iyo dadka matala bulshada rayidka ah, iyadoo dawladdu ay qaadeyso tallaabo kasta oo lamahuraan ah oo ammaankooda gaar lagu sugayo. Dawladdu waxay sii wadi doontaa dadaalkeeda ay kor ugu soo qaadeyso sharciga qabyada ah ee warbaahinta si ay u soo gaarsiiso heerka caalamiga ah iyadoo dhanka kalena abuureysa xaalad horseedeysa xorriyadda muujinta ra'yiga. (Eeg tuduca 56, UPR National Report).

98.71. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Dawladdu waxay sameynaysaa dadaal kasta oo ay ku joojinayso nooc kasta oo rabshadaha ku saleysan gacan ka hadalka hubeysan oo ay ku jiraan toogashada degdegta ah, daandaansiga, dilalka aan xukunka ku saleysnayn iyo xadgudubyada halista ah ee laga galo xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada. Dadka arrimahaas mas'uulka ka ahna falalkooda waa lagula xisaabtamayaa.

98.72. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg, 98.70, 98.102,

98.73. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Ballanqaadyada ay Soomaaliya ka sameysay sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada (IHL) aad bay u adkeynaysaa. Maadaama ay Soomaaliya tahay dawlad qayb ka ah Mucaahadada Geneva ee 1949, waxaa waajib ka saaran yahay ixtiraamka sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimda (IHL) . dhammaan ciidammada Dawladda iyo kuwa xulafada la ahba waxaa waajib ku ah inay u hoggaansamaan sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada (IHL), xeerarka heshiiska iyo kuwa dhaqanka iyo sharciga xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya seetada ku ah. Ciidanka qaranka ee Soomaaliya waxaa loo sheegay inay u hoggaansamaan sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada (IHL) iyo weliba xeerarka dagaalka ee dhaqanka Soomaaliyeed ee loo yaqaan *'Biri-Ma Geydo'* xataa haddii aysan dagaalyahaniinta fallaagadu u hoggaansamin. Xeerarka dagaalka ee Soomaalida oo wax badan ka horreeyay dhaqangelintii Mucaahadooyinka Hague iyo Geneva ayay aad isugu egyihiin Qodobka Guud ee 3aad ee Mucaahadada Geneva ee 1949. Sida dhabta ah, waxyaabaha la iska rabo iyo waxyaabaha la iska reebay ee ku jira Qodobka Guud ee 3aad ee Mucaahadada Geneva ee 1949 ayaa sidoo kale laga heli karaa xeerarka dagaalka ee dhaqanka Soomaaliyeed. Xeerarkaasi waxay dhaqan ahaan xakameynayaan colaadda qabiil ee loo geysanayo dadka iyo hantida iyagoo ilaalinaya kooxo cayiman oo lama taabtaan ah iyo dagaalyahannada aan markaas dagaalka ku jirin ama aan markii horeba ka qaybgelin iyo weliba inay meelaha qaar u diidaan in hub gaar ah loo isticmaalo ama falal gaar ah lagu sameeyo.

Dawladda waxaa ka go'an inay soo saarto amarro cadcad oo cid kasta ay tahay inay u hoggansato oo ay qaaddo tallaabo kasta oo looga hortagayo waxyeellada rayidka looguna hoggaansamayo sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada (IHL) oo uu ka midka yahay mabaadii'da asaaska ah ee sheegaysa in la kala saaro hadafka askareed iyo kan raiydka iyo ilaa heerka awoodeed ee la isticmaali karo si loo xaqiijiyo in waxyeellada rayidka soo gareysa aysan u dhigmin/qalmin marka la eego hadafka askareed ee weererka looga golleeyahay iyo sida ay lagamamaarmaan u tahay in la qaado tallaabooyin gaashaan ah oo looga hortagayo ama lagu yareynayo waxyeellada aan ula kaca ahayn ee soo gaari karta dadka rayidka ah iyo hantidooda.

98.74. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.73,

98.75. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.73,

98.76. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.73,

Iyadoo kaashaneysa AMISOM iyo ciidammadeeda amniga, ayay Dawladdu qaadeysaa tallaabo kasta oo loo baahdo oo lagu badbaadinayo nolosha dadka rayidka ah.

98.77. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.73,

98.78. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.2,

Mudnaanta koowaad ayay Dawladda Soomaaliyeed siisay dhaqangelinta tallaabo kasta oo qaanuun ama waxqabad oo lagu ciribtirayo dhammaan rabshadaha dumarka lagula kaco.

98.79. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Way kooban tahay awoodda ay Dawladdu u leedahay inay dadkeeda u fidiso taageero caafimaad, mid nafsaani iyo mid qaanuunba. Cuqdadda ku xeeran rabshadaha labka iyo dheddigga la xiriira awgeed, ayaa dhibbanayasha rabshadaha labka iyo dheddigga la xiriira, gaara ahaan gabdhaha yaryar iyo haweenku aysan u haysan adeegyada noocaas ah. Dawladduu waxay yaboohaysaa oo soo dhoweynaysaa iskaashiga dhaqaale iyo farsamo ee lammaanaha iyo wadajirka ah ee lagu hagaajinayo helitaanka adeegyadaan aadka loogu baahan yahay.

98.80. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.21,

98.81. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.21,

98.82. Soomaaliya way o**ggolaatay** taladaan.

Eeg 98.21,

98.83. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.54,

98.84. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.54,

98.85. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.54,

98.86. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.54,

98.87. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.54,

98.88. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.54,

98.89. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.54,

98.90. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.54,

98.91. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

15

Eeg 98.54,

98.92. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.54,

98.93. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Carruurta la shaqaaleeyo aad ayay ugu baahsan tahay Soomaaliya. Dawladda waxa ka go'an inay dhaqankaan ciribtirto.

98.94. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Si wax looga qabto abaarta ba'an ee aafeysay ummadda Soomaaliyeed, Dawladdu waxay dhistay Hay'adda Maareynta Musiibooyinka (Disaster Management Agency). Guddiga haya'dda waxaa loo xilsaaray qiimeynta iyo isu0duwidda gargaarka bani'aadamnimo ee ay u baahan yihiin dadka ay abaartu saameysay. Dawladdu waxay kaloo diyaarisay ciidammo ammaan oo ka kooban 300 oo si fiican loo hubeeyay, kuwaasoo iyagoo kaashanaya ciidammada AMISOM, loo xilsaaray inay ilaaliyaan kolonyada baabuurta ee gargaarka sida oo ay sugaan amniga xeryaha barakacayaasha marka gargaarka la qaybinayo. Si kasta ha ahaatee, ciidammada amniga oo hoos taga Wasaaradda Arrimha Guduhu waxay u baahan yihiin baabuur iyo qalab is-gaarsiineed oo casri ah. Haya'daha gargaarka, kuwooda gudaha iyo kuwooda dibadduba, xor ayay u yihiin inay ka shaqeeyaan gargaar bani'aadamnimo ugu fidiyaan dadka ay abaartu saameeysay, goobaha ay Dawladdu gacanta ku heyso. Dawladdu way u oggoshahay in haya'daha gargaarku ay ugu tagaan dadka abaartu saameeysay ee jooga gaabaha aan gacanta Dawladda ku jirin. Dawladda waxaa ka go'an inay sii waddo dadaallada ay ku hagaajineyso xaaladda barkacayaasha oo ay ku sugeyso ammaanka haya'daha gargaarka. Soomaaliya waxay beeshacaalamka u direysaa qaylo-dhaan ay ku weydiisanayso inay sii xoojiyaan gargaarka ay abaaraha kaga jawaabayaan.

98.95. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Dawladda waxaa soo wajahday tiro oo dumar iyo carruur ah oo marba marka ka dambeysa sii badaneysa kuwaasoo ka soo cararaya goobaha ay ka taliyaan Al-shabaab, sababtuna

ay tahay xadgudubka ballaaran ee xuquuqda aadanaha ee halkaas ka dhacaya oo ay ka midka yihiin toogashada degdegta ah iyo dilalka aan xukunka ku saleysnayn, jir-dil iyo ciqaabo kale oo liita oo bani'aadamnimada ka baxsan oo ay ka mid yihiin gacmo/lugo gooyn iyo karbaashid iyo weliba siyaasadda joogtada ah ee Al-shabaab ee ay carruurta ku askareynayso (Eeg tuduca 24 and 83, UPR National Report). Dawladdu waxay sameysay xeryo barakacayaal, waxayna si aad ah ugu dadaaleysaa sidii ay dadkaas adeegyda asaasiga ah ugu fidin laheyd.

98.96. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.94,

Marka laga reebo goobaha ay Al-shabaab ka taliso, marimmada bani'aadamnimadu Soomaaliya waa furan yihiin.

98.97. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.94,

98.98. Soomaaliya way o**ggolaatay** taladaan.

Eeg 98.94,

98.99. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Xeebta Soomaaliyeed ee dhererkeedu yahay 3,333 km, waa xeebta maanta adduunka ugu halista badan, iyadoo burcad-badeednimaduna ay halis dhab ah ku tahay ammaanka iyo badbaadada badmaaxidda biyaha Soomaaliya iyo biyaha caalamiga ah ee ku teedsan xeebaha Soomaaliya.

Golaha Ammaanka ee QM ayaa iyagoo dhibaatadaas iyada ah dareensan soo saaray go'aammo dhawr ah (1864 (2008), 1918 (2010), 1950 (2010) iyo 1976 (2011) oo ay ku sheegeen sida aadka ah ee ay uga welwelsan yihiin halsita sii kordheysa ee burcadbadeednimada iyagoo dhinaca kalena ku adkeystay sida ay muhiimka u tahay xal ballaaran oo waara loo helo burcad-badeednimada iyo boobka hubeysan ee ka dhaca badda ku teedsan xeebaha Soomaaliya.

Dhaqangelinta Qaanuunka ka Hortagga Burcad-badeednimmadu waa mid ka mid ah tallaabooyinka Geeddi-socodka ee mudnaanta koowaad la siinayo. Qaanuunkaani wuxuu saldhig u noqonayaa tallaabooyinka ay dawladdu ku dooneyso inay si degdeg ah wax uga qabato boobka iyo burcad-badeednimada ka jira xeebaha Soomaaliya. Dawladdu waxaa kaloo ka go'an sameynta nidaam wadajir ah oo ay la sameyso maamullada Somaliland iyo Puntland oo looga hortagayo burcad-badeednimada iyo boobka hubeysan ee ka jira xeebaha Soomaaliya sidoo kalena lagu ilaalinayo khayraadka dabiiciga ah ee xeebaha Soomaaliya. Dadaallada lagu xallinayo sababta dhabta ah ee ka dambeysa burcad-badeednimadu waxay u baahan yihiin iskaashi caalami oo heer lammaane ah iyo mid wadajira ahba leh. Soomaaliya waxay arrintaan uga baahan tahay taageero waqtiyeysan oo wax ku ool ah.

98.100. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Madax-furashada ay bixinayaan maraakiibta shisheeyuhu waxay sii dhiirigelisay burcad-badeednommada. Qaanuunka Soomaaliya wuxuu qabaa inay sharci darro tahay in la bixiyo wax madax-furasho ah, nooca ay doonto ha noqotee, qofkii madax-furasho bixiyana danbi ayaa lagu soo oogi karaa. Dawladda Soomaaliya waxay beeshacaalamka u direysaa qaylo-dhaan ay ku weydiisanayso in laga taageero la dagaalanka burcad-badeednimada iyo sababaha keenaba. Soomaaliya waxay codsanaysaa in arrintaan laga siiyo taageero dhaqaale iyo mid farsamo oo dheeraad ah.

98.101. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.1, 98.17,

Dawladda waxaa ka go'an inay dejiso oo isla fal-geliso sharciga casriga ah, kan Islaamka iyo xeer dhaqameedka iyadoo waafajinaysa halbeegyada iyo mabaadii'da xuquuqda aadanaha. Dawladdu waxay buslshada caalamka kala shaqeynaysaa sidii loo xoojin lahaa xeer-ilaalinta dalka. Dadaallada lagu xoojinayo xeer-ilaalinta dalku waxay u baahan yihiin iskaashi caalami oo heer lammaane ah iyo mid wadajir ahba leh.

98.102. Soomaaliya way oggolaatay taladaan.

Dawladda waxaa ka go'an inay xoojiso xeer-ilaalinta dalka si loo soo afjaro dhaqanka soo jireenka ah ee xayn-daabka oo dadka ku xadgudbay xuquuqdaha aadanaha iyo sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimda (IHL) lagula xisaabtamo falalka ay geysteen. Shaqada Guddiga Qaran ee Xuquuqda Aadanaha ayaa saldhig u noqonaysa wax ka qabashada ku xadgudubka ay dhinacyada soomaalida oo dhammi ku sameeyaan xuquuqdaha aadanaha iyo sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimda (IHL). Sidoo kale, Dawladdu waxay ku talojirtaa in marka ay durruftu oggolaato oo baahideedu timaaddo ay sameyso Guddiga Madaxabannaan ee Xogbaarsita Qaranka oo noqon doona Guddi joogto ah oo hawshoodu tahay baaritaanka xadgudbayada halista ah ee loo geysto sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimda (IHL) iyo xuquuqdaha aadanaha. Abuurista Guddigaani wuxuu dawladda u oggolaanaya inay wadashaqayn dhow la yeelato beesha caalamka oo ay codsato taageero dhaqaale iyo mid farsamoba.

Si kastase ha ahaatee, qaab-dhismeed kaligiis ahi si haboon wax ugama qaban karo xadgudbayadii horay loogu geystay xuquuqdaha aadanaha iyo sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimda (IHL) ee Soomaaliya. (Eeg tuduca 86-89, UPR National Report). Waxaa loo baahan yahay xal ballaaran oo dhinacyo badan daboolaya oo ay ku jiraan, aanse ku ekayn, sharciga danbiyada. Dawladdu iyadoo kaashaneysa Somaliland iyo Puntland, ayay wadatashiyo la sameynaysaa dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada oo ay ku jiraan dadka nool ee dhibaatadu ka soo gaartay dagaalladii dalka ka dhacay iyadoo ujeeddadu tahay sidii horay loogu sii tallaabsan lahaa.

98.103. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.102,

98.104. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.102,

98.105. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.102,

98.106. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.102,

98.107. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.102, 98,112, 98.111, 98.113, 98.142,

98.108. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.73,

98.109. Soomaaliya way o**ggolaatay** taladaan.

Eeg 98.70, 98.102,

98.110. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.70, 98.102,

98.111. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Sidii ay Dawladdu ka caddeeysay kalfadhigii 11aad ee Guddi Hawleedka UPR, lama cafiyi doono danbiyada dagaalka, danbiyada baniaadamnimada ka dhanka ah iyo xadgudubyada laga galay sharciyada iyo xeerarka dagaalka.

98.112. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.111,

98.113. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Eeg 98.111,

98.114. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

Dawladda waxaa ka go'an inay dadweynaha ku wacyigeliso xuquuqda aadanaha.

(Tuduca 72, UPR National Report). Sida warbixinta lagu sheegay, dawladda waxaa waajib ka saaran yahay "ixtiraamka iyo xaqiijinta ixtiraamka" sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimda (Eeg tuduca 79, UPR National Report). Falgelinta xuquuqdaha aadanaha iyo sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimda lala falgelinayo barnaamijyada tababarrada heer kasta ah ee la siinayo ciidammada qalabka sida iyo kuwa ammaanku, sidii loogu talogalay

ayay u socotaa. Wasaaradda Gaashaandhigga ayaa dhowaan dhaqangelin doonta sharciga bani'aadamnimada oo dhammeystiran iyo nidaam tababar oo la xiriirta xuquuqda aadanaha.

Dhinaca xoogagga AMISOM, UNSOA ayaa shaqaaleysay la-taliyayaal AMISOM kala taliya arrimaha ay ka midka yihiin dhammaan sharciyada caalamiga ah ee bani'aadamnimda iyo xuquuqda aadanaha gaar ahaan ilaalinta dadka rayidka ah iyo inay AMISOM ka caawiyaan tababarrada la xiriira sharciyada caalamiga ah ee bani'aadamnimda iyo xuquuqda aadanaha

98.115. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.114,

98.116. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.114,

98.117. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.1, 98.33,

98.118. Soomaaliya **qayb ahaan** ayay taladaan **oggolaatay.**
Soomaaliya waxay ku gudojirtaa daraasadda iyo fahamka xeerarka dhowaan la dhaqangeliyay ee loo yaqaan Xeerarka Bangkok (Bangkok Rules), ee la xiriira sida loola dhaqmayo dumarka maxaabiista ah iyo tallaabooyinka aan maxkamadda gaarsiisneyn ee dumarka xad-gudubyada sameeya. Sidaa awgeed Soomaaliya ma joogto heer ay ku oggolaato Xeerarka Bangkok (Bangkok Rules). Si kastase ha ahaatee, marka la fiiriyo tixgelinta ay Dawladdu siineyso xaaladaha haweenka,waxay go'aansatay inay inay bilowdo dood laga yeesho taladaan oo la siiyo tixgelinta ay taladaani mudan tahay.

Soomaaliya waxay UNODC kala shaqeysaa dinaca sixidda arrintaan, wayna soo dhowenaysaa wixii iskaashi lammaane iyo mid wadajireed ah oo arrintaan ku saabsan.

98.119. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg, 98.70,

98. 120. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.70,

98. 121. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.70,

98. 122. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.70,

98. 123. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.70,

98. 124. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.70,

98. 125. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.70,

98. 126. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.70,

98. 127. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.70,

98. 128. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.70,

98. 129. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Haweenku weligood waxay kaalin weyn ka ciyaari jireen nabadeynta iyo furdaaminta ismari-waaga bulshada Soomaaliyeed. Dawladdu way aqoonsan tahay muhimadda ay leedahay in la kordhiyo ka qaybgelinta haweenka arrimaha la xiriira furdaaminta ismari-waaga, nabadeynta iyo weliba go'aan gaarista marka colaaduhu dhammaadaan. Sida uu dhigayo Qabyo-qoraalka Dastuurku, haweeku waa inay qayb ka noqdaan dhammaan haya'daha qaranka, si gaar ah waa inay ugu jiraan dhammaan saddexda laamood ee haya'adaha dawladda ee madaxabannaan kuwooda la doorto iyo kuwa la magacaaboba. Dawladdu mar hore ayay ku dhaqaaqday hirgelinta qaybta haweenka uga soo aadday haya'daha ay ka midka yihiin Guddiga diyaarinta iyo dhaqangelinta Qabyo-qoraalka Dastuurka, Guddiga dhismaha Baarlamaanka cusub ee Federaalka, Guddiga Doorshooyinka ee Madaxabannaan ku Meelgaarka ah, Guddiga la Dagaallanka Musuqmaasuqa ee Madaxabannaan ku Meelgaarka ah ee hoos yimaada Geeddi-socodka lagu soo afjarayo xaaladda ku Meelgaarka ka hor inta aan la gaarin 20ka August 2012.

Soomaaliya iyadaa iskeed u go'aansatay inay ansixiso CEDAW. Soomaaliya way ka go'antahay inay kor u soo qaaddo ka mid ahaanshaha haweenku ay ka mid ahaanayaan dhammaan heerarka go'aan ka gaarista furdaaminta ismari-waaga iyo nabadeynta bulshada sida uu dalbanayo Go'aanka 1325 ee Golaha Ammaanka ee Qarammada Midoobay.

98. 130. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.51,

98. 131. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.51,

98. 132. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98, 21, 98.38, 98.61, 98.95, 98.70, 98.81, 98.52,

98. 133. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.38, 98.61,

98. 134. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.38, 98.61,

98. 135. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.3, 98.61,

Ka hor intii aan Dawladdu Soomaaliya dhicin sannadkii 1991, carruurta da'doodu u dheseyso lix ilaa saddex iyo toban sano waxbarashadu khasab ayay ku ahayd lacagna lagama qaadi jirin. Wixii intaa ka dambeeyay, dhammaan iskuulladii magaalada Muqdisho iyo dalka intiisa badanba waa la burburiyay, kaabadihii iyo qalabkii waxbarashadana waa la bililiqeystay. Dawladda waxaa ka go'an inay dib u soo nooleyso oo kor u qaaddo dhammaan heerarkii waxbarashada ee jiray oo ay ilmo iyo muwaaddin kastaba siiso fursad loo siman yahay oo waxbarasho hoose/dhexe oo khasab ah lacagna aan laga rabin. Waxaan rabnaa inaan waddada u jeexno waa cusub oo waxbarashada Soomaaliya ah oo aan waxbarasho degdeg ah oo khasab iyo lacag la'aan ah siinno carruurta ku jira xeryaha barakacayaasha. Soomaaliya waxay taageero dhaqaale iyo mid farsamo oo arrintaan la xirrirta uga baahan tahay Dawladaha kale ee beeshacaalamka xubnaha ka ah.

98. 136. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.61, 98.135,

98. 137. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.61, 98.135,

98. 138. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.61, 98.135,

98. 139. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.61, 98.135,

98.140. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.94,

98.141. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.94,

98.142. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.94,

98.143. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.17,

98.144. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.

98.145. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.17,

98.146. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.17,

98.147. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.17,

98.148. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.17,

98.149. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.17,

98.150. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.17,

98.151. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.17,

Karti bilidda waaxda xeer ilaalintu waa mudnaanta koowaad ee Dawladda Soomaaliya.
98. 152. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.17,

98. 153. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.17,

98. 153. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg, 98.1, 98.4, 98.17, 98.38, 98.59, 98.101, 98.151, 98.94,

98. 154. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.17,

98. 155. Soomaaliya way **oggolaatay** taladaan.
Eeg 98.17,

# Go’aanka

## I. GOLAHA XUQUUQDA AADANAHA

**Go’aanka 7/35. Ka taageeridda Soomaaliya dhinaca xuquuqda aadanaha**

*Golaha Xuquuqda aadanuhu iyagoo*,

*Raacaya* Gogoldhigga Qarammada Midoobay iyo Baaqa Callamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha, Gogoldhigga Xuquuqda Aadanaha iyo Dadweynaha ee Afrika iyo heshiisyada la halmaala ee xuquuqda aadanaha,
*Dib u eegaya* dhammaan go’aammadii hore ee Ergada Xuquuqda Aadanaha, oo kii ugu dambeeyay uu ahaa go’aankii 2005/83 of 21 ee soo baxay April 2005,

*Soo dhoweynaya* dhiirranaanta iyo dadaallada ay muujiyeen Midowga Afrika si ay u taageeraan dadaallada Soomaalidu hoggaamineyso ee lagu raadinayo dib-u-heshiisiinta iyo xasilloonida iyo dadaallada ay beesha caalamka iyo daneeyayaasha gobalkuba ay Somaaliya uga gargaarayaan sidii ay nabad, xasillooni iyo ammaan buuxa ugu soo dabbaali lahayd geyigeeda qaran,

*Sidoo kale Soo dhoweynaya* baaqii laga soo saaray xaaladda Soomaaliya ee ay ku qaateen Madaxda Dawladaha iyo Xukuumadaha Midowga Afrika kalfadhigii caadiga ahaa ee tobnaad ee Jamciyadda Midowga Afrika ee lagu qabtay Addis Ababa intii u dhexeysay 31 January ilaa 2 February 2008,

*Xoojinaya* in baaqa kor lagu sheegay ee ay qaateen Jamciyadda Midowga Afrika, uu carrabka ku adkeeyay sida loogu baahan yahay in Soomaaliya laga hawlgeliyo ciidammo nabad ilaalin ah oo Qarammada Midoobay ah, kuwaasoo la wareegi doona Halwgallada Midowga Afrika ee Soomaaliya oo gacan ka geysan doona xasillooni waarta iyo dib-u-dhis dalka lagu sameeyo marka dagaalku dhammmaado,

*Ku celcelinaya* in gargaarka bani’aadamnimada, xuquuqda aadanaha iyo gacan ka geysashada horumarku ay laf-dhabar u yihiin hoos u dhigidda saboolnimada iyo taabbagelinta bulsho Soomaaliyaeed oo nabad, caddaalad iyo dimuqraadiyad ku naalloota,

*Soo dhoweynaya* tallaabooyinka Soomaaliya gudeheeda laga qaaday oo ay ka mid yihiin qabsoomidda Shirweynaha Dib-u-heshiisiinta Qaran ee la qabtay July iyo August 2007, magacaabistii dhowaan la magacaabay Ra’iisalwasaaraha cusub, Nur Hassan Hussein, iyo dhisiddii xukuumaddii cusbeyd ee taas ku xigtay, iyo weliba dadaallada ay muujiyeen Midowga Afrika iyagoo adeegsanaya Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya,

*Ku celcelinaya* in, inkastoo caqabado waaweyni ay hor taagan yihiin hawlaha nabadeynta iyo dib-u-heshiisiinta, ayaa haddana fursadi soo iftiintay bishii December 2006, markii Dawladda Federaalka ku Meelgaarka ahi ay la wareegtay Muqdisho iyo qaybo kale dalka ah si xal waara loogu helo dhibaatada Soomaaliya,

*Carrabka ku adkeynaya* baahida loo qabo in daneeyayaasha arrimaha Soomaaliya iyo beesha caalamkuba ay ay fursadaan ka faaiideystaan oo ay si dhiirranaani ku jirto u xalliyaan colaadaha Soomaaliya iyagoo qaadaya tallaabo kasta oo yoolkaan lagu gaari karo,

*Si fog uga walaacsan* xaaladda xuquuqda aadanaha iyo tan bani'aadamnimo ee Soomaaliya,

*Si welwel ku jiro u dareensan* in xaaladda ammaan ee dalka oo dhammi aysan cago adag ku taagneyn,

*Adkeynaya* in dadaallada looga hor tegayo argagixisada Soomaaliya gudeheeda ay tahay inay xaqdhowraan sharciyada caalamiga ah, oo ay ku jiraan xuquuqda aadanaha iyo xuquuqaha asaasiga ah, kuwaasoo aan marna looga maarmi karin nabad ku soo dabbaalidda Soomaaliya,

*Maskaxda ku haya* tuduca 6aad ee go'aanka Jamciyadda Guud ee 60/251 ee soo baxay 15March 2006

*Dib u eegaya* go'aannadii Golaha ee 5/1 ee la xiriiray dhisidda haya'daha oo ka soo baxay Golaha Xuquuqda Aadanaha ee Qarammada Midoobay iyo 5/2 ee ku saabsanaa astaamaha anshaxa ee xil qaadayaasha dacwooyinka gaarka ah oo Golaha Xuquuqda Aadanaha ka soo baxay 18 June 2007, oo adkeynaya in xil qaaduhu uu/ay xilkiisa/eeda u gutaan sida ay dhigayaan go'aannadaas iyo lifaaqyada ku lammaan,

1. *Waxay muujinayaan walaaca ballaaran ee ay ka qabaan* xaaladda xuquuqda aadanaha iyo tan bani'aadamnimo ee Soomaaliya, waxayna ku baaqayaan in si degdeg ah loo soo afjaro xadgudubyada jira oo dhan;

2. *Waxay* *weydiisanayaan* dhammaan dhinacyada Soomaaliya inay diidaan oo joojiyaan dhammaan falalka rabshadaha, ay ka waantoobaan ka shaqeynta colaadaha, ka hor tagaan fal kasta oo laga yaabo inuu xiisad kiciyo oo ay si buuxda u xaqdhowaraan waajibaadka ka saaran sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanahan iyo sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada;

3. *Waxay ku guubaabinayaan* dhammaan dhinacyada Soomaaliya inay qabsadaan mabaadii'da iyo ruuxa ku dheehan Gogoldhigga Federaalka ku Meelgaarka oo ay ka shaqeeyaan dib-u-heshiisiin qaran oo dhab ah oo qaab-hawleedkaan gudihiisa ah ayna ku jiraan in, sida uu Gogoldhiggu dhigayo sannadka 2009, la qabto doorasho qaran oo hufan oo xisbiyo badani ka qaybgalaan;

4. *Waxay ugu baaqayaan* beesha caalamka inay garab istaagaan haya'daha Soomaaliyeed ee sharciyeysan oo ay u fidiyaan taageero haboon, waqtigeedana timaadda oo wax ku ool ah, si kartidooda loo bilo, taasoo qayb ka ah xal isku-dhafan oo koobaya dhinacyada siyaasadda, amniga iyo barnaamijyada;

5. *Waxay u qaylo-dhaaminayaan* hawlwadaagyada Midowga Afrika inay Halwgallada Midowga Afrika ee Soomaaliya u fidiyaan taageero saad iyo mid dhaqaale, gaar ahaan marka loo fiiriyo in hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya gudeheedu yahay mid ay ku matalayaan guud ahaan beesha caalamka oo dhan;

6. *Waxay ku guubaabinayaan* beesha caalamka inay si degdeg ah Soomaaliya ugu fidiyaan kaalmo horumarineed si ay gacan uga geystaan dib-u-dhiska Soomaaliya, soo nooleynta haya'daheeda iyo taageero farsamo oo dhinaca xuquuqda aadanaha ah;

7. *Waxay kaloo ku guubaabinayaan* beesha caalamka inay gargaar bani'aadamnimo u fidiyaan dadka dhibaateysan oo ay xaqiijiyaan in la qaaday tallaabo kasta oo lagu abuurayo xaalad horseedeysa in mucaawimo ban'aadamnimo la fidiyo, oo ay ku jiraan in aan la is hortaagin gargaarka dadka dhibaateysan oo la dammaanad qaado ammaanka hawlwadeennada iyo haya'daha gargaarka;

8. *Waxay garowsadeen* hawsha uu xeeldheeraha madaxabannaan ka qabtay xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya, oo ay ka mid tahay warbixintiisa xilliga hadda lagu jiro;

9. *Waxay go'aansadeen* inay muddo hal sano u cusboonaysiiyaan xilka xeeldheeraha madaxabannaan, iyadoo ujeeddadu tahay kordhinta taageerada farsamo ee Soomaaliya laga siinayo dhinaca xuquuqda aadanaha, iyadoo xeeldheeraha laga codsaday inuu warbixin u soo gudbiyo kalfadhiga Golaha ee dhacaya September 2008 iyo March 2009;

10. *Waxay ka codsanayaan* Xoghayaha Guud inuu u fidiyo xeeldheeraha madaxabannaan dhammaan taageerada shaqaale, farsamo iyo dhaqaale ee uu u baahn yahay si uu xilkiisa u guto;

11. *Waxay ka codsanayaan* Xafiiska Ergayga Sare ee Qarammada Midoobay u qaabilsan Xuquuqda Aadanuhu inay xoojiyaan joogitaankooda Soomaaliya si haya'daha Soomaaliyeed ee arrimahaani ku lugta leh ay ugu fidiyaan taageer farsamo iyo adeegyo talo-bixin;

12. *Waxay ugu yeerayaan* haya'daha Qarammada Midoobay ee arrimahaani khuseeyaan inay Soomaaliya u fidiyaan gargaar iyo taageero farsamo oo dhinaca xuquuqda aadanaha la xiriirta.

*Kulanka 42aad*

*28 March 2008*

Cod la'aan ayaa la qaatay.

# II. GOLAHA XUQUUQDA AADANAHA

**Kalfadhiga tobnaad**

**Go'aanka 10/32. Ka taageeridda Soomaaliya dhinaca xuquuqda aadanaha**

*Golaha Xuquuqda aadanuhu iyagoo*,

*Raacaya* Gogoldhigga Qarammada Midoobay iyo Baaqa Callamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha,

*Dib u eegaya* go'aankoodii 7/35 ee 28 March 2008,

*Dib u adkeynaya* xaqdhowrka dawladnimada, dhowrsanaanta xudduudda, madaxbannaanida siyaasadeed iyo midnimada Soomaaliya,

*Soo dhoweynaya* horumarkii siyaasadeed iyo horusocodkii laga sameeyay gudaha Soomaaliya ee la xiriiray hawlihii nabadeynta Djibouti, oo ay ku jiraan is casilaaddii uu iskiis u doortay ee Madaxweyne Abdullahi Yusuf Ahmed uu is casilay 29kii December 2008, 10 bilood ka hor dhammaadka xilligiisii, fadhigii Baarlammaanka Federaalka ku Meelgaarku uu ku yeeshay Djibouti, doorashadii Madaxweyne Shaikh Sharif Sheik Ahmed ee 30kii January 2009, oggolaanshihii Baarlammaanku uu oggolaaday Ra'iisalwasaare Omar Abdirashid Ali Sharmarke 14kii February 2009 iyo dhisiddii xukuumaddii cusbeyd ee taas ku xigtay,

*Dib u eegaya* go'aannadoodii 5/1 ee la xiriiray dhisidda haya'daha oo ka soo baxay Golaha Xuquuqda Aadanaha ee Qarammada Midoobay iyo 5/2 ee ku saabsanaa astaamaha anshaxa ee xil qaadayaasha dacwooyinka gaarka ah oo golaha ka soo baxay 18 June 2007,

*Soo dhoweynaya* dhiirranaanta iyo dadaallada ay muujiyeen Midowga Afrika si ay u taageeraan dadaallada Soomaalidu hoggaamineyso ee lagu raadinayo dib-u-heshiisiinta iyo xasilloonida iyo dadaallada ay beesha caalamka iyo daneeyayaasha gobalkuba ay Somaaliya uga gargaarayaan sidii ay nabad, xasillooni iyo ammaan buuxa ugu soo dabbaali lahayd geyigeeda qaran iyo weliba kordhinta dhowaan saddexda bilood lagu kordhiyay xilka Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya,

*Dib ugu celinaya* in gargaarka bani'aadamnimo, kan xuquuqda aadanaha iyo kan horumarineedba ay lamahuraan u yihiin hoos u dhigidda saboolnimada iyo taabbagelinta bulsho Soomaaliyeed oo nabadgelyo, caddaalad iyo dimuqraadiyad ku naalloota,

1. Waxay *walaac xooggan ka muujinayaan* xaaladda xuquuqda aadanaha iyo tan bani'aadamnimo ee Soomaaliya, waxayna ku baaqayaan in si degdeg ah loo soo afjaro xadgudubyada jira oo dhan;

2. *Waxay iyagoo ugu bogaadinaya il gaar ah ku eegi doonaan* hawlaha uu qabtay xeeldheeraha madaxabannaan ee xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya iyo warbixintiisii (A/HRC/10/85);

3. *Waxayna ugu yeerayaan* xeeldheeraha madaxabannaa inuu hawshiisa sii wato ilaa dhammaadka bisha September 2009, isagoo aan xukunkiisa ku saleynayn qodobka hawshiisa la xiriira ee go'aanka Golaha 5/1;

4. *Waxayna ku dhiirrigelinayaan* Xafiiska Ergayga Sare ee Qarammada Midoobay u qaabilsan Xuquuqda Aadanuhu inay mas'uuliyiinta Soomaaliyeed la gaaraan heshiis ballaaran oo ku saabsan iskaashiga farsamo iyo karti bilidda dadweynaha iyo haya'daha heer qaran iyo heer gobol ee dhinaca xuquuqda aadanaha Soomaaliya oo ay ku jiraan waaxda xeer dejinta, xeer ilaalinta, haya'daha sharci fulinta iyo waxbarashada iyo weliba in ololayaal wacyigelin dadweyne ah loo sameeyo, iyadoo lagu soconayo kala hormarinta iyo qaab-hawleedka ay diyaaariyeen saraakiisha Soomaaliyeed oo ay ka mid tahay abuurista xaaladda ugu haboon ee uu xeeldheeraha madaxabannaani ku shaqeyn karo si xilkiisa mar kale loogu sii cusbooneysiiyo;

5. *Waxay ugu baaqayaan* beesha caalamka inay garab istaagaan haya'daha Soomaaliyeed ee sharciyeysan oo ay u fidiyaan taageero haboon, waqtigeedana timaadda oo wax ku ool ah, si kartidooda loo bilo, taasoo qayb ka ah xal isku-dhafan oo koobaya dhinacyada siyaasadda, amniga iyo xuquuqda aadanaha;

6. *Waxay ka codsanayaan* Xoghayaha Guud inuu u fidiyo xeeldheeraha madaxabannaan dhammaan taageerada dhaqaale, farsamo iyo dhaqaale ee uu u baahn yahay si uu xilkiisa u guto;

7. *Waxay ka codsanayaan* xeeldheeraha madaxabannaan inuu kalfadhiga labo iyo tobnaad ee Golaha u soo gudbiyo heerka ay warbixintiisu mareyso;

8. *Waxay go'aamiyeen* in arrinta ay iyagu la wareegaan.

*Kulanka 45aad*

*27 March 2009*

## III. GOLAHA XUQUUQDA AADANAHA

**Taageerada farsamada iyo karti bilidda**

**12/26. Ka taageeridda Soomaaliya dhinaca xuquuqda aadanaha**

A/HRC/RES/12/26

Kalfadhiga labo iyo tobnaad

Arrinta miiska saaran 10

12 October 2009

*Golaha Xuquuqda aadanuhu iyagoo*,

*Raacaya* Gogoldhigga Qarammada Midoobay iyo Baaqa Callamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha,

*Garowsan* in nabadda iyo ammaanka, horumarka iyo xuquuqda aadanuhu ay yihiin tiirarka nidaamka Qarammada Midoobay,

*Dib u adkeynaya* xaqdhowrka madaxbannaanida iyo dhowrsanaanta xudduudda Soomaaliya,

*Dib u eegaya* go'aammadoodii hore ee la xiriiray xaaladda xuquuqda xadanaha ee Soomaaliya, gaar ahaan go'aanka 10/32 ee 27 March 2009,

*Mar kale dib u eegaya* go'aannadoodii 5/1 iyo 5/2 ee 18 June 2007,

*Xoojinaya* warmurtiyeedkii kulankii 190aad ee Golaha Nabadda iyo Ammaanka ee Midowga Afrika ee dhacay 22 May 2009, oo lagu dhaleecaynayay weerarrada is dabajoogga ah ee lagu hayo Dawladda iyo rayidka jooga Muqdisho iyo goobaha kale ee dalka, weerarradaas oo ay geysanayaan kooxaha hubeysan iyo xubno shisheeye ah oo ujeeddadoodu tahay inay wiiqaan hawlaha nabadda iyo dib-u-heshiisiinta,

*Soo dhoweynaya* natiijadii shirkii ballanqaadka ee lagu qabtay Brussels, 22 iyo 23 April 2009, kaasoo calaamad u ah dib-u-cusboonaysiin ay beesha caalamku ku sameysay taageeradii ay u heysay ku soo dabbaalidda Soomaaliya xasillooni waarta iyo diyaarinta dib-u-dhiska dalka marka colaaduhu dhammaadaan, arrintaasoo ka turjumeysa mid ka mid ah baaqii Golaha Midowga Yurub ee la soo saaray 27 July 2009,

*Mar kale soo dhoweynaya* kaalinta ay ciyaareen Kooxda Xiriirka Caalamiga ee Soomaaliya,

*Xoojinaya* baahida loo qabo wadatashi joogto ah oo dhexmara beesha caalamka si loo hormariyo bulsho-dhaqaalaha dalka oo xasillooni loogu soo dabbaalo siyaasadda Soomaaliya,

*Ku celcelinaya* in gargaarka bani'aadamnimo, kan xuquuqda aadanaha iyo kan horumarineedba ay lamahuraan u yihiin hoos u dhigidda saboolnimada iyo taabbagelinta bulsho Soomaaliyeed oo nabadgelyo, caddaalad iyo dimuqraadiyad ku naalloota,

*Ku qancay* in xaaladda ba'an ee xuquuqda aadanaha iyo tan bani'aadamnimo ee Soomaliya ay u u baahan yihiin wax ka qabasho heer qaran ah oo degdeg ah lana taaban karo, iyadoo beesha caalamkana laga sugayo taageero u dhiganta musiibadda dhacday, aya haddana muujinayaan taageerada ay u hayaan dadaallada Dawladda Federaalka ku Meelgaarka ahi ay kor ugu qaadeyso xaqdhowrka xuquuqda aadanaha iyo sharciyada caalamiga ah ee bani'aadamnimada iyadoo adeegsanaysa qaanuun dejin, xeer fulin iyo tallaabooyin ay ku ilaalinayso dadka aryidka ah,

*Soo dhoweynaya* tallaabooyinka ay qaadday Dawladda Federaalka ku Meelgaarka ahi ay ku xaqiijineyso in cid kasta lagu soo daro wadahadalka siyaasadeed, taasoo si cad uga muuqata

dadaalka ay ugu jirto inay u gacan haadiso kooxaha ilaa hadda bannaanka ka jooga wadahadallada nabadda iyo sida ay uga shaqeynayso in la helo nidaam siyaasadeed oo sal-ballaaran oo ay horseed u yihiin xaqdhowrka xuquuqda aadanaha iyo sharciyada caalamiga ah ee bani'aadamnimada,

*Mar kale soo dhoweynaya* go'aankla ay Dawladda Federaalka ku Meelgaarku ku magacowday barta-kulan ee xuquuqda aadanaha ee looga golleeyahay gogoldhigga ergada qaran ee xuquuqda aadanaha oo hawshoodu tahay fayodhowrka dhammaan xuquuqaha aadanaha ee Soomaaliya, dejinta Dastuur cusub oo Puntland yeelato oo lagu abuurayo haya'd madaxbannaan oo xuquuqda aadanaha ah; iyo weliba dastuurro goboleedyo sida Somaliland and Puntland, kuwaasoo ah tallaabooyin wanaagsan oo loo qaaday dhinaca wanaajinta xuquuqda aadanaha ee aagaggaas,

*Si walaac ku jiro u xusuusan* in xaaladda ammaan aysan cago adag ku taagnayn, gaar ahaan gobollada koonfureed iyo kuwa bartamaha Soomaaliya,

*Muujinaya* sida adag ee ay u dhaleecaynayaan weerarkii foosha xumaa ee argagixiso ee loo geystay nabad ilaaliyayaasha Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya iyo ciidammada ammaanka ee Dawladda Federaalka ku Meelgaarka 17kii September 2009, ayay tacsi u dirayaan qoysaskii dadkii ku waxyeelloobay iyo dawladaha Uganda, Burundi iyo Soomaaliya iyo weliba Midowga Afrika,

*Si walaac ku jiro u xusuusan* halista joogtada ah ee burcad-badeednimmada, taasoo raad xun ku reebtay gurmadka bani'aadamnimo iyo ammaanka marimmada badaha caalamiga ah, ayay adkeynayaan baahida loo qabo wax laga qabto sababta dhabta ah ee keentay burcad-badeednimada iyadoo arrintaas wax looga qabanayo in Soomaaliya loo helo xal ballaaran oo horumar iyo xasillooni lagu gaarsiinayo,

*Si weyn ula amankaagsan* xaaladda ka sii dareysa ee qaxootiga iyo barakacayaasha iyo weliba tahriibinta dadka,

1. *Waxay soo dhoweynayaan* dhiirranaanta iyo dadaallada joogtada ah oo ay muujiyeen Midowga Afrika si ay u taageeraan dadaallada Soomaalidu hoggaamineyso ee ay nabad, xasillooni iyo ammaan ugu raadinayaan geyigooda qaran, sida lagu caddeeyay warmurtiyeedkii ka soo baxay kalfadhigii 190aad ee Golaha Nabadda iyo Ammaanka oo dhacay 22 May 2009, iyo weliba go'aankii Jamciyadda ee 3 July 2009 (AU/Dec.252/XIII, para. 16), waxayna ugu yeerayaan urur goboleedyada kale ee Soomaaliya ay Xubin Dawladeed ka tahay iyo qarammada Midoobay iyo beesha caalamkuba inay kaalin firfircoon ka qaataan dadaallada socda ee dalka lagu xasilanayo;

2. *Waxay muujinayaan* walaaca ballaaran ee ay ka qabaan xaaladda xuquuqda aadanaha iyo tan bani'aadamnimo ee Soomaaliya, waxayna ku baaqayaan in si degdeg ah loo soo afjaro xadgudubyada jira oo dhan;

3. *Waxay sidoo kale muujinayaan* walaaca ballaaran ee ay ka qabaan weerarrada joogtada ah ee lagu hayo weriyayaasha, dadka u dhaqadhaqaaqa bulshada rayidka ah iyo hawlwadeennada gargaarka bani'aadamnimada, waxayna dhinacyada is haya oo dhan ugu baaqayaan inay furaan

marimmo aan wax xannibaad ah lahayn oo loo maro rayidka iyo dadka kale ee aan dagaalka ku jirin, gaar ahaan carruurta iyo haweenka gargaarka bani'aadamnimo u baahan;

4. *Waxay kaloo muujinayaan* walaaca ballaaran ee ay ka qabaan xaaladda ka sii dareysa ee xuquuqda aadanaha iyo tan bani'aadamnimo, iyo weliba si gaar ah wararka sheegaya weerarrada aan loo meel dayin ee lagula kacayo dadka rayidka ah iyo falalka sharci darrada ah ee ay kooxaha hubeysani sameynayaan sida caga-jugleynta, afduubashada, toogashada degdegga ah carruurta jajuubka lagu qoranayo ee ka dhacda meelo cayiman oo dalka ah;

5. *Waxay muujinayaan* walaaca ballaaran ee ay ka qabaan xaaladda murugada leh ee ay ku jiraan dadka barakacayaasha ah iyo kuwa qaxootiga ah iyo barakaca xoogga leh ee ka dhashay colaadda jirta iyo xadgudubyada loo geysanayo xuquuqda aadanaha iyo sharciyada caalamiga ah ee bani'aadamnimada;

6. *Waxay ku guubaabinayaan* dhinacyada is haya oo dhammi inay ka waantoobaan dhammaan falalka rabshadaha ee lagu waxyeelleynayo dadka rayidka ah oo ay si firfircoon uga hortagaan ku xadgudubka xuquuqda aadanaha, oo ay ka mid tahay ku xadgudbidda xuquuqda dadka ka soo jeeda urur bulsheed gaar ah iyo kuwa laga tirada badan yahay ee Soomaaliya ku nool;

7. *Waxay carrabka ku adkeynayaan* baahida loo qabo barnaamijyada taageerada farsamo iyo karti bilidda haya'deed ee dalka gudihiisa sida ay Dawladda Federaalka ku Meelgaarku u dejiso ee heer qaran iyo heer gobolba, ayna ku jiraan barnaamijyadii lagu sheegay go'aanka golaha ee

10/32, ee lagu taageerayay dadaallada ay Soomaalidu hoggaamineyso ee lagu raadinayo habka ugu fiican ee looga hortagayo loolana xisaabtamayo xadgudubyada xuquuqda aadanaha ka dhanka ah;

8. *Waxay ugu baaqayaan* Dawladda Federaalka ku Meelgaarka inay gudato waajibadka ka saaran sharciyada caalamiga ah ee bani'aadamnimada iyo xuquuqda aadanaha iyo inay fuliso qodobbada la xiriira xuquuqda aadanaha eek u jira Gogoldhigga Federaalka ku Meelgaarka ah;

9. *Waxay soo dhoweynayaan* hawsha uu xeeldheeraha madaxabannaan ka qabtay xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya iyo warbixintiisa;

10. *Waxay go'aansadeen* inay muddo hal sano u cusboonaysiiyaan xilka xeeldheeraha madaxabannaan, iyadoo ujeeddadu tahay kordhinta taageerada farsamo ee Soomaaliya laga siinayo dhinaca xuquuqda aadanaha si loo gacan qabto dadaallada ay Dawladda Federaalka ku Meelgaarka iyo madaxda gobolladeedu ugu jiraan xaqdhowrka xuquuqda aadanaha iyo xoojinta nidaamka xuquuqda aadanaha iyo dadaalka ay ugu jirto dhammeystirka hawlihii ka haray ballanqaadyadii xilliga kala-guurka, waxayna xeeldheeraha madaxabannaan ka codsanayaan inuu kalfadhiga Golaha ee saddex iyo tobnaad iyo shan iyo tobnaad u soo gudbiyo warbixin uu kaga hadlayo xaaladda xuquuqda aadanaha iyo heerka ay mareyso hirgelinta iskaashiga farsamo ee gudaha Soomaaliya;

11. *Waxay ugu yeerayaan* xeeldheeraha madaxabannaan inuu xoogga saaro gudashada xilkiisa, si gaar hana uu ugu dadaalo arrimaha ay ka midka yihiin karti bilidda wax ku oolka ah, isku-dhafka xeerarka, barnaamij haboon oo wax looga qabto xayndaabka iyo in hawlwadeennada laamaha ammaanka Soomaaliya lagu tababaro halbeegyada xuquuqda aadanaha caalamiga ah, sidoo kale inuu si hoose ula socdo dhammaan xuquuqaha aadanaha ee ay ka midka yihiin xuquuqaha dhaqaale, bulsho iyo dhaqan, xaqa helista cunto haboon, xaqa ku noolaanshaha heerka ugu sarreeya ee caafimaadka jirka iyo maskaxda ee la heli karo iyo xaqa waxbarashada;

12. *Waxay ka codsanayaan* xil-qaadayaasha barnaamijyada xiriirka la leh warbixinta gaarka ah ee Golaha inay xeeldheeraha madaxabannaan kala shaqeeyaan sidii loo ururin lahaa loona cusboonaysiin lahaa macluumaadka la isku halleyn karo ee u saabsan xuquuqda aadanaha Soomaaliya;

13. *Waxay ka codsanayaan* Xoghayaha Guud inuu u fidiyo xeeldheeraha madaxabannaan dhammaan taageerada dhaqaale, farsamo iyo dhaqaale ee uu u baahn yahay si uu xilkiisa u guto;

14. *Waxay go'aamiyeen* in arrinta ay iyagu la wareegaan.

*Kulanka 32aad*

*2 October 2009*

## IV. GOLAHA XUQUUQDA AADANAHA

**A/HRC/DEC/14/119**

**Kalfadhiga afar iyo tobnaad**

**14/119. Ka taageeridda Soomaaliya dhinaca xuquuqda aadanah**

Arrinta miiska saaran 10

Kulankoodii 36aad ee 18 18 June 2010, ayay Golaha Xuquuqda Aadanuhu go'aansadeen inay qaataan qoraalka soo socda:

*Golaha Xuquuqda Aadanuhu iyagoo*,

*Dib u eegaya* go'ankoodii 12/26 of 2 October 2009 ee cinwaankiisu ahaa "Ka taageeridda Soomaaliya dhinaca xuquuqda aadanaha",

*Soo dhoweynaya* magacaabista uu dhowaan Xoghayaha Guud magacaabay Wakiilkiisa Gaarka ah ee Soomaaliya,

1. *Waxay ku baaqayaan* in wadahadalka fool-ka-foolka ah ee xeeldheeraha madaxabannaan lagala yeelanayo xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya la qorsheeyay in lagu dhex qabto kalfadhigooda shan iyo tobnaad;

2. *Go'aamiyeen* in kulankooda shan iyo tobnaad lagu dhex qabto wadahadal gooni ah oo fool-ka-fool ah oo ay ka qaybgalayaan Ergayga Sare ee Qarammada Midoobay u qaabilsan Xuquuqda Aadanaha, Xeeldheeraha Madaxabannaan ee xaaladda xuquuqda aadanaha Soomaaliya iyo wakiilka Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Soomaaliya, loogana hadlayo xaaladaha iskaashiga farsamo, barnaamijyada karti bilidda ee dalka gudihiisa iyo tallabooyin wax ku ool ah oo lagu hagaajinayo xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya iyo sidii kor loogu qaadi lahaa waxtarka taageerada Qarammada Midoobay ay ka geysato ilaalinta iyo taabagelinta xuquuqda aadanaha;

3. *Waxay kaloo go'aamiyeen* in saraakiil heer-sare ah oo ka socda Dawladda Federaalka ku Meelgaarka iyo wakiillo heer-sare ah oo ka socda Midowga Afrika ay ka qaybgalaan wadahadalka fool-ka-foolka ah;

4. *Codsanayaan* in Xafiiska Ergayga Sare uu bixiyo taageerada loo baahan yahay si wadahadalka fool-ka-foolka ah loo qabto;

5. *Ku dhiirrigelinayaan* xeeldheeraha madaxabannaan iyo Ergayga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud inay si joogto ah isula falanqeeyaan arrimihii loo soo xilsaaray oo ay ka midka yihii iskuxirista ilaalinta iyo taabbagelinta xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya gudeheeda, ku bixinta waqtiga haboon gargaarka bani'aadamnimo ee aadka loogu baahan yahay, horumarinta iyo taageerada loo baahan yahay si loo xaqiijiyo nabadgelyo waarta oo horseedda xal siyaasadeed oo dalka oo dhan ka hirgala."

*Kulanka 36aad*

*18 June 2010*

## V. GOLAHA XUQUUQDA AADNAHA

A/HRC/RES/15/28

15/28. Ka taageeridda Soomaaliya dhinaca xuquuqda aadanaha

Kalfadhiga shan iyo tobnaad

Arrinta miiska saaran 10

*Raacaya* Gogoldhigga Qarammada Midoobay iyo Baaqa Callamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha, Gogoldhigga Xuquuqda Aadanaha iyo Dadweynaha ee Afrika iyo heshiisyada la halmaala ee xuquuqda aadanaha,

*Garowsan* in nabadda iyo ammaanka, horumarka iyo xuquuqda aadanuhu ay yihiin tiirarka nidaamka Qarammada Midoobay,

*Dib u adkeynaya xaqdhowrka* dawladnimada, dhowrsanaanta xudduudda, madaxbannaanida siyaasadeed iyo midnimada Soomaaliya,

*Dib u eegaya* dhammaan go'aammadoodii hore ee la xiriiray xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya iyo go'aankooda 14/119 ee 18 June 2010,

*Sidoo kale dib u eegaya* go'aannadoodii 5/1 ee la xiriiray dhisidda haya'daha oo ka soo baxay Golaha Xuquuqda Aadanaha iyo 5/2 ee ku saabsanaa astaamaha anshaxa ee xil qaadayaasha dacwooyinka gaarka ah oo golaha ka soo baxay 18 June 2007, oo adkeynaya in xil qaaduhu uu/ay xilkiisa/eeda u gutaan sida ay dhigayaan go'aannadaas iyo lifaaqyada ku lammaan,

*Soo dhoweynaya* dhiirranaanta iyo dadaallada ay muujiyeen Midowga Afrika si ay u taageeraan dadaallada Soomaalidu hoggaamineyso ee lagu raadinayo dib-u-heshiisiinta iyo xasilloonida iyo dadaallada ay beesha caalamka iyo daneeyayaasha gobalkuba ay Somaaliya uga gargaarayaan sidii ay nabad, xasillooni iyo ammaan buuxa ugu soo dabbaali lahayd geyigeeda qaran,

*Sidoo kale soo dhoweynaya* go'aankii Golaha Nabadda iyo Ammaanka ay ka qaateen warbixintii xaaladda nabadda iyo ammaanka ee Afrika ee ay Jamciyadda Midowga Afrika ku qaateen kalfadhigoodii caadiga ahaa ee shan iyo tobnaad ee lagu qabtay Kampala 25 ilaa 27 July 2010, isla markaana garowsanaya gacan ka geysashada fiican ee Hawlgallada Midowga Afrika ee Soomaaliya, si gaar ah dalalka ciidammada ku deeqay,

*Dib u adkeynaya* tallaabooyinka ay qaadday Dawladda Federaalka ku Meelgaarka iyo qaran-hoosaadyadeeda,

*Dhaleeceynaya* weerarrada argagixisada ee foosha xun ee ka dhacay Kampala 11kii July 2010 loona geystay rayid aan wax danbi ah gelin oo daawanayay ciyaartii kama dambeysta ahayd ee Koobka Adduunka ee ay soo qabanqaabiyeen xiriirka caalamiga ah ee kubadda cagta,

*Si aad ah uga walaacsan* raadka xun ee ay dhibaatooyinka bani'aadamnimo iyo kuwa siyaasadeed ku yeesheen ka faaiideysiga xuquuqda aadanaha, oo ay ku jiraan xuquuqda rayid, siyaasadeed, dhaqaale, bulsho iyo dhaqan iyo xaqa horumarka,

*Adkeynaya* baahida loo qabo in xididdada loo siibo sababaha iyo raadadaka dhibaatooyinka daba dheeraaday ee bulsho-dhaqaale iyo tan siyaasadeed, oo ay ku jiraan tirada sii badaneysa ee barakacayaasha iyo qaxootiga dalalka dersika jooga, tahriibinta dadka iyo burcad-badeednimada,

*Carrabka ku adkeynaya* in mas'uuliyadda koowaad ee ilaalinta iyo taabbagelinta xuquuqda aadanuhu ay dusha ka saaran tahay madaxda Soomaalida,

*Ku celcelinaya* in gargaarka bani'aadamnimo, kan xuquuqda aadanaha iyo kan horumarineedba ay lamahuraan u yihiin hoos u dhigidda saboolnimada iyo taabbagelinta bulsho Soomaaliyeed oo nabadgelyo, xasillooni, caddaalad iyo dimuqraadiyad ku naalloota,

1. *Waxay muujinayaan walaaca ballaaran ee ay ka qabaan* raadka xun ee xasillooni darrada dabada dheeraatay ee Soomaaliya ay ku heyso dalalka deriska ah iyo ka sii fogba;

2. *Waxay muujinayaan walaaca ballaaran ee ay ka qabaan* waxyeellada tirada badan ee dadka rayidka ah ka soo gaareysa colaadaha aan dhammaadka laheyn, weerarrada joogtada ah ee lagu hayo xoogagga nabad ilaaliyayaasha iyo hawlwadeennada gargaarka bani'aadamnimada, iyo qorashada, tababarista iyo ka qaybgelinta colaadaha ee carruurta;

3. *Waxay sidoo kale muujinayaan walaaca ballaaran ee ay ka qabaan* xaaladda murugada leh ee ay ku jiraan dadka barakacayaasha ah iyo kuwa qaxootiga ah iyo barakaca xoogga leh ee ka dhashay colaadda jirta iyo xadgudubyada loo geysanayo xuquuqda aadanaha iyo sharciyada caalamiga ah ee bani'aadamnimada;

4. *Waxay ku guubaabinayaan* dhinacyada is haya oo dhammi inay ka waantoobaan dhammaan falalka rabshadaha ee lagu waxyeelleynayo dadka rayidka ah oo ay si firfircoon uga hortagaan ku xadgudubka xuquuqda aadanaha oo ay furaan marimmo aan wax xannibaad ah lahayn oo la mariyo gargaarka bani'aadamnimo ee loo wado dadka dhibaatada aadka ugu nugul, gaar ahaan carruurta iyo haweenka;

5. *Waxay si adag u dhaleecaynayaan* weerarrada iyo falalka kale ee rabshadaha wata ee ay kooxaha argagaxisadu, gaar ahaan Al-Shabab, kula kacayaan Dawladda Federaalka ku Meelgaarka, dadweynaha Soomaaliyeed iyo Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya, waxay kaloo dhaleecaynayaan la wareegidda joogtada ah ee Al-Shabab iyo xulafadeedu la wareegeen dhawr xarumood oo warbaahin, gaar ahaan kuwa Muqdisho ku yaal;

6. *Waxay soo dhoweynayaan* bayaankii dhowaan uu soo saaray Wakiilka Gaarka ah ee Soomaaliya u qaabbilsan Xoghayaha Guud, ee ka hadlayay xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya, ku dhawaaqidda dib ugu soo noqoshada Qarammada Midoobay ee Soomaaliya;

7. *Waxay garowsan yihiin* baaqa ay IGAD iyo Midowga Afrika ku baaqeen in la kordhiyo ciidammada Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya ka dib is miidaamintii ka dhacday Kampala lagu laayay dadkii rayidka ahaa ee aan waxba galabsan;

8. *Waxay ku guubaabinayaan* Dawladda Federaalka ku Meelgaarka, Dawladaha Xubnaha ah, daneeyayaasha iyo dhammaan beesha caalamkaba inay sii wadaan go'doominta oo ay ka qaadaan tallaabooyinka loo baahan yahay dadka iyo kooxaha ay falalkoodu halis ku yihiin nabadda, ammaanka iyo xasilloonida Soomaaliya iyo gobolka oo dhan, oo ay ku jiraan kuwa ku kacay falal argagixiso, iyadoo la hubinayo in tallaabo kasta oo looga hortagayo argagixisku ay waafaqsan tahay sharciyada caalamiga ah;

9. *Waxay ku guubaabinayaan* beesha caalamku inay ka soo baxdo ballanqaadyadoodii ku aaddanaa bixinta taageero dhaqaale iyo mid farsamo si loogu suurogeliyo unugyada ay arrintaani khuseyso inay gacan ka geystaan dadaallada lagu raadinayo xasilloonida, cusbooneysiinta iyo dib-u-dhiska wixii karaankooda ah;

10. *Waxay ugu baaqayaan* Xafiiska Ergayga Sare ee Qarammada Midoobay u qaabilsan Xuquuqda Aadanuhu inuu oggolaado codsi kasta oo Soomaaliya ay taageero ku weydiisaneyso

Sanduuqa Ammaanada ee Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalamiga ah, waxayna daneenayaasha oo dhan ka codsanayaan inay qaadaan tallaabo kasta oo haboon si Xukuumadda Soomaaliya looga caawiyo diyaarinta ay diyaarineyso Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalamiga ah ee xilliga soo socda oo ku beegan May 2011;

11. *Waxay ka codsanayaan* Dawladaha Xubnaha ah, haya'daha Qarammada Midoobay ee arrintaani ay khuseyso iyo daneeyayaashu inay Xukuumadda Soomaaliya u fidiyaan taageerada farsamo ee ay aadka ugu baahan tahay si ay kor ugu qaaddo wadashaqaynta ay la leedahay haya'daha kala duwan ee Qarammada Midoobay, waxayna ugu baaqayaan haya'daha Qarammada Midoobay inay haya'daha Qarammada Midoobay inay ixtiraam dheeraad ah siiyaan haya'daha Soomaaliyeed ee heer qaran iyo heer gobolba leh, kuwa dalka guihiisa jooga iyo kuwa dibad joogta ahba;

12. *Waxay ku guubaabinayaan* dhammaan dhinacyada Soomaaliya inay diidaan oo joojiyaan dhammaan falalka rabshadaha, ay ka waantoobaan ka shaqeynta colaadaha, ka hor tagaan fal kasta oo laga yaabo inuu xiisad kiciyo oo ay si buuxda u xaqdhowaraan waajibaadka ka saaran sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanahan iyo sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada;

13. *Waxay ku guubaabinayaan* xil-qaadayaasha hadda jira ee ay ka midka yihiin xeeldheeraha madaxabannaan ee xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya, Wakiilka Gaarka ah ee Xoghayaha Guud u qaabbilsan Soomaaliya, haya'daha iyo barnaamijyada la halmaala iyo weliba madaxda Soomaaliyeed ee heer qaran iyo heer gobolba leh, inay si buuxda uga wadashaqeeyaan oo isaga kaashadaan sidii ay u dejin lahaayeen geeddi-socod waara oo summado cadcad leh, kaasoo waafaqsan go'aammada Golaha ee 10/32 ee 27 March 2009 iyo 12/26 ee 2 October 2009, si Soomaaliya loogu hoggaamiyo waddadii ku waarista nabadda ee keenaysay in si dhab ah xuquuqda aadanaha loo ilaaliyo oo loo taabbageliyo;

14. *Waxay ugu yeerayaan* dhammaan daneeyayaasha inay Soomaaliya ka caawiyaan sidii ay u sameysan lahayd geeddi-socod summado leh si loogu kuurgalo hawlaha dalka gudihiisa ka socda oo warbixin joogto ah Golaha loogu soo gudbiyo;

15. Waxay go'aansadeen inay muddo hal sano u cusboonaysiiyaan xilka xeeldheeraha madaxabannaan, iyadoo ujeeddadu tahay kordhinta taageerada farsamo ee Soomaaliya laga siinayo dhinaca xuquuqda aadanaha, si loo gacan qabto dadaallada ay Dawladda Federaalka ku Meelgaarka iyo madaxda gobolladeedu ugu jiraan xaqdhowrka xuquuqda aadanaha iyo xoojinta nidaamka xuquuqda aadanaha iyo dadaalka ay ugu jirto dhammeystirka hawlihii ka haray ballanqaadyadii xilliga kala-guurka, waxayna xeeldheeraha madaxabannaan ka codsanayaan inuu kalfadhiga Golaha ee siddeed iyo tobnaad u soo gudbiyo warbixin uu kaga hadlayo xaaladda xuquuqda aadanaha iyo heerka ay mareyso hirgelinta iskaashiga farsamo ee gudaha Soomaaliya;

16. *Waxay ku guubaabinayaan* Xafiiska Ergeyga Sare inuu bixiyo taageerada farsamo iyo tababarrada loo baahan yahay.

*Kulanka 34aad*

*1 October 2010*

# VI. GOLAHA XUQUUQDA AADANAHA

A/HRC/17/L.14

Taageerada farsamada iyo karti bilidda

Nigeria (oo ka joogta Kooxda Afrika): go'aan qabyo ah

17/… Ka taageeridda Soomaaliya dhinaca xuquuqda aadanaha

Kalfadhiga toddobo iyo tobnaad

Arrinta miiska saaran 10

*Golaha Xuquuqda aadanuhu iyagoo*,

*Raacaya* Gogoldhigga Qarammada Midoobay iyo Baaqa Callamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha,

*Garowsan* in nabadda iyo ammaanka, horumarka iyo xuquuqda aadanuhu ay yihiin tiirarka nidaamka Qarammada Midoobay,

*Dib u adkeynaya xaqdhowrka* dawladnimada, dhowrsanaanta xudduudda, madaxbannaanida siyaasadeed iyo midnimada Soomaaliya,

*Dib u eegaya* go'aannadoodii 5/1 iyo 5/2 ee 18 June 2007,

*Dib u eegaya* go'aammadoodii hore ee la xiriiray xaaladda xuquuqda xadanaha ee Soomaaliya iyo go'aankooda 14/119 ee 18 June 2010,

*Garowsan* dhiirranaanta iyo dadaallada ay muujiyeen Midowga Afrika, gaar ahaan Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM), si ay u taageeraan dadaallada lagu raadinayo nabadda, dib-u-heshiisiinta iyo xasilloonida iyo dadaallada ay beesha caalamka iyo daneeyayaasha gobalkuba ay Somaaliya uga gargaarayaan sidii ay nabad, xasillooni iyo ammaan buuxa ugu soo dabbaali lahayd geyigeeda qaran,

*Garowsan* ka qaybqaadashada wax ku oolka ah ee Dawladda Federaalka ku Meelgaarka (DFKMG) ee Soomaaliya iyo madaxda goboladeeduba ay ka qaybqaateen Dib-u-eegis Xilliyeedka Caalamiga ah (DXC) iyo go'aankeedii ahaa in ka hor dhammaadka bisha June 201, Golaha Wasiirada loo qabto kulan looga hadlayo oggolaanshaha talooyinka badan ee DXC,

*Si fog uga walaacsan* kor u kaca daran eek u yimid carruurta da'doodu 5 sano ka yar tahay eek u dhaawacmaya Muqdisho laga soo bilaabo May 2011,

*Maskaxda ku haya* caqabadaha aan horay loo arag ee DFKMG heer qaran iyo heer gobolba kaga timid hirgelinta talooyinkii DXC, iyo siday u muujisay inay u baahan tahay taageero farsamo oo dheeraad ah iyo iskaashi uga yimaada Xafiiska Ergayga Sare ee Qarammada Midoobay u qaabilsan Xuquuqda Aadanaha iyo dalkii kasta oo kale oo daneynaya oo ay ku jiraan kaalinta

Xeeldheeraha Madaxabannaan ee xaaladda xuquuqda aadanaha Soomaaliya iyo la Taliyaha Madaxabannaan ee diyaarinta warbixinta DXC,

1. *Waxay walaaca ballaaran ka muujinayaan* xaaladda xuquuqda aadanaha iyo tan bani'aadamnimo ee Soomaaliya;

2. *Waxay xoog u dhaleecaynayaan* oo ku baaqayaan in si degdeg ah loo joojiyo xadgudubyada murugada leh ee is dabajoogga ah oo Al Shabab iyo xulufadoodu u geysanayaan dadka rayidka ah;

3. *Waxay ugu baaqayaan* Soomaaliya inay gudato waajibaadka ka saaran xuquuqda aadanaha caalamiga ah iyo sharciyada caalamiga ah ee bani'aadamnimada;

4. *Waxay ku guubaabinayaan* dhinacyada oo dhan inay gacan ka geystaan in xannibaadaha laga qaado marimmada bani'aadamnimada oo ay furaan marimmada iyo goobaha bani'aadamnimada;

5. *Waxay ugu baaqayaan* DFKMG oo ku guubaabinayaan AMISOM in iyagoo taageero ka helaya beesha caalamka ay ciidammadooda ammaanka siiyaan tababarro la xiriira xuquuqda aadanaha caalamiga ah iyo sharciyada caalamiga ah ee bani'aadamnimada;

6. *Waxay ku dhiirrigelinayaan* DFKMG iyo madax goboleedyadeedaba inay tixgelin fiican siiyaan talooyinka ay u soo jeediyeen Koox Hawleedka DXC ayna hirgeliyaan kuwa ay taageersan;

7. *Waxay go'aansadeen* inay muddo hal sano u cusboonaysiiyaan xilka xeeldheeraha madaxabannaan, iyadoo ujeeddadu tahay kordhinta taageerada farsamo ee Soomaaliya laga siinayo dhinaca xuquuqda aadanaha, si loo gacan qabto dadaallada ay Dawladda Federaalka ku Meelgaarka iyo madaxda gobolladeedu ugu jiraan xaqdhowrka xuquuqda aadanaha iyo xoojinta nidaamka xuquuqda aadanaha iyo dadaalka ay ugu jirto dhammeystirka hawlihii ka haray ballanqaadyadii xilliga kala-guurka, waxayna xeeldheeraha madaxabannaan ka codsanayaan inuu kalfadhiga Golaha ee kow iyo labaatanaad u soo gudbiyo warbixin uu kaga hadlayo xaaladda xuquuqda aadanaha iyo heerka ay mareyso hirgelinta iskaashiga farsamo ee gudaha Soomaaliya;

8. *Waxay ka codsanayaan* Xafiiska Ergayga Sare ee Qarammada Midoobay u qaabilsan Xuquuqda Aadanuhu inuu kordhiyo taageerada farsamo ee uu siiyo DFKMG iyo madax goboleedyadeeda oo ay ku jirto taageerada uu u mariyo la taliyaha madaxabannaan ee Xafiiska Ergayga Sare ka socda, si ay dawladdu uga soo jawaabto oo u hirgeliso talooyinkii DXC ee Soomaliya ay oggolaatay;

9. *Waxay ka codsanayaan* Xafiiska Ergayga Sare ee Qarammada Midoobay u qaabilsan Xuquuqda Aadanuhu inuu u fidiyo xeeldheeraha madaxabannaan dhammaan taageerada shaqaale, farsamo iyo dhaqaale ee uu u baahn yahay si uu xilkiisa u guto;

10. *Waxay go'aamiyeen* in arrinta ay iyagu la wareegaan.